IRRIDAHA GUUSHA (4)



Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

XOGTA SHAKHSIGA:-

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

BUUGGA IRRIDAHA GUUSHA {4}

QORAAGA BUUGGA

CUMAR SH.C/LAAHI CAWED (HONG-KONG)

XUQUUQDA DAABACAADDA BUUGGANI WAY SUGANTAHAY, WAXAANA DAABICI KARA CIDDA AY KHUSAYSO OO KELIYA, BUUGGANNA LAMA DAABICI KARO, LAMA BADIN KARO, LAMA TURJUMI KARO, QAYB KAMID AHNA LAMA SAWIRAN KARO IYADA OO AAN WAX OGOLAANSHO AH LAGA HAYSAN QORAAGA BUUGGA.

KALA XIDHIIDH QORAAGA BUUGGA

EMAIL:CUMARCABDILAAHI94@GMAIL.COM

MOBILE:- 063-4377671 AMA 065-4377671

FACEBOOK:- CUMAR HONG-KONG

NOVEMBER-2026, HARGEYSA-SOOMAALILAND

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MAHADNAQ

Ugu horrayn waxa mahad oo dhami ay usugnaatay **ALLAH swt,** inoo suurto geliyay dhammaystirka hawshan ballaadhan ee qoritaanka buuggan **IRRIDAHA GUUSHA 4.**

Waxa kale oo aan si gaar ah ugu mahad-naqayaa waalidkay, sababna u ah in aan maanta soo gaadho halkan iyada ah, sidoo kale waxa mahad gaar ah leh xaaskayga Allah swt iihadiyeeyay, **SAMIIRA AXMED XIRSI,** dedaalka la taabankaro iyo dhiirigelinta ay ila-garabtaagnayd min-bilawgii hawshan iyada ah illaa dhammaystirkeedii, iyada oo ku hawl-gelaysay niyad-sami iyo garab-istaag.

Waxa kale oo aan halkan ku xusayaa uguna mahad-celinayaa Qoraa/Abwaan:- **CABDIRISAAQ MAXAMMED CABDILAAHI (ODAY),** ahna macallinkaygii, oo aan uga mahad-celinaayo doorkii talo-bixineed, dhiirigelineed iyo gacan ka gaysashadii soosaarista buuggan, iyo sidoo kale **RIDWAAN MAXAMED CABDILAAHI,** oo aan uga mahad-naqaayo garab-istaaggiisii aan hagrashada lahayn ee soosaarista buuggan.

Ugu dambayn waxa aan mahad-naq lamid ah kuwa hore ugudbinayaa dhammaan shakhsiyaadka si dadban iyo si toos ahba uga qayb-qaatay marxaladihii kala du-duwanaa ee uu soo maray diyaarinta iyo dhammaystirka buuggan**.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

HORDHACA BUUGGA

Sida aynu wada ognahay ama aynu kawada war qabno, tan iyo bilawgii qarnigan 21aad, illaa iyo dhammaadkii qarnigii 20aad, waxa dunidan ama caalamkan aynu ku noolahay kusoo kordhay ama kusoo biiray wax loo yaqaanno baraha bulshada (social media), kuwaas oo ay isticmaalaan dhammaan jiilasha kala ged-geddisan ee bulshadu, yar iyo waynba.

Sidoo kale waxa isticmaala dhammaan qaybaha kala duwan ee ay ka koobantahay bulshadu, sida:- Dhallinyaro, Siyaasiyiin, Aqoonyahan, Culimo-awdiin, Cuqaal, Salaadiin, Weriyayaal, Abwaanno, Dhakaatiir, Macallimiin, Barayaal sare, Madaxwaynayaal iwm, kuwaas oo mid-kasta oo ka mid ahi uu kusoo gudbiyo ama kusoo bandhigo waxyaabaha uu jecelyahay ama xiiseeyo, sida:- wararka ciyaaraha, wararka caalamka, xikaayaadka ama sheekooyinka yar-yar ee qosol-qosolka ah, qissaska diiniga, jacaylka ama qubanaha ah, hadday yihiin kuwo hore udhacay, kuwo dhowaan dhacay ama hadda dhacaayaba, waxyaabaha la xidhiidha dhaqanka, waxyaabaha khuseeya siyaasadda, halxidhaalayaasha iwm.

Haddaba aniga (ururiyaha buugga) oo ka mid ah bulshada isticmaasha kuna xidhan barahaas bulshada, siiba barta **face-book**, kana duulaya halku-dhigga ah:- in baraha bulshadu ay yihiin mindi labo af-leh (xumaan & samaan), kana mid ah dadka wax ka dhex kaydiya, kuna dhex kaydiya bartan iyada ah, ayaa waxa aan inbadan kudhex arkay bartan Qisooyin iyo Maqaallo fara-badan oo runtii aad iisoo jiitay, iina xiiso geliyay, xikmad iyo macne qoto-dheerna ku fadhiya, si dareen lehna

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

uga hadlaaya una taabanaaya waaqaca nolosha aadamaha, kuwaas oo ay qoreen aqoonyahan fara-badan oo rag iyo haweenba leh oo ku xidhan, kuna taxan bartan.

Kuwaas oo sababay in aan ku hammiyo in haddii aan ka dhex sameeyo bartan iyada ah baadhitaan, raadin iyo baadigoob khuseeya qisooyinka iyo maqaallada ay qoreen dadka aqoonyahanka ahi ee ku xidhan bartan, kuwaas oo ah qisooyinka iyo maqaallada muhiimka iyo waxku'oolka ah, taabanayana kana hadlaaya waaqaca nolosha aadamaha, ka dibna aan isu keeno, ururiyo, habeeyo, anna aan kuladho, kubiiriyo ama kudaro wixii aan raacin karo ama ku kabi karo, aan ka samayn karo buug wayn oo wax-ku'ool ah, kaas oo wax badan kusoo kordhin kara anficina kara bulshadan aan la noolahay iyo bulshada caalamkaba.

Fikraddaas oo kama dambaystii intaan ku qancay aan ku dhaqaaqay, hirgeliyayna, taas oo dedaal dheer, baadigoob, raadin, isukeenid, ururin, kalashaandhayn, kalasaarid iyo habayn dheer kadib natiijadii kasoo baxday ay noqotay/tahayna buugaagtan taxanaha ah ee lamagac baxay **IRRIDAHA GUUSHA,** haddana akhriste aad akhriyayso taxanihii afraad ama buuggii afraad ee **IRRIDAHA GUUSHA 4.**

Sababta ay buugaagtani magacaas uqaateenna akhriste waxa aad ogaan doontaa, fahmina doontaa marka aad dhex gasho buugaagtan iyaga ah, akhridona waxa ku qoran ee ay ka hadlayaan!!!.

Haddaba buuggan **IRRIDAHA GUUSHA 4** waxa uu ka koobanyahay **boqol iyo labaatan (120) qisso iyo saddex (3) maqaal**, marka aan leeyahay qissona,

IRRIDAHA GUUSHA (4)

qissasku waxa ay u kala baxaan kuwo male-awaal ama dad-samee ah (fiction stories) iyo kuwo dhab ah , dhacayna (fact history), kana dhacay koonkan/caalamkan aynu ku noolahay korkiisa/dushiisa, markay sidaa tahayna dhammaan boqol iyo labaatanka (120) qisso ee ku jira buuggani waa kuwo dhab ah, dhacayna (fact history), kana dhacay meelo kala du-duwan oo ka mid ah koonkan/caalamkan aynu ku noolahay korkiisa/dushiisa, waana qissas dhammaan mid kasta oo kamid ahi ay si dareen leh utaabanayso ugana hadlayso waaqaca nolosha aadamaha.

Sidoo kale aniga (ururiyaha buugga) oo kaduulaaya kala duwanaanta xagga xiisaynta ee aadamaha ayaa buuggan waxa aan ukala jebiyay uuna ukala qaybsanyahay una kala xidhanyahay saddex (3) qaybood oo kala ah:-

- **Qaybta koowaad:- qissas diini ah, labaatan (20) qisso.**
- **Qaybta labaad:- qissas jacayl ah labaatan (20) qisso.**
- **Qaybta saddexaad:- qissas qubane ah siddeetan (80) qisso.**

Halka saddexda (3) maqaalna ay kayihiin kuwo kala raacsan saddexda qaybood ee ay u kala qaybsanyihiin qissasku, taas oo mid kastaaba uu ka hadlaayo mawduuc ku saabsan qaybta uu raacsanyahay, soona xidhaayo, soona geba-gebaynaayo, soona af-meeraayo qaybtiisa.

Qisso kasta oo ku jirta buugganina waxa ay leedahay duluc, gun & gebo-gebo iyo cashar laga baranaayo, taas oo qofka akhristaha ah usoo koobaysa nuxurka iyo gobo'da ay ku fadhido qissadani uu wakhtiga badan soo akhriyayay, taas oo dhawrka sadar ee udambeeya qisso kastaana uu ka hadlaayo arrintaa iyada ah!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Sidoo kale aniga (ururiyaha buugga) oo kaduulaaya qodobka ah in sawirku uu soo dhaweeyo fahamka aadamaha, ayaa waxa aan ku dedaalay in bar-bilawga qisso iyo maqaal kastaba aan dhigo sawir ku habboon, oo soodhawaynaaya fahamka qofka akhristaha ah, taas oo Allah swt igu guuleeyay, aanaan ku guulaystay!!!.

Si kastaba ha ahaatee, waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in qof kasta oo akhriya, ha ugu yaraato hal qisso ama maqaal'e uu noloshiisa saamayn ku yeelan doono, saamayna doono!!!.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in qof kasta oo leh han, hammi, himilo, hiigsi iyo hadaf, kaas oo akhriya, fahmana buuggan, Allah-na swt talo saarta, uu ku guulaysandoono himiladiisa iyo riyadiisa, (haddii Allaha awoodda lihi idmo)!!!.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qof kasta oo akhriya da'da uu doono ha ahaadee dhabanka iyo gacantu ay inbadan isku daali doonaan, iskuna sawirmi doonaan!!!.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qofkasta oo akhriya mar, laba, saddex iyo inkabadanba aanu ka xiiso goyn-doonin akhrintiisa iyo ku noq-noqoshadiisa!!!.

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay qof kasta oo akhriya ugu yaraan hal sadar oo kamid ah uu guntiga u adkaysan doono sidii uu buuggan uwada akhriyi lahaa una dhammayn lahaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Waa buug aan aaminsanahay kuna qanacsanahay in uu qof kasta da'da uu doono iyo marxaladda uu doono haku jiree ka kafayn karo baahidiisa akhris, waayo haddii uu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska diiniga ah waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska diiniga ah, haddii uu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska jacaylka ah waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska jacaylka ah, sidaa si lamid ahna hadduu xiiseeyo ama jecelyahay qissaska ka hadlaaya waaqaca guud ee noloshana waxa uu booqanayaa buugga qaybtiisa qissaska qubanaha ah.

Guntii iyo geba-gebadii in kasta oo aan dedaal iyo daacadnimo ugu ban-baxay arrintan iyada ah (qoraalka buuggan), haddana aadmiga qallooc iyo wax lagu qoonsado lama waayo, gefkana waxa aan u ahay bani-aadam, haddaba wixii uu buuggani gol-daloolo yeesho, akhristayaasha buugganina ay dareemaan, ugu horrayn waxaan ucaddaynayaa in aanay ahayn wax aan ubadheedhay, una sugnaatay shaydaan iyo ehelkii, iyagana waxa aan si kal iyo laab ah uga codsanayaa in ay igalasoo xidhiidhaan, iigunasoo gudbiyaan wixii talo, tusaale iyo iin uu buuggani leeyahayba ah ciwaanada iyo telifoonada ku lifaaqan bogagga hore ee buugga, si aannu ugu dedaalno wixii gol-daloolo ah ee aannu isla fahamno, islana afgaranno, aanay ugusoo bixin daabacaadaha dambe ee buugga, kuwa horena intii aanu kaqaban-karno aanu kaqabanno.

FG:- BUUGGANI WAA BUUG TAXANE AH, QAYBTANINA WAA QAYBTII AFRAAD.

AKHRIS WACAN:-

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

TUSMADA BUUGGA

Q: KOOWAAD, QISOOYIN DIINI AH:-

1) Itus aan arkee!!!----------17
2) Wiilkaaga ayaan ku gubayaa!!!----------19
3) Culayka miisaanka mas'uuliyadda!!!----------21
4) Cadaaladdii Cumar binu-khaddaab!!!----------22
5) Allow xaqa nagaransii!!!----------24
6) Sadaqadda iyo sirta ku duugan!!!----------25
7) Aniga, maya!!!----------27
8) Kudayo kuwa mudan kudayasho!!!----------30
9) Dadka wanaag usamee aad hanatid quluubtoodee!!!----------31
10) Waynu ka aar-gudanaynaa!!!----------33
11) Aqoontu waa mid kaa caawinaysa garashada xaqa!!!----------35
12) Maxaa ka wanaag-badan Islaamka!!!----------37
13) Wehelkaygu waa Allah swt!!!----------39
14) Laba daqiiqo!!!----------41
15) Cajiib!!!----------44
16) Hanuunka Alle swt ayaa iska leh!!!----------47
17) Saamaynta hab-dhaqanka!!!----------49
18) Maxaad umalaynaysaa caalimiintooda!!!----------52
19) Caalimkii gefay labada su'aalood!!!----------54
20) Cilmi-baadhistii fashilantay!!!----------56

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

21) Maqaal-xasiloonida qalbiga!!!----------58

Q: LABAAD, QISOOYIN JACAYL AH:-

22) Diin-waa dhaqan!!!----------61

23) Soo dhowow!!!----------63

24) Aad ayaad umahadsantahay gacaliso!!!----------66

25) Talo-saaro Rabbi swt!!!----------68

26) Masoo noqon karaa!!!----------73

27) Waan khasaaray!!!----------77

28) Aniga ayaa ku xukuma!!!----------79

29) Nolosha adagi waxa ay soosaartaa hibadaada iyo shakhsiyaddaada!!!-81

30) Nasiib wanaagsan ayaan kuu rajaynayaa!!!----------84

31) Xaalad-waliba waa sida aad kadhigato!!!----------87

32) Kudooro Diin!!!----------88

33) Gado xubnahayga!!!----------90

34) Samirku waa furaha guusha!!!----------94

35) Saamaynta qoyska ee tignoolajiyadda casrigan!!!----------98

36) Haddaba, hoteelada qado kasoo qaad!!!----------102

37) Saw edeb uma yeelin!!!----------104

38) Jacaylku waa indho la'yahay!!!----------107

39) Samade iyo Cynthia!!!----------109

40) David iyo Heather!!!----------111

41) Caqli la imow!!!----------114

42) Maqaal-kasamir!!!----------116

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Q: SADDEXAAD, QISOOYIN QUBANE AH:-

43) Hooyo maxaad u-ooyaysaa!!!----------118

44) Allaahu akbar!!!----------121

45) Cidhibta caasi-waalidka!!!----------123

46) Jacaylka keliya ee bilaa shuruudda ah!!!----------125

47) Wiilkaygii ayaa imanaaya oo gebigiinaba idin laynaaya!!!----------127

48) Jannadu waxay taallaa cagaha hooyada hoostooda!!!----------129

49) Wejigaaga waan dhibsaday ee inna-keen!!!----------131

50) Ifur!!!----------133

51) Orod oo aad guriga illeen jannadaada ayaa kugu sugaysee!!!----------136

52) Hooyaday waa jacaylkayga!!!----------138

53) Maxaad mar-walba uga hadashaa xaqa hooyada!!!----------140

54) Allahayow caafi hooyadaa xanuunsan!!!----------142

55) Saaxiibtinimo!!!----------145

56) Hooyo laba saac kadib itoosi!!!----------147

57) Hooyo raalli ahaada!!!----------149

58) Hooyaday mise cunugayga!!!----------151

59) Aabahaa halkuu ku geeriyooday!!!----------153

60) Hal ficil ayaa udhigma malaayiin kelmadood!!!----------155

61) Saamaynta ubadka ee deegaanka qoyska!!!----------157

62) Alaab ayaa kaa dhacday!!!----------160

63) Allahayow waxa uu itusay awooddiisa, ee adna tusi awooddaada!!!---162

64) Waxa igu filan keliya cheese-burger!!!----------164

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

65) Waxa aan jeclahay in aan noqdo Saxaabi!!!----------166

66) Himilo fog yeelo!!!----------168

67) Macallin waa afar (4)!!!----------169

68) Aqooni waa diin!!!----------171

69) Mid dooro!!!----------173

70) Hooyaday awooddeedu way diciiftay!!!----------175

71) Gabadhaada iiguuri!!!----------177

72) Orod oo seexo!!!----------179

73) Hooyo iikaalay!!!----------181

74) Waa goobo lagala-socdo dareenka bulshada!!!----------183

75) Maanta waa maalintaada!!!----------185

76) Aabbe sooceli walaalkay!!!----------189

77) Nimcada iyo naxariista Alle swt isiiyay ayaan la ooyay!!!----------191

78) Mid qaado!!!----------193

79) Waa maxay qiimaha noloshu!!!----------195

80) Ubax ayaan daaqadda katuuray!!!----------197

81) Hooyo, amarka qaado!!!----------199

82) Keligeed maysan ahayn!!!----------201

83) Waxa laga yaabaa in ay wasakhi ku dhacday!!!----------203

84) Maxaanu u-adeegsanaa lacagta!!!----------205

85) Is-ururi!!!----------207

86) Waxa jirta maalin lays-kashifaayo!!!----------209

87) Noloshaada ayaaba khalad ah!!!----------212

88) Kala-maan!!!----------216

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

89) Tusaalihii taariikhda galay!!!----------218

90) Kuma ayaa weli doonaaya!!!----------220

91) Dhal-dhalaalka adduunyada!!!----------222

92) Guulayso mas'uul!!!----------224

93) Ma isleedahay isbeddel ayaa muuqda!!!----------226

94) Caqligu ha-shaqeeyo!!!----------228

95) Halkee ayaynu joognaa!!!----------230

96) Waxa aan useexday sida cunug-yar oo daallan!!!----------233

97) Qof baahan caawi!!!----------235

98) Wanaagga bilow, isagaa tarmayee!!!----------237

99) Waa noole kula mid ah!!!----------239

100) Subxaana-llaah!!!----------240

101) Yaa Allah na-hanuuni!!!----------242

102) Waad qurux-badantahay!!!----------244

103) Waxba ma arkaayo!!!----------246

104) Siyaasi lama rumaysan karo!!!----------248

105) Xaggaad katimaadeen!!!----------249

106) Way sharfeen, iyana waa lasharfay!!!----------251

107) Malahaaga wanaaji!!!----------254

108) Maanaa mindiyo lay qarshaa, laygu qali doono!!!----------256

109) Haka cabsan keliya cadawga kusoo weerara, balse lasoco saaxiibka beenta ah ee hab-kusiinaaya!!!----------258

110) Xaasid!!!----------260

111) Sadaqaddaadii waa la aqbalay!!!----------261

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

112) Cidda fahamtaaba iska-yar!!!----------264

113) Alxamdulillaah!!!----------266

114) Aqbal mas'uuliyadda ficiladaada!!!----------268

115) Hadalka xuni waxa uu sababi-karaa geeri!!!----------270

116) Hooyo, hooyo, hooyo!!!----------272

117) Kee tuug ah!!!----------274

118) Waddani ayaan ahay!!!----------276

119) Soo dhakhso!!!----------278

120) Tuug, tuug maxado!!!----------280

121) Way la go'day!!!----------282

122) Qof kasta xaqiisa sii!!!----------284

123) Maqaal-talo adiga ayaa kunool ee iyadu kuguma noola!!!----------287

124) Tixraac----------292

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)



Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Q: KOOWAAD, QISOOYIN DIINI AH:-

ITUS AAN ARKEE!!!



Xilligii Nebi Muuse (cs), waxa jiray nin reer bani-israa'iil ahaa oo Ilaahay swt mar walba caasiyi jiray, dembi iyo fisqina ku dhex jiray muddo afartan sanno ah, markaas ayaa roobkii joogsaday muddo, Nebi Muuse (cs) ayaa dadkii u yeedhay oo tujiyay salaad roob-doon ah, hase yeeshe roob lama helin, kadib Nebi Muuse (cs) Ilaahay swt ayuu waydiiyay sababta ay roobka u heli waayeen, Ilaahayna swt wuxuu ku yidhi:- waxa idinku dhex jira nin afartan sanno icaasiyayay, macsiyadiisa dartii ayaana roobkii la idinkaga mamnuucay, markaasuu Nebi Muuse (cs) Ilaahay swt ku yidhi:- maxaanu samaynaa, Ilaahayna swt wuxuu ugu jawaabay:- iska dhex saara ninkaas, markuu idinka tagona roobka waad heli doontaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Nebi Muuse (cs) reer bani-israa'iil ayuu isugu yeedhay, waxaanu ku yidhi:- waxa inagu dhex jira nin Ilaahay swt caasinayay muddo afartan sanno ah, roobkana heli mayno illaa uu inaga dhex-baxo, ninkii wuu is-gartay, muu bixin, mana tegin, laakiin Ilaahay swt ayuu baryay isagoo leh:- Ilaahayow maanta haddaan dadka ka soo dhex-baxo waan fadeexadoobayaa, haddaan sii dhex joogana harraad ayaanu u wada dhimanaynaa, Ilaahayow i-astur oo ii dambi dhaaf, adiga keliya ayaa dembiga dhaafee!!!.

Intaas kadib roobkii ayaa soo daatay, Nebi Muuse (cs) ayaana Ilaahay swt waydiiyay:- Ilaahayow roobkii waanu helnay, qofna nagama soo dhex bixin, Ilaahay swt ayaana ugu jawaabay:- roobkii wuu idiin da'ay, addoonkii i-caasiyi jirayna wuu ii-tawbad keenay, kadib Nebi Muuse (cs) Ilaahay swt ayuu ku yidhi:- Ilaahayow ninkaas i tus aan arkee, markaas ayuu Ilaahay swt ayaana ugu jawaabay:- afartan sanno isagoo icaasiyaya ayaan asturayay, ma maanta oo uu ii-tawbad keenay ayaan fadeexadeeyaa!!!.

Bal akhriste naftaada waydii immisa jeer ayuu Ilaahay swt ku asturay, ma u tawbad keentay Allihii swt ku abuuray, hadda fursad ayaad haysataa aad wixii kaa khaldamay ku sixi kartid, berri iyo hadhow ma hubtid inaad gaadhi karto, Ilaahay swt waa naxariis badane iyo dembi dhaafe ee ha hilmaamin walaal!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WIILKAAGA AYAAN KU GUBAYAA!!!



Nin kamid ahaa Asxaabta Rasuulka scw oo magaciisa la odhan-jiray Calqama ayaa waxa uu ahaa wiil salaad badan, soon badan, khayrkana ku dedaala, maalin ayuu xanuunsaday, xaaskiisii ayaa Rasuulka scw utimid una sheegtay xaaladiisa, Rasuulkuna scw wuxu udiray Bilaal iyo Asxaab kale, markay gaadheen gurigii Calqama ayayna damceen in shahaadada ay uqabtaan, lkn carrabkiisii ayaa kari waayay, Bilaal ayaa Rasuulka scw usheegay in Calqama Tawxiidkii carrabkiisu kari waayay!!!.

Rasuulku scw wuxuu yidhi:- waalidiintii manoolyihiin, Asxaabtiina waxay dheheen:- hooyadii oo duq ah ayaa nool, Rasuulku scw wuxuu yidhi:- iigu yeedha, islaantii ayaana utimid, salaantayna, Rasuulkuna scw wuxuu ku yidhi:- been haddaad ii sheegto Alle swt waxyi ayuu igusoo dejinayaa ee runta iisheeg:- kawarran

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

wiilkaaga Calqama?, waxay tidhi:- Rasuulkii Ilaahayow wiilkaygu wuxu ahaa mid salaad-badan, soon-badan, lkn waan uxanaaqsanahay!!!.

Rasuulku scw wuxuu yidhi:- maxaad ugu xanaaqsantahay?, waxayna tidhi:- Rasuulkii Allaw wiilkaygu xaaskiisii ayuu iga doortay, wuuna icaasiyay, Rasuulkuna scw wuxuu yidhi:- wallaahi wiiikaagu shahaadadii ayuu kari waayay , soon iyo salaadna waxba uma tarayaan, Bilaal xaabo ii keena, waxay tidhi:- Rasuul Allow maxaad ku falaysaa xaabada?, wuxuuna ugu jawaabay:- wiilkaaga ayaan ku gubayaa!!!.

Waxay tidhi:- Rasuul Allow wiilkaygu uma adkaysankaro eekaddaa, Rasuulkuna scw wuxuu ku yidhi:- wallaahi cadaabta Alle swt ayaa kaga kulul haddaad karaali noqon waydo, waxayna tidhi:- waan cafiyay, Rasuulkuna scw wuxuu Bilaal ku yidhi:- orod soo fiiri inuu karay Tawxiidkii, Bilaal wuu tegay markuu albaabka marayay ayuuna maqlay Calqama oo ashahaadanaaya!!!.

Bilaal wuxu yidhi:- wiilku wuxuu Tawxiidka ukari waayay hooyadiis ayaan ka raalli ahayn, naftuna way ka baxday, waa lamaydhay Rasuulkuna scw wuu ku tukaday Salaaddii Janaasada!!!.

Udhibirsanow labada waalid haddii aad nolol iskusoo gaadheen, intii awoodaada ahna gudo waajibkooda kaasaaran, Rasuulkuna scw wuxuuba inoo sheegay in ay Jannadu kujirto labada lugood ee hooyada dhexdooda!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

CULAYSKA MIISAANKA MAS'UULIYADDA!!!



Waxa la weriyay maalmo kadib markii Sayidinaa Cumar (rc) Khilaafada loo doortay in ay xaaskiisu guriga ugusoo gashay isaga oo ooyaya, maxaa kugu dhacay hadday waydiisayna waxuu ku yidhi:- waxa la ii dhiibay mas'uuliyadda umadda muslimiinta ah oo aad u culus, waxaan ka fikiray kooda faqiirka ah ee gaajaysan, agoonka, midka xanuunsan, gabdhaha raggoodii dhintay, ka arradan, duqayda jilicsan, kuwa xidhan, musaafirka sahaydu ka go'day, inta la dulmay, maaddaama Ilaahay swt iwaydiin doono, waxaana ka baqayaa inaan ka gaabiyo gudashada xilkaas!!!.

Aad iyo aad bay u kala fog yahiin Sayid Cumar (rc) iyo kuwa maanta umadda muslimiinta ah hoggaanka u ahi, **yaa Allah hoggaanka Muslimiinta iyo annagaba nawada hagaaji.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

CADAALADDII CUMAR BINU-KHADDAAB!!!



Xilligii uu Madaxwaynaha Muslimiinta ahaa Cumar binu Khaddaab ayaa nin ku noolaa magaalada Sanca ee dalka Yaman wuxuu ka safray reerkiisa, wuxuuna guriga kaga tegay xaaskiisa, adeegtada guriga iyo wiil yar oo ay ninkaas u dhashay haweenay kale, markii uu ninkeedii safray ayaa waxay haweenaydii isfahmeen nin kale oo habeenkii lasoo jiifsan jiray, waxayna iyada iyo ninkii ku heshiiyeen in ay dilaan wiilka yar ee uu ninkeedu dhalay maadaama oo ay ka baqanayaan in uu fashilo, kadibna haweenaydii, ninkii, adeegtadii iyo afar qof oo asxaabtooda kamid ah ayaa isu kaashaday dilkii wiilka, waxayna jar-jareen maydkiisa oo ay ku rideen ceel gorof ah!!!.

Baadhitaan kadib, waxa la ogaaday in dilka wiilkan ay isu kaashadeen toddobadaas qof, wuxuuna Cumar binu Khaddaab ku xukumay in toddobadoodaba

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

qisaas lagu fuliyo, wuxuuna Cumar maalinkaas yidhi kelmad caan-baxday oo ahayd:- Wallaahi haddii ay dadka ku nool magaalada Sanca oo dhan ku heshiiyaan dilka hal qof, waan u wada qisaasayaa dhammaantood!!!.

Alle ha u naxariistee Ibnu Teymiya ayaa yidhi:- nabad iyo nolol fiican way heleysaa dawlad gaalo ahi haddii ay caddaalad u samaynayso dadkeeda, balse dawlad Muslim ahi arki-mayso nabad iyo nolol fiican inta dulmiga iyo isu-xoog-sheegadku ay dhaqan u yihiin!!!.

Rajo haka qabin in aad ku naalooto nabad iyo nolol fiican inta kala sarreynta ku salaysan qabiilku iyo wixii lamid ahi ay ka jirto dalkaaga, dadka badankoodna ay ku dulmanyihiin nidaamka dawladnimo, wiilasha ka dhashay qabiilada qaarkoodna ay ogyihiin in iyaga oo udhashay waddanka aysan haddana jagooyin sare kaqaban-karin dalka!!!.

YAA ALLAH HOGAANKII FIICNAA USOO CELI UMADDA ISLAAMKA.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

ALLOW XAQA NAGARANSII!!!



Cali Binu-Abu-Daalib (rc), amiirkii muuminiinta ayaa la arkay isaga oo cunaya khubus qallalan, markaas ayaa rag saaxiibadii kamid ahi waydiiyeen:- maxaad khubuskan qallalan ucunaysaa oo aad uga dhergi wayday hantidan aad haysid, ilayn ammiirkii dhammaa ayaad tahaye?, wuxuuna ku yidhi:- uma cunayo khubuskan in hanti la'aani ay jirto, waxaanse ogaaday in dadka aan xukumo in badan oo kamid ahi ay cunaan khubuskan qallalan oo kale, sidaa daraadeed, illaa inta uu ka hagaagayo heerkooda nololeed anigu iyaga ayaan la maciishad noqonayaa, mana aha in aan dhergo, iyadoo qayb dadkayga kamid ahi ay gaajoonayso!!!.

Madaxda maanta waa sidee xaalkoodu, dadka ay xukumaana waa side xaalkoodu?, waxaad arkaysaa madax utartamaysa maalka umadda iyadoo qaar badan oo shacabkooda kamid ahina ay baahi lageeryoonayaan, **Allow xaqa na-garansii.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SADAQADDA IYO SIRTA KU DUUGAN!!!



Hooyadii Mu'miniinta Caa'isha (Allah raali haka noqdee) maalin iyada oo sooman ayaa waxa guriga kusoo garaacay qof, kadib inantii shaqaalaha u ahayd bay ku tidhi:- waa ayo?, waxayna ugu jawaabtay:- waa nin miskiina ah oo dawarsanaaya, waxay ku tidhi caa'ishi (allah raali haka noqdee) inantii:- labada xabbo ee kimista ah xabbad sii, wayna siisay inantii miskiinkii xabbaddii kimista ahayd!!!.

Waxyar kadib ayaa haddana qof kale albaabkii guriga hor yimi, sidii oo kale inantii ayay waydiisay haddana caa'ishi (rc):- waa ayo?, inantii ayaana tidhi:- waa qof kale oo dawarsanaaya, waxaana caa'ishi (rc) inantii ku tidhi:- xabbaddii labaad ee kimista ahayd ee hadhayna sii qofka dawarsanaaya, inantii ayaana ku tidhi caa'isha (rc):- waad sooman tahay maalin walbana afur la'aan ayaad

ku dhacdaa wixii yaalana waad bixisaa!, Caa'ishina (rc) waxay inantii ugu jawaabtay intay la hadashay:- adigu iskaddaa oo sii waxba ma aha'e, waxyar kadibna qofkale ayaa yimi, waa qofkii saddexaad, gurigana waxba mayaalaan qofkanna haddii uu miskiin tuugsanaya yahay!!!.

Caa'isha (rc) markanna inantii ayay ku tidhi:- waa ayo?, waxayna inantii tidhi:- waa nin wax sida, wuxuuna noqday nin addoon ah oo sida neef dhan oo shiilan oo korkana kimis badani ka saaran tahay, waxaana uu yidhi:- waxa iisoo dhiibay ehelkay iyo qoyskayga oo igu yidhi:- hooyada muuminiinta uggee waa hadyade ha ku afurtee, markaas bay caa'isha intay yara qososhay ku tidhi inantii:- ka qaad oo cun waa kimis ka khayr badan kimistaadiiye, Allah (swt) xaggiisa ayuu ka yimi oo Allah (swt) ayaa soo diraye!!!.

Bal eeg hadalkeedaa qiimaha badan iyo gacan furnaanteeda iyo siduu Allah (swt) ugu beddelay wax kabadan labadii xabbo ee kimista (Rooti ama Laxooxda) ahayd, innagana qaarkeen iyadii oo cuntadu guryaheenna ka buuxdo oo laga yaabo inay ku xumaato oo wakhtigeedu dhaco ama aynu daadino oo aynu xashiishka raacino maalin walba ayaa waxa dhacda in aynu martida iyo masaakiintaba hiifno ama wejiga uxumayno wax aynu tarnaba iska daaye!!!.

Rasuulkeennii suubanaa scw wuxuu inoo sheegay in sadaqadu wax ay kordhiso, siyaadiso ama badiso mooyaane aanay wax ay yarayso ama nusqaamisaa jirin, sidaa daraadeed kudedaal wll waxbixinta, sadaqaysiga iyo quudinta masaakiinta, kolkaas ayuu adna Allah swt meelo aanad filayn kaa arsaaqayaaye!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ANIGA, MAYA!!!



Cumar Binu Cabdi-casiis waxa lagu tilmaamaa hoggaankii 5-aad ee Islaamka, hammigiisu aad ayuu u sarreeyay meel hoosena weligiis kumuusan fikirin, hammi kasta oo uu yeeshana wuxuu ahaa shakhsi ku guulaysta, wuxuu dhihi jiray:- wax ma hammiyo illaa inaan gaadho ayaa jirta, waxaan hammiyay inaan guursado Faadumo, waan guursaday, waxaan hammiyay inaan wilaayadda Xijaas oo idil qabto, waan qabtay, waxaan hammiyay inaan hoggaanka guud ee Muslimiinta qabto, waana ku guulaystay inaan qabto, hadda waxaan haminayaa inaan Janno helo ee adduun ha igu mashquulinina aan hadafkayga gaadhee!!!.

Salaadda cishe kadib wuxuu odhan jiray ama dhihi jiray ii sheekeeya, laakiin waxaad iiga sheekaysaan oo keliya dhimashada iyo aakhiro, inta aad ila fadhidaan qof waxba haka sheegina oo ha xamanina, hana iiga sheekaynina adduunyo,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

habeen walba isaga oo cabsanaya oo aakhiro qalbiga ku haya ayuuna gurigiisa tegi jiray, markii loo doortay hoggaanka Muslimiinta in uu qabtona intuu minbarka fuulay ama koray ayuu yidhi:- aniga '**MAYA**' ee hoggaanka Muslimiinta ciddii kale ee aad rabtaan u doorta, laakiin dadkii oo dhan ayaa halmar ku qayliyay oo yidhi:- adiga ayaanu ku dooranay Cumar!!!.

Cumar Binu Cabdi-casiis Caddaalad markii laga hadlayo isaga ayaa tusaale loosoo qaataa, waxa lasoo weriyay xilligiisii in waraabaha iyo adhigu ay isku meel daaqi jireen oo xoolaha uusan cuni jirin waraabuhu, islaan waayeel ah oo miyiga ama baadiye joogta ayaana maalinkii uu dhintay Cumar waxay aragtay waraabihii oo cunaya adhigii, iyada oo aan war ka haynin dhimashada Cumar ayayna tidhi:- maanta Cumar ayaa dhintay!!!.

Muusan ku raaxaysan jirin hantida muslimiinta, Tusaale:- sida lasoo weriyo intii uusan qabanin hoggaanka guud ee Muslimiinta lacagta kasoo xaroon jirtay hantida uu gaarka u lahaa sannadkii waxay ahayd 50,000 Dirham, markii uu hoggaanka Muslimiinta qabtayna lacagta sannadkii soo gashaa waxay ahayd 200 Dirham, dawladda uu xilligaas hoggaaminayayna waxay ka talinaysay dalka Faransiiska illaa Shiinaha inta u dhaxaysa!!!.

Boqorkii xilligaas ka talinayay Magaalada Rome ee dalka Talyaaniga ayaa wuxuu yidhi:- markii uu maqlay dhimashadii Cumar Binu Cabdi-casiis:- lama yaabayo nin intuu iskusoo xidhay kaniisad yidhi:- waxaan iska dhaafayaa adduunyada, laakiin waxaan la yaabay Cumar oo hareerihiisa ay taallay adduunyo oo idil haddana indhaha ka laabtay oo iska nacay, sidoo kale wuxuu yidhi boqorkaasi

isaga oo tilmaamaya wanaaga cumar:- haddii uu jiro Ciise mooyee qof kale oo marlabaad lasoo noolaynayo wuxuu noqon lahaa Cumar!!!.

Waxa cajiib ah ninka waxaas oo taariikh ah ka tegay da'diisu markuu dhimanayay ama geeriyooday wuxuu ahaa 38 jir, adduunyada ayaa ku tebaysa Cumar, laakiin meel ka khayr badan ayuu Allah swt kuu dooray!!!.

Fadlan walaalka qisadan akhriyayow, haddii aanad Cumar binu-Cabdi-casiis oo kale noqonaynin ku dayo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

KUDAYO KUWA MUDAN KUDAYASHO!!!



Sheekh Xassan Al-Basri oo ahaa taabiciyiintii ka dambaysay Nebiga (scw), ayaa maalin waxa uyimid nin, waxaana uu waydiiyay sababta aanay adduunyadu agtiisa qiimo badan uga lahayn sirta ku jirta?, isna waxa uu ugu jawaabay:-

- Waxaan ogaaday in risqigayga cidna iga qaadan karin, markaa qalbigaygu wuu degay oo xasilay, waxaan ogaaday camalkayga inaan qof kale ii samaynaynin (Salaadda, Soonka iwm), markaa aniga ayaa ku mashquulay!!!.
- Waxaan ogaaday in Allaah (sw) i arkaayo, sidaasi darteed waxaan ka xishooday inuu macsi igu arko, waxaan ogaaday in geeri i sugayso, waxaana dedaal ugu jiraa sidaan sahay ugu diyaarsan lahaa la kulanka Rabbi swt!!!.

Kudayo kuwa mudan in lagu daydo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

DADKA WANAAG USAMEE AAD HANATID QULUUBTOODEE!!!



Muftigii hore ee Sacuudi Carabiya Sheekh Cabdul-caziiz ibnu Baaz ayaa habeen asaga oo salaatul-layl tukanaaya waxa uu maqlay jaqaf-jaqaf tuug, wuu fududeeyay salaaddii, markuu dhammeeyay ayuuna la hadlay waardiyaha uuna ku yidhi:- waxbaan maqlayaa iyo jaqaf-jaqaf, haddii la baadhayna waxa lasoo qabtay tuug guriga usoo dhacay, Sheekha ayaana loo keenay, Sheekhiina hadalkii ugu horreeyay ee uu yidhi waxa uu ahaa :- wax la cuno usoo raadiya, casho ayaana la siiyay, markuu dhergay ayaana sheekhii ku yidhi:- maxaa kugu kallifay tuuganimada iyo in aad gurigayga usoo dhacdid, wuxuuna yidhi tuuggii:- waxaan ahay faqiir u dhashay Pakistan, aabahay baana iga jirran, wax aan ku daaweeyana ma haysto, sidaas baana gurigaaga ugusoo dhacay oo wax uun aad heshid baan islahaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Sheekh ibnu Baaz wuxuu waydiiyay meesha iyo magaca dhakhtarka uu aabihii ku jiro iyo inta lacag ah ee uu ubaahanyahay, wuuna u sheegay, wuxuu amray dad Pakistan ujoogay in ay hubiyaan macluumaadka uu sheegay ninkani, waana lasoo hubiyay macluumaadkii waxayna noqdeen sax, halkaa markay marayso arrini ayaana Sheekhii wuxuu u amray lacagta uu sheegay ee tuugga aabihii lagu daawaynayay, wuxuuna ugu daray jid mar iyo weliba lacag kale oo saayida, odaygiina waa la daaweeyay!!!.

Markii odaygii caafimaaday tuuggii waxa uu kusoo laabtay Sucuudiga oo waxa uu arday u noqday Sheekh ibnu Baaz, markii uu dhintay sheekh ibnu Baaz-na aad ayuu unaxay ardaygaasi illaa sida lasoo weriyo uu suuxay!!!.

Tuuggii waxa uu isu beddelay arday diin Ilaahay swt barta, tuugaduna uma baahna jidhdil, uma baahna jiid-jiid, umana baahna xabsi ee waxa ay u baahanyihiin hagaajin iyo toosin!!!.

Dadka wanaag usamee aad hanatid quluubtoodee!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAYNU KA AAR-GUDANAYNAA!!!



Nin faqiir ahaa ayaa waxa uu ilmihiisii usoo doonay cunto, mana uu helin, isaga oo socda ayaa waxa uu maqlay sheekh masaajid dad ka wacdiyaya, khudbadda Sheekha waxa ku jirtay oo ninkii ka xifdiyay:- "qofkii ku salliya Nebigeenna scw Ilaahay swt maalkiisa barako ayuu ku dheehayaa, haddii aanu maal haysanna samada ayaa risqigu ugasoo dhacayaa", waxa uuna soo laabtay isaga oo warka sheekhu anfacay, waxa uu bilaabay in uu badinayo Salliga Xabiika scw intii uu jidka hayay illaa uu guriga ka yimaaddo, maalintii dambe ayuu ninkii baxay, markii uu wax yar socday ayuu dhagax ku kufay, dhagixii ayuu hoos u eegay, waaba jawaan uu dahab ka buuxo, in uu qaato ayuu damcay, haddana waxa uu yidhi:- Ilaahay swt samada in uu iga arsaaqo ayaan rabaa, ma u baahni jawaankan, waxa laga yaabaa in uu qof meesha ku qarsaday!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Sidii ayuu ninkii kusoo dhaafay jawaankii dahabka ahaa, xaaskiisii ayuu qisadii oo dhan uga sheekeeyay, markii uu qisada ka sheekaynayay waxa maqlayay nin yahuudi ah oo ay deris ahaayeen oo guriga ninka Muslimka ah kor saarnaa, yahuudigii waa uu orday, isaga oo abaaray halkii uu ninka Muslimka ahi ka qisaynayay, jawaankii ayuu arkay waana uu lasoo orday, markii uu guriga keenay ayuu furay, waxaaba kasoo baxay masas, abeeso iyo han-garaale, ninkii yahuudiga ahaana xaaskiisii ayuu u sheegay oo ku yidhi:- ninka Muslimka ah ee deriskeena ah xaaskiisa ayuu u sheegay in uu halkaas dahab yaalo, waxa uu ogaa in aan dhegaysanayo, waxa uu rabay in aan soo qaato oo abeesooyinka iyo masasku ay ina baabiiyaan, cadow ayuu inagu yahay, waynu ka aar gudanaynaa, gurigiisa kor ayaan ugasoo daadinayaa, si ay ugu dhintaan!!!.

Xaaskii Muslimka oo ninkii ku qaylinaysa oo dhahaysa:- waad ogtahay in aynu faqri nahay, maxaad inoogusoo qaadi wayday dahabka, ninkii Muslimka ahaana uu leeyahay:- Ilaahay swt in uu cirka inaga arsaaqo ayaynu sugaynaa Insha Allaah, ayaa yuhuudigii kor kasoo daadiyay bahalihii ku jiray jawaanka, isla markiibana ninkii iyo xaaskiisii waxa ay arkeen dahab iyo jowhar kor kasoo daadanaya, ninkiina waxa uu bilaabay mahad-naq iyo shukri uu leeyahay:- Ilaahay swt kor ayuu iga araaaqay fadliga iyo barakada Salliga Xabiibka Calayhi Salaatu Wasalaam!!!.

Salliga Xabiibku csw waa fure barakadiisa lagu helo wanaag iyo khayr oo dhan, Allahna swt uu addoomihiisa ku siiyo, shar oo dhanna uu allah swt addoomihiisa laasima kaga nabad-geliyo, kagana bad-baadiyo, **SALA-LLAAHU CALAYHI WASALLAM.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

AQOONTU WAA MID KAA CAAWINAYSA GARASHADA XAQA!!!



Waxa uu ku jiraa culumadii ugu waawaynayd qalliinka iyo uur-ku jirta, magaciisuna waa Keith Moore, waxa uuna ku islaamay aayadda Qur'aanka ah ee macnaheedu yahay**:- Iinsaankii waxa aanu ka abuurnay mid laga soo xulay dhoobo xaggeed (biyaha manida), kadibna waxa aanu kayeelnay candhuuf ku jirta makaan aamin ah, kadibna waxa aanu candhuuftii ka abuurnay xinjir, xinjirtiina waxa aanu ka abuurnay saaftin hilib ah, saaftintiina waxa aanu ka abuurnay lafo, lafihiina waxa aanu huwinay hilib, Ilaahay ayaa kor ahaaday, ah kuwa wax suureeya kan ugu wanaagsan**.

Aayadahan waxa uu Allah swt kaga hadlayaa abuurka khalqiga, sida uurka hooyada loogu abuuray ilmaha, xaaladaha kala duwan ee uu maro, iyadoo culimada

caafimaadku ka faa'iidaysteen waayo aragnimo buuxda, kalana baxeen waxyaabo badan oo khuseeya cilmiga uur-jiifka, waxaanay ku noqotay digtoorkan amakaag markuu arkay wixii looga dhigi jiray inuu gaal hebel soo helay waqti aan fogayn uu Qur'aanka Kariimku kaga horreeyay kana hadlay 1400 oo sanno kahor!, markuu xaqiiqada ogaadayna wuxuu go'aansaday inuu diinta macaan ee Islaamka qaato!!!.

Allah swt ayaa aayad kale kulahaa:- **waxa aanu aayadahayaga katusaynaa jihooyinka iyo naftooda dhexdeeda illaa uu uga caddaado in uu Qur'aanku xaq yahay**.

Cibro, wax ku qaadasho iyo casharro aad marwalba ku dabaqdid naftaada iyo kuwa kugu hareeraysanba hakuu noqdaan aayadaha Allah swt ee marwalba kamuuqda aadna kadheehan-karaysid hareerahaagu!!!.

MAXAA KA WANAAG-BADAN ISLAAMKA!!!



Polosin Ali Vyacheslav waxa uu hore u ahaa baadari ka tirsan kaniisadda Orthodox ee Russia, waxuu xubin ka ahaa baarlamaanka Russia, waxaana uu bare falsafadda iyo Culuumta Siyaasadda ah ka noqday mid kamid ah Jaamacadaha ugu caansan Dalka Ruushka.

Waraysi dheer oo uu siiyay wargayska Cukaad ee kasoo baxa Dalka Sucuudiga ayaa waxa uu usheegay in uu Diinta Islaamka galay kadib baadhitaan dheer oo uu ku sameeyay Diinta Islaamka, isaga oo sheegay in mar keliya uu ku qanci waayay Caqiidooyinkii kiristaanka ee ay Allah swt ka aaminsanyihiin, isaga oo ku xamdiyay Allah swt ku hanuuniyay xaqqa iyo Diinta Islaamka, waxaana hadalladiisii kamid ahaa:- maxaa ka wanaag-badan Islaamka, 16 sanno ayaan Diinta xaqqa ah baadhaayay, waxaana Eebe swt iwaafajiyay Diinta Islaamka, waxaana uu

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

kamid noqday xujay uu martiqaad ufidiyay Boqorka Sucuudiga oo faralka Xajka gutay!!!.

Ficilka, sababta iyo hanuunkaba Allah swt ayaa bixiya, cidduu doonona wuu siinayaa, cidduu doonona waa uu kaqadiyaa, se adigu ku dedaal raadinta iyo baadigoobka xaqqa intii aad kari-kartid, Allahna swt waydiiso kaalmaysigiisa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WEHELKAYGU WAA ALLAH SWT!!!



Qisadani waxa ay kadhacday magaalada Malmo ee dalka Sweden, waxa meel degganaa qoys haysta Diinta Kiristaanka, qoyskaasi waxay deris ahaayeen hooyo Muslim ah oo aan weligeedna waxba dhalin, hase yeeshee hooyadu waxay ahayd mid mar kasta ku dedaasha Cibaadada Rabbi swt, Salaadda iyo Digriga Allah swt aad ayay uxafidi jirtay, maalin ayaa qoyskii Kiristaanka ahaa kusoo booqdeen gurigeeda oo aanay weligood soo gelin, hooyadii waxay usoo dhowaysay si kal iyo laab ah, iyagoo ku faraxsan hooyada soodhowaynteeda ayayna guriga soo galeen!!!.

Intaas kadib ayaa Aabihii Qoyska Kiristaanka ahaa waydiiyay:- Hooyo aaway wehelkaagii (saygaagii), waxayna ugu jawaabtay:- wehelkaygu waa Allah swt, isaga ayaana garabsadaa, misana Odaygii wuxuu waydiiyay:- aaway nuurkii gurigu (carruurtii), waxayna ugu jawaabtay:- nuurkayga iyo ubadkaygu waa Kitaabka Alle

swt, isaga ayaana wehel ii ah, haddana wuxuu waydiiyay oo uu ku yidhi:- hooyo maxaad qabataa oo aad ka shaqaysaa?, waxayna ugu jawaabtay:- shaqadaydu waa Cibaadada Allah swt iyo Digrigiisa, iyada ayaana wax kasta iiga qiimo wayn!!!.

Odaygii intuu yaabay ayuu misana ku yidhi:- Allahaagu waa kee?, waxayna ku tidhi:- Allahaygu waa ka adiga ku abuuray, anigana i abuuray, waana keligii, waxna ma dhalin, isna lama dhalin, wax lamid ahina ma jiraan, wax kastana wuu ka deeqtoon yahay oo waa ka ina arsaaqa, waana ka ay awooddiisa ku dhisan tahay adduunyada oo dhami, intaas dabadeedna Odaygii iyo dhamaan qoyskiisiiba goobtii ayay ku Islaameen oo ay ku qaateen Diinta Islaamka!!!.

Allahu akbar, marka Allah swt hanuun kula doono, meel yarbuu kaa tusayaa, Diinina waa dhaqan, markasta oo aad ku toosnaato dhaqanka suuban ee islaamnimadana waa mar kasta oo aad si togan usii saamayso qalbiyada iyo quluubta bulshada kugu xeeran!!!.

IRRIDAHA GUUSHA (4)

LABA DAQIIQO!!!



Waxa aan marayay waddada, si kedis ah ayuu iiga hor-yimid, kadib wuxuu i yidhi:- ma isiin kartaa labo daqiiqo, dabcan ayaan ugu jawaabay, bal dhegahaaga geli eer-foonkan oo dhegayso, waan ka aqbalay, markaan maqlay codkiisa waan is beddelay, xaadda ayaa i kacday, ilinina way igusoo joogsatay, markaan u adkaysan waayay ayaan halmar tuuray eer-foonkii iyo moobaylkiisiiba, waxaana ku idhi:- maxaad sidan iigu samaynaysaa?, maxaadse iiga oohinaysaa?, ma sixirbaa?, noloshayda maan maqlin arrinkan oo kale, waa maxayse waxani?!!!.

Dhabtii wuu dhoola-caddeeyay, wuuna ii jawaabay, balse waan fahmi waayay, waxyaabo aanan weligay maqlin ayuu ii sheegay, waana ku wareeray hadalkiisii, illaa markii dambe aan dhahay:- waa lagusoo diree, yaa kusoo diray oo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ku yidhi:- gabadhan soo waal, wuxuu isku dayay inuu xaalka dejiyo, balse waan ka dhaqaaqay!!!.

Habeenkii markaan seexdo waan ku qarwaa, maskaxdaydana way kabixi wayday illaa mararka qaar aan is arkay anigoo ka fakaraya wixii uu iisheegayay wiilku oo dhex taagan laamiga oo baabuurtiina aan isku xanibay, ugu dambayn waxaan go'aansaday inaan raadiyo wiilkii, waxaan aaday meeshii aanu isku aragnay, balse waxaan arkay wiilkii oo lagu dheganyahay, kuna dhegantahay maamo waayeel ahi, waxayna dhahaysaa isla ereyadii aan dhahayay, maxaad igu samaysay?, maxaadse iiga oohinaysaa, aad ayaan ula yaabay, maamadii wuu qanciyay iyadoo raali ah ayayna tagtay!!!.

Aad ayaan uga cadhooday arrinkaas, waan qabsaday kuna dhahay:- isla ereyadii aan ku dhahayay ayay ku dhahaysaa, waadna qancisay, balse aniga maadan iqancinin, waad isii waashay, sabab?, miyay iga heer sarraysaa?, hadaad ku ixtiraamayso waayeel-nimo anigana igu ixtiraam dhalinyar-nimadayda, wuxuu yidhi:- iyadu waxoogaa waxbay fahamsantahay, keliya qof wax u bidhaamiya ayay rabtay, hagaag maxaa xal ah, maalinkii illaa iyo hadda maskaxdayda ayaad qabsatay waxaana kuugu imiday labo arrin midkood inaad samayso hadba kii kuu fudud ayaan dhahay, soodaa ayuuna igu yidhi!!!.

Waa midda ugu horraysee inaad iqanciso illeen maskaxdayda tashwiish ayaad ku furtaye, tan xigta isku day inaad ka saarto maskaxdayda wixii aad maalintii imaqashiisay, kuna soo celi maskaxdayda sidii markii hore ay ii ahayd, wuxuu igu yidhi:- iisheeg telkaaga waxaan ku ballamin maalin, kuna fahamsiin waxaan ku

maqashiiyay, waan usheegay, waxaanuna isku nimaadnay maalintii, wuxuu bilaabay inuu ii sharraxo tusaalooyin badan oo uu iisheego si uu fahamkaygu usoo dhawaado, hadal kastana caddayntiisii ayuu itusinayay illaa markii dambe aan qancay, waxaana dhahay:- diyaar ayaan u ahay inaan is dhiibo adigana ku raaco!!!.

Waxaan soo galay Diinta Islaamka, waxaana ka codsaday inaanu is-guursanno, wuuna iga aqbalay, haddana runtii waan lawadaa dacwaddii ahayd labo daqiiqo ma isiin kartaa, maalintii wuxuu dhagaha ii geliyayna waxay ahayd Qur'aanka Kariimka, Suuratu al-Qaarica, taasoo beddeshay noloshayda illaa aan ka Islaamo, haddana waxaanu nahay lammaane daaciyiin ah!!!.

Gaadhsii intii aad karto, kana qayb-qaado fidinta dacwadda Islaamka, gudona waajib faral ah, intii uu Rabbi swt hanuun ladoono ayuunbaana ku hanuunaysa ee adigu taas ha isku dhibin, Rabbi swt ayaana kaa kor qaaday taas, nidaamyada iyo hababka aad isticmaalaysaana waa muhiim ee niyadda ku hay, si adiga oo is leh wax wanaaji aanad wax uqarribin, dad dhawaana aanad usii fogayn!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

CAJIIB!!!



Waxa ku xidhnaa dad gaystay dembiyo kala duwan, dhac, boob, kufsi iyo dil, waxa lagu kala xukumay xukuno kala geddisan, dil, xabsi daa'in, sannado, iwm, inta ay askartu ciqaabto in ka badan iyagaa is ciqaaba, waxayna kala yeesheen kooxo iskasoo horjeeda, waxay lahaayeen gaan-gistarro, maalin walbana midbaa la dilaa, qofkii lagu xidhaa intaan lagaynin tiirka daldalaadda ayaaba la dilayaa, arrinkaas askartu wax way kaqaban kari wayday, isku dayo dhawr ah way ku fashilmeen, waxaana ugu waynaa koox la magac baxay kooxdii cas-casaa, waana kooxda laga dambeeyo, waxaana madax u ahaa nin u dhashay dalka Britain!!!.

Waxa dhacday arrin argagax leh kadib markii aroornimadii la arkay mayd nin oo lagala baxay beerka iyo kelyaha, balse baadhitaan dheer kadib waxa la ogaaday in ninkani isagoo nool lagala baxay beerka iyo kelyaha kadibna uu udhintay

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dhiig bax, askartu waxay ciqaabeen maxaabiistii balse cid sheegtay ma jirin oo waxay yidhaahdeen annagu maanaan samaynin, si walba waa loo ciqaabay balse waxba maysan soo kordhinin ciqaabtii oo sidii ayay u inkirayeen, waxay aad uga wel-weleen maxaabiistii arrinkan soo cusboonaaday, maalmo kadib waxa dhacday arrinkii hore mid lamid ah, weliba ayadoo lagu sameeyay saddex nin oo midi yahay askari katirsan ilaalada maxaabiista!!!.

Arrintii ayaa cirka iskusii shareertay, waxayna gaadhay dawladda, waxa lagu sameeyay baadhitaan, kadib waxa la ogaaday in labada nin iyagoo nool lagala baxay beerka iyo kelyaha, kadibna uu arkay askarigii, isagana lagu daray, arrinkaasna ay ka dambeeyaan qaar kamid ah maxaabiistu!!!.

Waxay cabsi wayn ku riday ilaalada xabsiga, waxayna bilaabeen inay ka kala dhuuntaan ilaalinta habeenkii, waxa haddana la isku dayay in la ciqaabo maxaabiista si looga sheeg-siiyo, balse waa bahalee waxba sheegi maayaan, xabsiga waxa lagusii dhex-daayay rag sirdoon ah iyagoo laga dhigay kuwo lasoo xidh-xidhay oo wax soo dilay, balse arrinkaasi waxba masoo kordhin oo raggii laftoodii ayaa mid-mid loo khaarajiyay!!!.

Waxa la qabtay shir deg-deg ah oo kusaabsan:- maxaynu ku samaynaa xabsigaas iyo dadka ku jira, fikradaha lasoo bandhigay waxa kamid ahaa in lagu dhufto gantaalo ooba lalaayo maxaabiista gebi-ahaantood, halka qaar dhaheen hala dilo kuwa ugu cad-cad, balse macquul way noqon wayday in la wada laayo maaxaabiista gebi-ahaantood, waayo waa dad gaadhaya in kabadan **50,0000 (konton kun)** oo maxbuus, shirkii wuxuu qaatay dhawr bilood, balse arrin yaab leh ayaa

dhacday oo ahayd in dilkii yaraaday, sidoo kalena rabshaddii ay kayartahay sidii hore, waxa loo diray rag sirdoon ah si ay ubaadhaan arinkan iyo waxa sababay, baadhitaan dheer kadibna waxa la ogaaday in lasoo xidhay wiil kamid ah bulshada **Muslimiinta!!!.**

Waxa uu lasaaxiibay kooxdii cas-casaa, isla mar ahaantaana ay ubogeen hab-dhaqankiisa, dabeecadihiisa iyo diintiisa, taasoo keentay inay kusoo xidhmaan talada kooxdana wax laga siiyo, illaa markii dambe uu islaamiyay ooTawxiidka ugu qabtay xabsiga dhexdiisa, ugu dambayna isaga ayaa la wareegaya talinta kooxda, asagoo kabedelay magaca, kuna bedelay magaca ah kooxda nabadda, taas oo soo jiidatay kooxihii kale oo iyagiina daayay rabshaddii, dhabtii aad ayay ula dhaceen dawladdu arrinkan uu sameeyay wiilkan Muslimka ahi, waxaana loo sameeyay martiqaad aad u wayn, ayaga oo ka codsaday inuu la shaqeeyo soona wado ragg kale oo muslimiin ah si ay ula qabtaan hawshan ah in ladejiyo xabsiyada waawayn ee la dejin la'yahay!!!.

Diin-teennu waa cajiib, hal qof oo Muslim ah ayaa waxa uu dejiyay waxay dejin kari wayday dawlad dhan oo wayn, wuxuu bani-aadam ka dhigay bahalo iscunaya oo ayba ka cabsadeen xattaa askartii laga cabsan jiray!!!.

Diintu waa dhaqan ee goob iyo goor kastaba kudedaal dhaqan-gelinta diintaada Islaamka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HANUUNKA ALLE SWT AYAA ISKA LEH!!!



Tani waa qisso layaab badan oo ka dhacday dal kamid ah dalalka aysan Muslimiintu ku badnayn, wiil iyo aabbihiis oo gaal iyo Muslim kala ah ayaa aabbihii oo aan haysanin Diinta Islaamku wiilkiisa ku yidhi:- aabbo wakhti walba Salaadan aad tukato waa immisa maalintii, kolkaas ayuu ugu jawaabay wiilkii:- shan wakhti weeye aabbo, oo dhibna malahee maad iskasoo islaamtid ayuuna aabihiis sii waydiiyay, aabihiina wuxuu yidhi:- maalin kasta waad tukataa Salaadahan, sow ma'aysan soo noqonayaan salaad walba xilliga berri xigta oo kale , Duhur walba wakhtigan oo kale waad tukataa, berrina way imanaysaaye sow iskama dhaafi kartid ta berri, wiilkii ayaana si xikmadaysan uga jawaabay su'aashaas wuxuuna yidhi:- aabbo , maalin kasta duhurkii iyo habeenkii wakhtiyo siman ayaad cuntada cuntaa,

waxaad joogtaysaa cabista biyaha, markaas bal kawarran maanta haddii aad iska deyso ood beri ka dhigato cuntada!!!.

Aabihii dhalay wiilka ayaa durbaba dareemay xikmadda uu wiilkiisu ku hadlay, wuxuuna ugu Jawaabay:- Aabbo waa sax la iskamana dhaafi karo cuntada, waayo masii noolaan karno haddii aynaan biyo iyo cuntada ku dedaalin, wiilkii oo aad u faraxsan ayaana ku jawaabay:- Salaadda iyo Adkaaraha haddii aan iska daayona sidaas ayay noloshaydu noqoneysaa aabbo, Allihii swt cuntadan iyo biyahan si nabad ah kugu siiyayna haku caasiyin ayuu wiilkii aabihiis ku yidhi, nasiib wanaagna waxa suurta gashay in odaygii uu sidaas kusoo Muslimo!!!.

Hanuunka Alle swt ayaa iska lehe adigu intii awooddaada ah kaqayb-qaado fidinta dacwadda Rabbi swt ee Diinta Islaamka, gudona waajibka kaasaaran arrintaas iyada ah!!!.

SAAMAYNTA HAB-DHAQANKA!!!



Waa magaalo ay wada degan yihiin dad Muslimiin iyo Misiixi isugu jira oo si nabad ah ayaa loo wada nool yahay, wiil yar ayaa soo istaagay kadinka hore ee Masjid ku yaal magaalada oo qayb kamid ah lagu barto Qur'aanka kariimka, markii uu soo galay Masjidka ee uu usoo dhawaaday macallinkii ayaa macallinku dareemay in wiilku aanu ku jirin ardayda uu Qur'aanka baro, wuxuuna su'aalay wiilkii:- aaway waalidkaa?, wiilkii ayaana isagoo labada gacmood calaacalahooda is-mar-marinaya wuxuu leeyahay:- waxa ila socota hooyaday, laakiin bannaanka ayay taagan tahay hooyadu, waa Masiixi oo ma doonayso inay soo gasho Masjidka si ay u ilaaliso xurmada diimeed!!!.

Macallinkii ayaa u baxay bannaanka, wuxuu salaan kadib la hadlay wiilka hooyadii, wuu dareemay inaanay ahayn hooyo Muslim ah maadaama aanay

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

asturnayn oo ay timaha madaxu u bannaanyihiin, wuxuu su'aallay waxa uu ka caawin karo iyo waxa ay doonayso, hooyadiina waxay u sheegtay macallinka inay doonayso in wiilkeeda loo baro Qur'aanka, uuna kamid noqdo ardayda madarasadda, macallinkii oo yaabban ayaana ku yidhi:-waayahay!, waan kaa aqbalay, laakiin waxa iga su'aal ah adiga oo aan ahayn Muslim sida aad u doonayso in wiilkaaga aan Qur'aanka baro, halkii aad la aadi lahayd kaniisadda, maxaad ula jeeddaa taas?!!!.

Hooyadii waxay tidhi:- macallin waad mahadsantahay, aniga diintaydu waa masiixi, wiilkayguna wuu ku dhashay, laakiin waxa jirta sabab aan u go'aansaday inuu diinta Islaamka barto, taasina waxay tahay:- waxa deris nala ah hooyo Muslim ah oo haysata laba ilmood, waxaan aad ula yaabay oo aan ka masayraa sida ay ula dhaqmaan hooyadood iyo sida aniga wiilkaygu iila dhaqmo, mar kasta oo ilmaheeda ay iskuulka gayso oo ay kasoo tegayso gacanteeda ayay shumiyaan, waxay ula dhaqmaan sida boqorad oo kale, markay guriga yimaadaan iyagoo ku faraxsan aragtideeda ayay kusoo ordaan habna way siiyaan, macallin aniguna sidaa ayaan u doonayaa in wiilkaygu iila dhaqmo!!!.

Macallinkii oo sheekada khushuuc gaar ah ay ku beertay ayaa isagoon hadlin waxa mar kale hadalkii qaadatay hooyadii, waxayna tidhi:- waxa kale oo jirta qoyskaasi waa qoys had iyo goor farxad ku sugan, xittaa waxaan layaabay markay duqoobaan hooyada ama aabaha qoysaska Muslimiintu waxay ku xannaanaynayaan gurigooda, aniguna waxaan rabaa sidaas oo kale, mana rabo inuu wiilkaygu igeeyo meesha lagu xanaaneeyo duqooyinka, fadlan adiguna ii bar wiilkayga inuu si lamid ah ilmahaas iila dhaqmo, uuna barto dhaqanka wanaagsan ee Islaamka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Qisadani waxa ay inoo caddaysaysaa in Islaamku uu yahay Diin Nasteexo, Naxariis iyo Nabad ku salaysan, qof kasta oo innaga mid ahina ay saaran tahay mas'uuliyadda faafinta iyo muujinta dhaqanka wanaagsan ee Islaamka, sidoo kale waxay qisadu inoo ifinaysaa muhiimada barashada diintu uleedahay dhaqanka wanaagsan, Diinteenuna waa Diin ILAAHAY swt usoo dejiyay in ummadaha aduunka looga saaro jahligii iyo diin la'aantii, waxay u baahan tahay in ummadaha kale loo tuso Diin nabadeed oo lagu soo hirto, isla markaana laga weecdo ficil kasta oo sawir khaldan ka bixinaaya ama kasoo horjeeda Diinteena Islaamka!!!.

Diin waa dhaqan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MAXAAD UMALAYNAYSAA CAALIMIINTOODA!!!



Nin yahuudi ahaa ayaa waxa uu aaday tuulo ay deganaayeen dad Muslimiin ahi, waxaana uu go'aan ku gaadhay in culimada Muslimiinta uu mugdi ama shaki ka geliyo Diinta Islaamka, isaga oo jidka haya ayaana waxa uu arkay nin xoolo ilaalinaya, markaa ayaa waxa uu naftiisii ku yidhi:- xoola-raacan jaahilka ah ayaan ka bilaabayaa, oo diintiisa ka shaki gelinayaa, waa uu salaamay, jidka dhiniciisa ayayna wada fadhiisteen, iswaraysi kadib ayaana yahuudiigii oo Muslim iska dhigayaa waxa uu yidhi:- annagu haddii aannu Muslimiin nahay Qur'aanka xifdigiisa dhib ayaanu ku qabnaa, maxaa yeelay waa 30 Jis, waxaana ku jira aayado is-shabahaya oo isu eeg-eeg, markaa waxa roon oo aad u wanaagsan in aanu iska jarno kalmadahaas iyo aayadahaas isu eeg-eeg, wax faa'ido ah malahee, markaasna waa uu inoo fududaanayaa xifdigiisu!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Intaas dabadeed xoola-raacii ayaa ugu jawaabay oo ku yidhi:- warkaagu waa war wanaagsan oo lugu qanco, yahuudigiina aad ayuu u farxay, adhi-raacii oo hadalka sii wata ayaana yidhi:- balse sidaa oo kale oo uu Qur'aanku isugu eegyahay ayaa jidhkeena waxa laga helayaa xubno isu eeg-eeg, sida:- laba gacmood, laba lugood, laba dhegood iyo laba indhood, markaas waxa wanaagsan in xubnahaas aan qaar iska jarno, illeen faa'iido malahee, jidhkeenuna ha fududaadee!!!.

Yahuudiigii jawaab ayuu u waayay jawaabta xoola-raacii, waxana uu noqday mid weji-madoobaaday, waana iska laabtay isaga oo khasaaray oo dhahaya:- sidan ayuu xoola-raacoodii ii galaye, maxaad umalaynaysaa caalimiintooda!!!.

Allahu akbar, hanuunka iimaanku waa mid wata oo ay ku lammaanyihiin wax badani, sida in uu Allah swt qalbiga qofka mu’minka ah kabuuxiyo xikmad iyo murti aan lagaranayn meel uu kasoo bartay ama kadhaxlay toonna, markasta oo uu iimaanku sii siyaadona iyana waa ay lasiyaadaan, sidaa daraadeed ku dedaal markasta in aad badsato arrimaha siyaadiya iimaanka qofka mu’minka ah, sida:- ukuurgelidda aayaadka Rabbi swt ee cajiibka ah ee kamuuqda makhluuqaadkiisa!!!.

IRRIDAHA GUUSHA (4)

CAALIMKII GEFAY LABADA SU'AALOOD!!!



Waxay soo martay xer culimo ah oo meel fadhiya, deetana waxay ku tidhi:- midkiinee idinku faqiihsan (cilmiga fiqiga ee Diinta Islaamka), waxay ugu fiiqeen farta, waxay waydiisay labo su'aalood oo dhahday:- markaad rabto inaad cunnada cunto maxaad samaysaa?, sidoo kale markaad rabto inaad seexato maxaad samaysaa?, wuxuuna ku jawaabay:- markaan rabo inaan wax cuno waxaan dhaqdaa gacmaha deetana bisinka ayaan qabsadaa, kadibna dhinaca isoo xiga ayaan ka bilaabaa, sidoo kale markaan rabo inaan seexdo waxaan akhristaa adkaarta hurdada, deetana waxaan useexdaa dhanaca midig, waxayna dhahday:- kamaadan jawaabin su'aalahaygii, way yaabeen xertii, sidoo kale ninkiina waa yaabay, waxayna yidhaahdeen:- bal noo sheeg adigu?!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Waxay tidhi:- markaad rabto inaad wax cunto waa inaad cuntaa cuno xalaal ah, maanta innagu waxaynu ku dedaalaynaa aadabta loo cuno cunnada, balse kuma dedaalno waxan aynu cunayno xalaal ma yahay oo qaab xalaal ah ma inagu soo galay, tan labaad markaad rabto inaad seexato waa inuu qalbigaadu nadiif ahaada oo aad cafidaa wax Alla wixii dhib kuu gaystay, cuqdadna ka saartaa, maanta innagu waxaynu ku dedaalnaa aadaabta loo seexdo iyo adkaarta la akhristo, balse kuma dedaalno qalbiyadeena inaynu nadiifino oo cuqdadda ka saarno intaynaan seexan, waayo ma ogid inaad kasoo kacayso jiifkaas iyo in-kale!!!.

YAA ALLAH NAGU HANUUNI JIDKAAGA TOOSAN!!!.

CILMI-BAADHISTII FASHILANTAY!!!



Cilmi-baadhis uu sameeyay Dr. Yoshinori Ohsumi oo ah dhakhtar ku takhasusay sida uu u shaqeeyo jidhka aadamuhu ayuu ku ogaaday in marka uu qofku gaajoodo uu jidhkiisu bilaabayo inuu cuno carbohydrates-ka iyo dufanka ku kaydsan unugyada jidhka, taas oo keenaysa in uu jidhku iska nadiifiyo iskana saaro unugyada keena kansarka, duqnimada, asaasaqa, sonkorta, cadaadiska-dhiigga, cudurrada ku dhaca wadnaha, iyo in jidhka laga saaro subagga iyo cusbooyinka aan loo baahnayn ee dheeraadka ku ah!!!.

Is-cunidda jidhku waxa ay bilaabanaysaa haddii uu qofku shaqeeyo siddeed saacadood oo xidhiidh ah isaga oo aan wax cunin, uuna sidaas joogteeyo maalmo badan, si aysan unugyadii dhintay fursad ugu helin inay dib usoo noolaadaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Dr. Yoshinori Ohsumi wuxuu ku talinayaa inuu qofku is gaajaysiiyo oo uusan wax cunin ugu yaraan 8 illaa 16-saacadood labo illaa saddex maalmood toddobaadkiiba, wuxuuna sidoo kale soo jeediyay inuu sidan qofku sameeyo ugu yaraan hal bil sannadkiiba, dhakhtarkan oo u dhashay dalka Japan, waxna ka dhiga machadka diraasaaadka hal-abuurka Jaamacadda Tokyo ee dalka Japan ayaana wuxuu cilmi-baadhistan sannadkii 2016-kii ku mutaystay shahaadada caalamiga ah ee Nobel Prize ee dhanka caafimaadka!!!.

Cilmi-baadhista dhaqtarkan lagu abaal-mariyay waxa ay diinteenna Islaamku ina fartay 14 qarni kahor, oo tiirarka Islaamka ayayba kamid tahay inuu qofku 30-maalmood oo xidhiidh ah ka soomo sannad kasta, Nabigeennuna Sallallaahu Calayhi Wasallam wuxuu jideeyay inuu qofku soomo laba maalmood toddobaaadkiiba (isniin iyo khamiis)!, waana qodob inbadan siyaadinaaya korna uqaadaaya iimaanka qofka Muslimka ah, kuna tusinaaya ramadaanka iyo soonku in ay yihiin fursad caafimaad oo ay dad badani kaga badbaadayaan cudurro haya ama kusoo fool-leh!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MAQAAL-XASILOONIDA QALBIGA!!!



Adduunka maanta waxa qof kastaa raadinayaa waa siduu ku heli lahaa deganaan maskaxeed iyo xasilooni qalbiga ah, in badan wixii ay rabeen sannado ka hor way heleen, haddana kuma qanacsana, weli waxa ku furan buuq, waxay dareemayaan kadeed, waxa ku badan hilmaanka, waxa ku jira deg-deg badan, waxa haya nasasho la'aan, iyo qaar kaloo badan, maxay waxani u dhacayaan?, ma noloshaa sidaa ah?!!!.

Xaqiiqdii noloshu way fududahay, laakiin innagaa isku adkayna kolka aynu ka daba cararno wax aan farxad inoo keenayn marnaba, waxa aynu jecelnahay in aynu xidhano dhar qaali ah, balse waxa aynu istareex badan dareennaa dhar fudud marka aynu gashanno, waxa aynu jecelnahay in aynu hoteelada waawayn la fadhiisanno dabaqadda sare ee dadka, laakiin waxa aynu aad ugu faraxnaa marka aynu saaxiibo shaah ku wada cabayno maqaaxi wadada dhinaceeda ah, waxa aynu

jecelnahay in aynu gawaadhi raaxo iibsanno, laakiin waxa aynu hawo fiican & caafimaad ka helnaa marka aynu lugayno, waxa aynu jecelnahay in aynu kusoo jeedno wax aanay dani inoogu jirin, halka xilli hore oo aynu seexanno habeenkii aynu ka helayno firfircooni & farxad, waxa aynu doonnaa in aynu nafta ku maaweelino muusik kolka aynu kadeed dareenno, balse haddaynu laba rakco Rabbigeen swt utukano ayaynu deganaan maskaxeed ka heli karnaa!!!

Haddii aynu rabno farxad iyo deganaan maskaxeed aynu xoogga saarno xuska Alle swt oo ah xaqiiqdii waxa keliya ee qalbigu ku xasilo, sida Alle swt Qur'aanka inoogu sheegay in digrigu dejiyo qalbiga, xusuusnowna wax kasta oo xad-dhaaf ahi nolosha waa sun, ogowna sababta ugu wayn ee cudurada qalbigu waa Vitamin Diin la'aan, ogowna oo biyuhu ma qarqin Nebi Muuse CS isaga oo ah saqiir kuna sugan xaalad uu aad u tamar-daran-yahay, haddana waxa ay qarqiyeen fircoon isaga oo ku sugan xilligii uu ugu awoodda badnaa, kibir dartiisna uu sheegtay in uu bini'aadam oo dhan ka sarreeyo!!!.

Haddaba, qof kasta oo Alle swt ku xidhan, daciifnimadiisu ma ahaanayso mid dhibaato ugaysata, qof kasta oo aan Alle swt ku xidhnayna awood kastuu leeyahay, si kastoo hub iyo ilaalo badan uu u haysto, ma aahaanayso mid faa'iido leh oo wax tarta, sidaa daraadeed, marnaba ha kibrin oo dadka ha iska waynayn, goortii shimbirtu nooshahayna waxay cuntaa qudhaanjada, goortii shimbirtu dhimatona qudhaanjada ayaa cunta shimbirta!!!.

Waqtiga iyo duruuftu way is beddeli karaan xilli kasta, hal geed ayaana samayn kara midabbo kala ged-geddisan xilliyo kala duduwan, ha liidin, ha dhibsan,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

hana dulmin qof noloshiisa, in badan oo awood is biday, is kibrisay, dadkana dulmiyayna ma dhiman illaa Alle swt uu ku dulleeyay umadda hortooda, maantana waxa laga yaabaa inaad tahay qof awood badan, laakiin xusuuso oo wakhtiga ayaa aad kaaga xoog badan, marar badana waxa dhacda in aanad ku qanacsanayn noloshaada, halka dad badan oo dunida ku nool ku riyoonayaan noloshaada oo kale inay helaan, wiilka beerta joogaa wuxuu arkaa diyaarad dushiisa maraysa, wuxuuna ku riyoodaa inuu duulo, laakiin duuliyaha diyaarada wadaa wuxuu arkaa beerta quruxda badan, wuxuuna ku riyoodaa inuu guriga kusoo noqdo si nabad ah, haddii taajirnimadu tahay sirta farxaddana kuwa badan oo taajiriin ah ayaa ku noolaan lahaa nolol aan buuq lahayn, laakiin kuwa saboolka ahi waxay guryaha dhisaan ama alaab xamaalaan iyagoo heesaaya oo faraxsan!!!.

Haddii xukunka & Awooddu xaqiijiyaan amni, madaxda ayaa lugayn lahaa iyagoo aan ilaalo wadan, laakiin kuwa unool sida fudud ayaa casariye iyo caways ku qaata makhaayadaha hawada furan iyagoo keligood ah, sidoo kale haddii qurux iyo magac keenaan xidhiidh waara, kuwa caanka ah ee heesa ama filimaanta jila ayaa yeelan lahaa guurka ugu wanaagsan, laakiin waxay hadda haystaan diiwaanka furriinka ugu badan!!!.

Hadaba, xasiloonida qalbiga, farxadda iyo qanacsanaanta noloshu kuma xidhna xoolo badni, derejo, xil iyo magac ee waxa ay ku xidhan tahay sida qofku ugu xidhanyahay Rabbigiis swt, waajibaadka uu farayna uguto, maxaariimta uu ka reebayna uga dhawrsado, carrabkiisana u baro uguna cel-celiyo xuska Alle swt!!!.

ku xidhnow oo ku xamdi-naq Alle swt xilli kasta, Alxamdulillaah.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Q: LABAAD, QISOOYIN JACAYL AH:-

DIIN-WAA DHAQAN!!!



Wiil ayaa waxa uu damcay in uu guursado gabadh ajaanib ah oo aan Diinta Islaamka haysan, aabbihii ayaana u diiday oo ku yidhi:- haddii aad guursatid waan kaa beri noqonayaa, wiilkiina waxa uu ku dedaalay in uu Diinta Islaamka soo geliyo inantii, waa uu u tegey waxa uuna ku yidhi:- haddii aad Diinta Islaamka soo gasho waynu is guursanaynaa, waxa uuna siiyay 10 kitaab oo luqadda English-ka ku qoran!!!.

Afar bilood ayaa ay u qabatay si ay usoo fahamto, afartii bilood kadib ayaana ay u sheegtay in ay Islaamtay, wiilkiina farxad ayuu la duuli gaadhay, hase

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ahaatee waxa ay usheegtay in aanay guurkiisa aqbalayn, diyaarna u ahayn, maxaa yeelay waxa ay tidhi:- waxa aan arkay in aad kudhaqanka Diinta Islaamka ka fogtahay!!!.

Immisa ayaa maanta haysashada Diinta Islaamka sheeganaysa oo haddana bannaanka ka ah, waa Muslim haddana been ayuu sheegayaa, waxbuu xadayaa, ballankii ayuu ka baxayaa, khiyaano ayuu samaynayaa iwm, diinina waa dhaqan ee ma aha hadal afka laga yidhaahdo!!!.

Kudhaqan dhaqanka suuban ee ay ina farayso Diinteenna Islaamku aad if iyo aakhiroba liibaantide!!!.

SOO DHOWOW!!!



Waxa uu ahaa 40 sanno imaam masjid, kaas oo eedaanka iyo tujintaba isagu qabanjiray, dadkii masjidka ku xidhnaa ayaa doonay in masjidka loo dhiso minaarad, si iimaamka codkiisa loo maqlo markuu eedaamayo, minaaraddii waa la dhisay, imaamkuna waxa uu fuuli jiray minaraadda oo uu ka eedaami jiray, (waa intii aan sameecadaha la samayn), wadaadkii markii uu koray ama fuulay minaaraddii ayuu arkay inan aad u qurux badan oo guri masjidka u dhaw dhex joogta, markiiba naftiisa dareen jacayl ayaa ku dhashay, illaa heer uu gaadhsiiyay inuu minaaradda markuu fuulayo kusii tala-galo inuu inantii arko!!!.

Muddo kadib ninkii imaamka ahaa waxa uu is yidhi:- haddii aad inanta jacaylkaaga u sheegatid way fiicnaan lahayd, maalin ayuuna soo dhaqaajiyay oo

gurigii inantu ku jirtay yimi, albaabkii ayuu garaacay, inantii ayaa ka furtay, yaad tahay ayay ku tidhi, Imaamka masjidkan ayaan ahay ayuuna ugu jawaabay!!!.

Inantii:- soo dhawow, maxaad u socotayna.

Sheekhii:- waxaan ahay ruux ku jecel oo doonaya inuu nolosha kula qaybsado.

Inantii:- sheekh anigu Muslim ma ahi, kiristan ayaan ahay.

Sheekhii:- waa caadi waynu is guursan karnaa.

Inantii:- may, may, aabahay ayaa muslimiinta neceb oo ima-yeelaayo, nin kiristan ah ayuuna ila rabaa.

Sheekhii:- hadday sidaa tahay Islaamkaba waan kasoo baxayaa adiga dartaa!!!.

Inantii:- khiyaamaad malaha waddaa.

Sheekh:- may, may, waan ka baxay Islaamkii!!!.

Inantii:- hadday kaa runtahay khamrigan cab!!!.

Ninkii khamrigii ayuu laacay, isaga oo gurigii dhex jooga ayuuna inanta aabeheed soo garaacay albaabka, inantii ayaa ku tidhi:- waa aabahay ee halkaad isku qarin wuu ku dilayaa hadduu ku arkee, adigu meel igu qari ayuuna ku yidhi, Jiingadda

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dusha guriga fuul ayay ku tidhi, ninkii halkii ayuu koray isaga oo dhacdhacaya dabadeedna waa uu kasoo siibtay waanuu dhintay isaga oo diintiina ka baxay oo gaal ah!!!.

Allah swt waxa uu aayad kalaamkiisa kamid ah inoogu sheegay in shaydaan uu cadaw inoo yahay haddaynu nahay ilma bani-aadam, sidaa daraadeed inaguna ay tahay in aynu cadaw kadhigano, shaydaan ayaa ninkaas odayga ah jaanis kahelay, welibana sifiican uga faa'iideeyay, sidaa daraadeed kadigtoonow shirqoolada iyo kaartooyinka ninka leh khibradda intii aadamuhu jirayba oo dhan, haystana oo tixraacaaya faylashii ilma bani-aadam oo dhan, una isticmaalaaya in uu if iyo aakhiroba kugu hoojiyo!!!.

AAD AYAAD UMAHADSANTAHAY GACALISO!!!



Imaam masaajid ayaa muxaadaro u jeedinaayay dadkii masaajidka joogay, waxa uu wacdigiisa kusoo qaatay in raggu ay u debecsananaadaan xaasaskooda oo ay u naxariistaan, hadalladii Imaamkana waxa kamid ahaa:- "tusaale, markii ay xaaskaagu cunto kuusoo kariso oo ay kuu keento waxaa habboon inaad amaanto, sida:- maansha Allah, cunto macaan ayaad karisay, aad ayaan uga helay runtii, iwm"!!!.

Nin kamid ahaa dadkii wacdiga soo dhegaystay ayaa markii uu gurigiisa yimid wuxuu isku dayay inuu dhaqan-geliyo hadalladii Imaamku jeedinayay, xaaskiisa ayaa casho u keentay, cuntadii ayuu bilaabay inuu cuno isagoo faraxsan oo macaansanaya, markii u dhammaystay ayuuna ku yidhi xaaskiisii:- maanshaa Allah, cunto macaan ayaad karisay mcn, aad bay u macaanayd runtii, waan ka helay, aad ayaad u mahadsantahay gacaliso, Alle swt igamakaa qaado iyo hadallo kale oo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ammaan ah, xaaskiisii ayaana ugu jawaabtay:- 21 sano ayaan cunto kuu karinayay waligayna hal mar imaad amaanin, maanta markii cunta jaarkeenu inoo keeneen ayaad i amaanaysaa!, subxaanallaah!!!.

Ficil kasta oo aad dhaqan-gelinayso haba wanaagsanaadee xaalado ayaa ku xeeran kuna hareeraysan, waana muhiim inta aanad fulintiisa bilaabin in aad dhammaantood intii aad ka awoodid ku go'aan qaadato, tusaale ahaan:- haddii ficilkan wanaagsan aanad hore usamayn jirin oo uu hore kuu seegay, waajibaadkaagana uu kamid ahaa, maalinta aad bilaabayso waxa uu kaaga baahanayaa dabin-dhawrasho badan, haddii kale sida ninkan isaga ahaa ayaad adiga oo is leh wax wanaagi ay iskukaa rogaysaa, oo aad wax kharribaysaa!!!.

Ku go'aan-qaadashada xaaladuhu waa muhiim.

TALO SAARO RABBI SWT!!!



Nin ayaa waxa uu guursaday gabadh aad u qurux badan, aad buuna u jeclaa, iyaduna aad ayay u jeclayd, laakiin wakhtiga duruufihiisa ayaa ku khasbay ninkii in uu u safro magaalo kale si uu u raadsado maciishad iyo biil reerkiisu ku noolaado, intii aanu ka bixitimin reerkiisii waxa uu doonay cid uu kaga sii tago xaaskiisa uu aadka u jeclaa, waxaanuu isku qanciyay in uu kaga tago walaalkii oo ay isku aabe iyo hooyoba yahiin, arrinkii ayuu usoo bandhigay walaalkii, waxaanuu kaga tegay reerkii, isaga oo u kicitimay halkii yoolkiisu ahaa.

Waxa socday maalmaha iyo habeenada, waxaana ninkii gabadha quruxda badan lagaga tegay uu go'aansaday in uu khasbo gabadha oo fara xumeeyo, wayse diiday, dabeedna waxa uu ugu hanjabay haddii ay diido in uu ku fadeexadayn doono ninkeeda oo war uu u sheegi doono, laakiin taasna way kadiiday oo waxay ku tidhi:-

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ku dheh walaalkaa waxaad doonto, aniga Ilaahay swt ayaan wakiishay oo igu filane, waxa ay talo saaratay Allaah swt, waana ka yidhi Eebbe swt:- **(ninkii Ilaahay talo saarta, Ilaahay baa ku filan),** waa kaas iimaanku!!!.

Waxa soo noqday ninkii maqnaa waxaana uu ku yidhi walaalkii:- walaalkayow gabadhii aad igaga tagtay waan ka jiifsan waayay oo aniga ayuunbay doonaysay in ay ikhasabto intaad maqnaydba ee waxaad yeeshaa iska fur wuxu waa gabadh xune, waxa ay doontay in ay doodeeda furato, kamase hadashiin ninkeedii ee waa uu furay, iska tag waad furantahee ayuuna ku yidhi!!!.

Waxay ka dhaqaaqday halkii ay taagnayd, waxa ay ujeesatay halkii ay xigtadeeda ku ogayd, waxay soo lugaysay dhul qarfe ah, waxay soo dhex jibaaxday buuro iyo saxare, waxayna la kulantay wadaad meel cidla ah degan oo ku leh masaajid, way ku soo leexatay, waxuu ka waraystay xaaladeeda, waxay uga warrantay qisadeedii oo dhammaystiran, waxa uu ku yidhi:- kawarran haddii aad iila joogto oo aad ii hayso wiil yar oo bilaa hooyo ah oo aad koriso, khidmad ama mushqaayadna aan ku siiyo, waxayna ku tidhi:- waayahay waxbana kama qabo!!!.

Waxay sidaa ku wadato hawsheediiba wadaadkii ayaa safray, waxa uu kaga tegay meeshii gabadhii, wiilkii yaraa iyo ninkii shaqaalaha ahaa ee xoolaha raaci jiray, waa yaabe gabadhii waxa soo weeraray ninkii xoolo raaca ahaa oo doonay in uu ka muraadsado, laakiin way diiday waxaana ay u daruurtay gaashaanka, balse waxa uu ugu hanjabay in haddii ay diido uu ugaysan doono dhibaato aan weligeed ka hadhin, waxay ugu jawaabtay:- Ilaahay swt baan talo saartay waxna ima yeeli kartid, waxa

uu soo qaatay mindi, waxaanuu gawracay wiilkii ay korinaysay ee lagu aaminay, wadaadkii markii uu yimina waxa uu usheegay in wiilkii ay dishay gabadhani!!!.

Wadaadkii ma canaanan gabadhii ee waxa uu siiyay laba diinaar oo ay ku lahayd, waayo sifaha qofka muslimka ayay ka mid tahay in uu dul-qaato, **(kuwa cadhada ama xanaaqa iska damiya ee dadka ku khaldamana iska dhaafa Ilaahay baa jecel).**

Waxa uu amray in ay qaadato lacagtaas iskana tagto, waxay ay katagtay gurigii wadaadka, waxay u socotay halkii ay ku ogayd dadkeedii, waxa ay la kulantay iyadoo dariiqii maraysa nin dad badani bud la dhacayaan oo ku qaylinayaan, markaasay naxday oo u naxariisatay kuna tidhi:- waar maxaad u dilaysaan ee uu idin yeelay, waxay yidhaahdeen:- wuxuu naga daynsaday lacag dhan laba diinaar oo uu nasiin waayay, oo bal ka warrama haddaan idin siiyo labada diinaar ma sii daynaysaan ayay waydiisay kooxdii?, haa ayayna ugu jawaaben, iga hooya ayayna ku tidhi miskiinkana sii daaya!!!.

Waxay kasii daysay kooxdii, waxa ninkii uu ku farxay sama-falka ay u samaysay gabadhaasi, wuxuu lasii sheekastay cabbaar oo uu ka waraystay xaalkeeda, waxay uga warrantay qisadeedii oo dhammaystiran, waxa uuna soo jeediyay in ay is raacaan oo rafiiqaan wadankana ka tagaan oo wadan wanaagsan ay qabtaan, taasna way isku waafaqeen, waxa ay yimaadeen xeeb, doon baxaysa ayay arkeen, waxa ay yidhaahdeen aynu korno doontan, waxa ayna ku tidhi:- ragga ayaa hor kora ama fuula ee kor (waxa ay diidaysay marka ay doonida korayso in uu ka dambeeyo oo uu u muuqdo jidhkeedu)!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Waxa hor fuulay ama koray ninkii, laakiin maxaa dhacay!, waxa uu la faqay naakhuudihii ama wadihii doonida, wuxuu ku yidhi:- ma aragtaa gabadhaa iga dambaysa, haa ayuu yidhi, ninkii:- ma iga iibsanaysaa waa adoontaydii oo aan iib u wadee?, naakhuudihii:- nacam, haa, mid la diidoba maaha taasiye, qiimihii baa hoos loogu heshiiyay, waana uu ka qaatay lacagtii, waanuu ka degay doonidii, gabadhiina way soo kortay!!!.

Markii doonidii dhaqaaqday ee badwayn ay marayso ayaa naakhuudihii iyo kooxdiisii yidhaahdeen:- haye, haye, kummee gabadh-yahay, gabadhii oo yaaban ayaa tidhi maxaa dhacay?, waxay ka cadhoodeen hadalkeedii, waxay kusoo boodeen mar qudha iyagoo leh miyaadan ahayn adoontayada?, gabadhii ayaa tidhi:- addoon sidee ah, idinma aan fahmin?!!!.

Kooxdii doonta ayaa uga warramay qisadii ninka, waxaanay yidhaahdeen:- maadaama aanu ku leenahay oo ku iibsanay waa in aad noo ogolaataa in aanu kaa muraadsano, waar ilayn inagaa wax aragnay!, waxay aragtay halka xaal la marayo, waxayse mar walba xasuusnayd in Ilaahay swt uu yahay ka qudha ee u hiilin kara, **(Ilaahayow kuma caasiyi karo, mana rabo in wuxuushtani itaabtaan, Ilaahayow ferej deg-deg ah ayaan kaa baryayaa maanta, waad ogtahay laabtayda waxa ku jira iyo in aanan weligay ubadheedhin macaasiye)!!!.**

Halkaas markii xaal maraayay ayaa mar qudha doontii gariirtay oo aay la ruxantay mawjado, qoladii tuugada ahaydna dib ufadhiisteen, doontii waxa qaatay oo ruugay mawjadaha, halkaasna waxa ku hoobtay dhammaan wasakhdii saarnayd, Ilaahay swt adoonkiisa fiican isagaa yaqaan siduu ubadbaadiyee waxa usoo go'ay

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

gabadhii qori loox ay doontu lahayd, waxa ayna dusha uga baxday qorigii oo gaadhsiiyay xeeb, waxa arkay looxa gabadhu saarantahay boqor muslim ah oo dalxiis ujoogay xeebta, waxa uu amray in lasoo badbaadiyo gabadha, markii loo keenayna waxa uu ka waraystay xaalkeeda, waxay uga warrantay qisadeedii bilow illaa dhammaad, waxa uu aad uga naxay qisooyinka soo maray, waxaanuu ku tahniyadeeyay Alla-ka-cabsigeeda iyo samirka ay u yeelatay dhibaatooyinkii soo maray, muddo yar kadibna waxa haweenaydii guursaday boqorkii!!!.

Qof kasta oo Ilaahay swt ka baqa Alle waxa uu ku abaal marinayaa wanaag aakhiro iyo aduunkaba, mana dayacayo Ilaahay swt ajarka dadka wanaagsan, qof kasta oo muslim ahina ha iska ilaaliyo dembiga iyo macaasida, Ilaahayna swt ha xasuusnaado goob-kasta, goor-kasta iyo xaalad kastaba oo uu joogo hana ka baqdo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

MASOO NOQON KARAA!!!



Waxay tidhi:- qolka ciyaalka ayaan kusii socdaa, mana ogi dhulku miyuu iga sarreeyaa mise anigaa ka sarreeya, intuu go'aansaday inuu ila guursado waxaanba ku noolahay dhalanteed dushiis, marba waan is taabtaa ama gidaarka ayaan gacanta saaraa saan u hubsado inaan weli noolahay, waan rumay-sanahay qaddarta Alle swt, balse wax walba raad bay leeyihiin, maalinkii uu ii sheegay arrintan waxaan idhi anigoo gacanta hawada utaagtaagaya sidii qof aan waxba dareemin oo kale:- waa caadi dhibna ma leh, isaguna wuxuu lahaa waan ku ogahay inaad gabadh adag tahay, waa hadalka uu marwalba sidan oo kale igu yidhaahdo, maba ogaba waxaan ku suganahay, wadnahaygu wuxuu ku dhaw-yahay inuu dhuunta soo dhaafo, waxaan ka dhaqaaqay agtiisa anigoo isu muujinaya waxaas oo kale inaysan waxba ii dhimin!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Mar walba wuu ka sheekeeyaa, illaa marwalba aan isdhaho hadduu dhammaynayaa arrinteeda, balse sannado ayuu guriga galaa oo kasoo baxaa isagoo ku mashquulsan ururinta lacagta uu ku guursan lahaa, wuu ogaa in shaqaale qashinka guriga ka qaada aysan jirin sidaa daraadeed wuxuu waraaqaha ku ridaa sallada qashinka, aniguna mar walba waxaan kasoo guraa waraaqahaas, waa tii uu ku soo qaaday alaabtii jiifka , fadhiga , weelka, laanbadaha, alaabta gurigayga taalla aad baan u dhawri jiray, wuxuuna i dhahaa:- gabadh wax fahamsan ayaad tahay, ma oga inaan ahay taa ku wareegta guriga si ay ula socoto dhaq-dhaqaaqiisa, waxa laga yaabaa inay gacantiisu igu dhacdo sariirta anagoo wada jiifna, khuuradiisa aan maqlayo, laakiin aan ku fakarayo waxan i haysta, awal kama qarin jirin uurkayga, laakiin markan uma sheegin, maxaa yeelay uma arko anigu maanta inay khusayso, waayo jawi kaluuba ku jiraa!!!.

Habeen ayaan harraad uu wallacii keenay awgii waxaan usoo degay hoos si aan usoo cabbo biyahaygii qaboobaa, markaan soo degay waxaan arkay laanbad shidan, haddana waxaan maqlay cod hoos ah:- xabiibti wax walba waa diyaar, waa nooc-yadaad iga codsatay, haka wal-walin, tanna waxaad kasoo qaaddaa shaqaale gurigayga jooga oo kale, maya, maya, haddii aad u baahantahay waan furayaa, ma rabo nolosheenna inay mushkilado ku bilaabmaan!!!.

Waan soo orday, qolkaan soo galay, ma anigaa shaqaale ah, waan furayaa, yaab!, dhulkaa ila wareegay, matag ayaa i qabtay, wuu iisoo galay, laakiin waxba ma dareensiin, waxaan sugayaa bal tallaabada uu qaado iyo inuu ka dhabeeyo waxan, immisa maalin ayuu iga cararay iyadoo sheekadu ay badh-tanka noo marayso, kumuu dhicin inuu hadal wax iigu sheego, saa awgeed warqad ayuu qoray, sariirta

dusheedana ii saaray, waxaana ku qornayd:- saaxiibadda nolashayda ayaad ahayd, waan ogahay la'aantaada inaanan soo gaadheen booska aan maanta taaganahay, ha ii fahmin inaan ku diidayo, waxaan kaaga tegayaa mas'uuluyadda guriga iyo carruurta, waana ogahay inaad kasoo bixi karto, markaan fursad idiin helo waan idiin iman, telka igalasoo hadla mar walboo aad ii baahataan, waa saygaagii ku jeclaa ee cimaad!!!.

Aad ayaan u murugooday, xanuun ayaan jidhkayga ka dareemay saa'id ah, marna iga yara khafiifaya, waan suuxay, waxaan soo toosay anigoo dhiig dhex dabaalanaya, waxaan u cararay xannaanadii iigu dhawayd, waxa la ii sheegay in ilmahaygii uu dilmay soona qubtay, aana u baahanahay in la iga nadiifiyo, waxay igu dheheen ma haysataa qof ku geeya dhakhtarka mise ambalaasta ayaanu ku saarnaa, aamuskii aan aamusnaa ayay ka garteen inaan cidi ila socon, siday noqotayba waa la ii dhammeeyay hawshaydii, gurigaygii ayaana kusoo noqday!!!.

Maalmo kadib waxaan ku laabtay dhakhtarkii, laakiin markan hooyaday oo xanuusanaysa ayaan wadaa, inyar kadibna xanuunku kumuu raagine way u dhimatay (Alle swt ha unaxariistee), waxaan sawirtay murugadu inaysan aniga mooyee cid kale aqoonin, shaydaanka oo ka faa'iidaysanaaya tamar-darnaantayda ayaa wal-wal qalbigayga ku xardhay sida guriga caarada oo kale, waxaaba madaxaygu uu la qarxi gaadhay walaashaydii naafada ahayd ee hooyo ay ilaalin jirtay oo uu gaadhi wiil daroogaysani uu watay ku jiidhay laamiga deetana uu cararay, waxaasoo dhan qandho iyo tamardarni murugo ay la socoto ayay ii kordhinayeen, cimaad oo ninkaygii ah kumuu jirin dadkii ii tacsiyaynaayay, balse walaalkay ayuu teleefanka kalasoo hadlay oo keliya!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Cimaad laba bilood kadib dhakhtarka ayaa la jiifiyay, jadwalkii cuntadiisa oo si fiican uusan u qaadan ayaa sababtay in sonkortii ay ku kacdo lana jiifiyo sariirta bukaanka, aniga ayaa neeras ahaa oo waxaan cabiri jiray dhiigiisa, maya, maya, sababtu taa waa ka wayn-tahay, caruusaddiisii qaaliga ahayd ayaa markii dahab iyo lacag ay heshay ka dalbatay furriin iyadoo ku andacoonaysa inaysan guriga u iman kalkaalisonimo, anigu masoo booqan jirin, maxaa yeelay ajaanib ayaan ka ahay oo waataanu kala tagnay, carruurtiisii ayaa soo booqan jirtay keliya, anigu waxaan u diri jiray inuu nabad galo oo caafimaado, caws jiilaal waa lama huraane markuu dhibtaas ka baxay ayuu maalin guriga iigu yimid albaabkana soo garaacay, waan ka furay wuxuuna igu yidhi:- walaal masoo noqon karaa, waxaana ugu jawaabay:- maalinta muraayad jabtay welibana lagusii is-istaagay ay soo laabato ayaad soo laaban kartaa!!!.

Ogow xaaskaaga hore ayaa kaa dhigtay mid u hanqal taaga midda labaad, (waa xaaska wanaagsane), ogowna hadalka Alle swt ee macnihiisu ahaa:- **ha moodin in Ilaahay moogsan-yahay xad gudubka ay samaynayaan.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

WAAN KHASAARAY!!!



Kadib laba iyo toban sano ayuu soo wacay tel-keedii, way eegtay waa isla lambarkii, way qabatay waa isla codkii, waxa kusoo joogsatay illin wayna hadli-kari wayday, wuxuu ku cel-celiyay:- **halow, halow, halow,** miyaad imaqashaa walaal, balse maysan ujawaabin, wuxuu dareemay illin iyo hiin-raag, wuxuu yidhi:- xaalka deji waxaan joogaa albaabka guriga, si dhakhso ah ayay ku damisay telifoonkii unasoo oroday dhinaca albaabka guriga, markay furtay ayay aragtay, wuu salaamay oo xaal waraystay, way ka qaaday, waxayna usheegtay inay bed-qabto, wuxuu ka dalbaday inuu hore usoo galo guriga, balse waxay usheegtay inaysan macquul noqonaynin, waayo ninkeeda ruux uusan ogayn waa ka mamnuuc gurigu, hadday ku war-geliso saygeeda inuu ninkeedii hore albaabka taagan-yahay uuna rabo inuu soo galo gurigana waxay ka baqday inay dhacaan arrimo kale oo sababi kara isku dhac iyo furriin, sidaas darteed kuuma fasixi karo ayay ku tidhi arrintaas!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Wuu jeedsaday isagoo ilmaynaaya, wuxuuna usocday tartiib isagoo xasuustiisa gadaal u celiyay, soona xasuustay bilooyin badan oo ay xaaskiisa ahayd uusana daryeeli jirin, wuxuu soo xasuustay siday ujeclayd iyo siduu ula dhaqmi jiray, wuxuu kaloo soo xasuustay maalmihii ay keligeed xaafadda iska joogi jirtay asaguna asxaabtiisa uu iskala sheekaysan jiray, marka uu xaafadda yimaadona isduuduubi jiray, wuxuu kaloo soo xasuustay markii uu go'aansaday inay kala tagaan ayaduse ay inbadan isku dayday inay ku qanciso inuu reerku sii jiro, balse isagu uu ku adkaystay in la kala tago!!!.

Xasuustaas dheer kadib ayuu jaleecay gadaal, saa weli maysan xidhin albaabka oo way eegaysaa, kadib ayuu yidhi:- lagasoo bilaabo waagaas illaa iyo hadda maan helin ruux kula mid ah, xittaa ruux kaasoo ag-dhawaada, waxaan marayaa saddex xaas, isku daroo hal qof haddii layskaga dhigo kumasoo gaadhi karaan, dhabtii waan khasaaray markaan dheeman gacanta ku dhigay kadibna aan iska tuuray, Allah swt ha iskukiin barakeeyo adiga iyo saygaaga!!!.

Inta badan haddaynu nahay bani-aadam nimcada waxaynu dareennaa marka ay inaga tagto, balse ma dareenno marka ay inala joogto, isku day nimcooyinka aad haysato inaad ku xamdido, aadana iska indha-tirin, haddii kale waxaad shallaytoon-doontaa xilli aysan waxba kuu taraynin shallayto!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ANIGA AYAA KU XUKUMA!!!



Nin ayaa xaaskiisa furay kadib markii ay codsatay hees ay kaga ciyaaraan goobta arooskoodu ka dhacayay, heestaas ayaana sababtay khilaaf qoys oo aad u wayn, lammaanahan ayay kutimid xaalad laga murugoodo, kadib markii ay ku kala-tageen goobtii arooskoodu kadhacaayay markii ay ku murmeen damaashaadkooda magaalada Baqdaad ee dalka Ciraaq!!!.

Sida ay sheegeen goob-joogayaashu gabadha ayaa waxa ay codsatay heesta suuriyanka ah ee Mesaytara, ee ay qaado fanaanada Lamis Kan, ciwaanka heesta ayaana ah:- **aniga ayaa ku xukuma ama waan ku maamuli doonaa**!, heestuna waxa ay ku bilaabmataa ereyada ah:- aniga ayaa awood leh, waxa lagugu xukumi doonaa amarradayda adag, waan ku waali doonaa haddii aad eegto gabdhaha kale ee

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

waddada, haa, aniga ayaa awood leh, waxaad tahay gabbal sonkor ah, inta aad ila jirto amarkayga ayaad ku hoos socon doontaa!!!.

Gabadha aroosadda ah ayaa la sheegay in ay ku ciyaartay qoob ka ciyaar oo ay ku raaxaysanaysay heestan arooskeeda, balse qoyska arooska ee wiilka ayaan la dhicin, taas oo sababtay in labada qoys uu khilaaf wayni soo kala dhex galo aakhirkiina arrintu ay kusoo geba-gebowdo furriin kadhacay isla goobtii xafladda aqal-galka!!!.

Rasuulkeenna suubani scw waxa uu inoo sheegay in shaydaanka oo cadawga aadamaha ahi waxyaabaha uu muhiimadda uwayn siisiiyo uu kamid yahay duminta qoys Muslim ah, kooda kamidka ah ee shaqadaas soo qabta ama fuliyana kooda umadaxda u ahi marka warbixinaha lasiinaayo uu sigaar ah umaamuuso, runtii xilliyada uu dagaalka ubadan galona waxa kamid ah marka ay qoysasku isku cusubyihiin, waayo weli islamay fal-gelin ama may wada dhaqmin, oo aqoon badan ayaa isugu laaban, intooda badana taxaddarka iyo gaabsiga dhexdooduna aad ayuu usarreeyaa, sidoo kalena isfahamkoodu waa mid hooseeya, waana xilliyo khilaaf ama arrin yari uu keeni karo/karto natiijo wayn oo xun, sidoo kalena xilliyadan waxa iska badan gacmaha saddexaad ee aan kuniyad-samayn qoyska Muslimka ah ee dhismaaya, sidaa daraadeed ku dhis qoyskaaga wiil iyo gabadhba taxaddar, dulqaad, isu-cudurdaar, mas'uuliyad iyo digtoonaan sarraysa oo dhanka gacmaha saddexaad iyo dhexdiinaba ah, si adi iyo qoyskaaguba aad uwada guulaysataan!!!.

Ha madhaan xusaadda iyo cadawga qoysaska umadda Muslimiinta ahiba!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

NOLOSHA ADAGI WAXA AY SOOSAARKA HIBADAADA IYO SHAKHSIYADDAADA!!!



Wuxuu si kedis ah kula kulmay goob aroos ka jiray gabadh markaas dareenkiisa oo idil mar qudha qaadatay, wuxuu bilaabay inta badan inuu iyada eego, wuxuu la dhacay quruxdeeda, balse isagu waa faqiir taas oo ay usii dheer tahay qawmiyad la yaso inuu ka dhashay, wuxuu guda galay inuu daba galo waxna ka ogaado gabadhan uu jeclaaday, wuxuu ogaaday inuu dhalay ninka ugu taajirsan magaalada, taas oo ku noqotay wal-wal iyo walaac uuna ka baqay inay diido, balse jacaylka hayay ayaa ka tan batay wuuna usheegtay, balse wuxuu ka baqayay ayaa dhacday oo waxay ku tidhi:- maalin qudha waxaan isticmaalo ma heli kartid haddaad shaqaysato sannadkii oo idil, haddaba sidee maskaxdaada ugusoo dhacday inaad i hawaysato, mar afkaaga wuu kasoo baxay niyadaadana way soo gashay, balse mar labaad iska jir oo raadso leefalkaaga illeen shimbirba shimbirkiisuu la duulaaye!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Ereyadii uu maqlay ayaa calool xumo ku reebay uuna ka seexan waayay, heer uu jeclaystay inuu dunidan iskaga tago, maalmo badan oo isku xiga wax ma cunin duruuf haysata awgeed iyo tiiraanyo illaa uu ka noqday xadhig oo kale ciddii kasoo hor baxdaana ka naxayso kana murugoonayso xaaladdiisa, balse maalin ayuu naftiisa ku yidhi:- illaa iyo goorma ayaad sidan umurugoonaysaa, kabax ciirsigan aad ku jirto, maaalintaana wuxuu guda galay inuu dhiirri-geliyo naftiisa, wuxuuna baadhay hibada uu leeyahay illeen qof waliba hibo ugaar ah ayaa jirtee!!!.

Wuxuu is ogaaday inuu yahay injineer dhismaha guryaha ah, wuxuu guda galay inuu dhiso guryo yar-yar kana sameeyo dhoobo, markuu qalajiyay ayuu utegay shirkadda dhismaha iyo nashqadaynta guryaha, wuxuu maamulihii tusiyay guryihii yar-yaraa ee uu kasameeyay dhoobada, wuxuuna ku yidhi:- mudane igu dar shaqaalahaaga shilina kaama rabo ee aan barto xirfaddan, markaan barto kadibna ishaqaalaysiiso ama magaalada ayaan gees ka gelayaa, wuuna ka aqbalay arrinkii!!!.

Wiilkii wuxuu muddo kooban ku bartay xirfaddii asagoo u huray wakhtigiisii, noqday mid dabeecad macaan oo soojiitay shaqaalaha shirkadda gebi ahaantood, ammaantiisuna ay ku badatay dhegaha maamulaha, taas oo kelliftay inuu ka dhigo shaqaale rasmi ah kana qaata shirkadda mushahar, intaa muusan ku joojinin wiilkii dedaalkiisii ee wuxuu keenay nashqado cusub iyo fikiro cusub taas oo ka dhigtay in laga dhigo madaxa shaqaalaha, heer shirkadda madax uu ka noqdo markuu safro mamulaha shirkaddu, gabadha keliya ee uu dhalay milkiilaha shirkaddu ayaa aad uga heshay wiilka, waxayna yeesheen xidhiidh, waxa kawar helay milkiilihii, aad ayuu ugu farxay, wuxuuna yidhi:- waxaan helay wiil aan ku kalsoonahay awoodna

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

uleh maamulida shirkadayda iyo gabadhayda markaan dhinto kadib, wuuna isku daray!!!.

Muddo kadib waxa geeriyooday maamulihii shirkadda, waxaana la wareegay maamulkii shirkadda wiilkii, maalin isagoo kormeer ah ayaa wuxuu arkay gabadhii uu dhalay ninka ugu taajirsan magaalada, aad ayuu u eegay iyaduna way eegtay ayadoo la yaaban lebiskiisa iyo gaadhiga uu wato, lana socdaan gawaadhi kale, gabadha waxa la socday ninkeeda, isla markiiba ninkeeda ayaa usoo orday dhanka milkiilaha shirkadda kuna yidhi:- mudane soo dhawow, shaqadu way kala socotaa, halkeese war-bixin kaa siiyaa, gabadhii ayaa ay yaab ku noqotay arrinka ay indhaha ku arkayso, maamulihii shirkadda ayaana yidhi:- hagaag, wixii war-bixin ah usheeg xog-hayahayga, wuxuuna sii guda galay indha-indhaynta shaqaalaha!!!.

Inta badan dhibaatooyinku waxay soo saaraan shakhsiyaddaada iyo hibadaada, dadka guulaha gaadhay badankoodu waxay ahaayeen derbi-jiif, faqiiro, caseeyayaal, tuugsadayaal, iwl, iyagoo xaaladahaas ku jira ayayna noqdeen ganacsato caana iyo madaxba, adigoo ladanse maxaa kuu diiday inaad hadafkaaga iyo hamigaada gaadhid, dhanka gabdhaha haddaynu yara jaleecno lacagtu waxba ma'aha ee qofka shaqsiyadiisa ayaa lagu doortaa, meeqaa la arkay iyagoo taajiriin ah oo faqiiroobay, meeqaase la arkay darbi jiif noqday ganacsado caan ah oo laga dambeeyo, qisadanina waxay ka dhacday dalka hindiya!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

NASIIB WANAAGSAN AYAAN KUU RAJAYNAYAA!!!



Wuxuu ka bixin jiray iskuulka, sidoo kale wuxuu ka caawin jiray wax kasta oo ay ubaahato, hadday ubaahato alaabaha laysku qurxiyo, dhar iyo hadday xaflad aadaysoba, waxay isku qurxin lahayd oo idil isaga ayaa ka caawin jiray oo siin jiray lacagta ay kusoo gadanayso, waxay ku ballameen inay is guursadaan markay iskuulka dhammayso, waxay ahayd gabadh cad oo dhuuban oo dhoola caddayn badan, ma jirin qof awooda inuu ogolaado inay wakhti dheer ka maqnaato, Hani waa gabadh ka dhalatay qoys sabool ah, saddex bilood kahor intii aanay iskuulka dhammaynin ayuu ulaabtay yurub, markii ay gabadhii dhammaysay iskuulkii wuxuu ku war geliyay in la gaadhay xilligii ay ku ballameen guurka, laakiin waxay xujo uga dhigtay inay rabto inay jaamacad bilawdo uuna guurkoodu dhici doono marka ay jamaacadda dhammayso!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Maxammed kuma farxin hadalkaas, wuxuu dareemayay inuusan wakhti intaas ka badan lumin karin, wuxuu ku yidhi:- Jaamacadda dhigo inagoo qoys ah, laakiin waa ka dhego adaygtay, waxay ogayd inuu si xad dhaaf ah ujecel yahay, wuxuu fakaraba waxa usoo baxday inuusan 4 sanno oo kale iskaabulo sii ahaan karin, kadib wuxuu ku yidhi:- wax walba oo wanaag iyo garab ah waxaan kuugu sameeyay jacayl aan ku jeclaa, weli waan ku jeclahay, laakiin intaas ka badan kuma sugi karo, nasiib wanaagsan ayaan kuu rajeeyay!!!.

Hani ma filayn inuu go'aankaas qaadan karo Maxammed, laakiin nafteedu waxay u sheegtay inuu usoo laaban doono oo uusan ka maarmi karin, laakiin waxay ilowday in ragga qaar ay adag tahay inay go'aan qaataan balse haddii ay qaatan ay adag tahay inay soo laabtaan, Maxammedna 4 bilood kadib wuxuu guursaday gabadh haysata 1 wiil oo degan dalka Sweden!!!.

Hani waxa ay heli wayday nin ugu nugul sida Maxammed, 8 bilood kadib markii uu xidhiidhkeedii hore bur-buray ayay heshay nin macallin jaamacadeed ah, waxayna ku heshiiyeen meher qarsoodi ah iyo inuu jaamacadda free uga dhigo, uuna bishii siiyo khidmad yar, sagaal bilood markii ay is qabeen ayaa waxa kusoo baxay uur, hal bil kadibna macallinkii ayaa laga eryay shaqadii jaamacadda, hani waa ay ka hadhay jaamacaddii, waxaana u bilawday maalmo madow markii ay wax taageero ah ka wayday ninkeedii cusbaa oo isna ay maalmo camal-la'aan ahi u bilawdeen, isjiid-jiid iyo maalmo muran ah kadibna wuu furay macallin yuusuf inantii Hani!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Waxay qaadatay go'aan adag oo ah inay iskasoo xaaqdo cunugga caloosheeda ku jira, waxay u tagtay dhakhtar lacag ku qaata inuu hawlgalada noocan ah fuliyo, markii ilmihii lagasoo xaaqay ayaa waxa ku dhacay dhiig bax daran, waxa la dhigay dhakhtar ku yaalla Muqdisho, waxaana arrinta ogaatay walaasheed ka wayn oo dhakhtarka la gashay, waxay awoodi waayeen qarashkii dhakhtarka, waxa la raadiyay macallinkii, balse kama jawaabin telefoonka, hani walaasheed ayaa wacday Maxammed oo ahaa ninkii ay hore u xujaysay, waxa ay u sheegtay xaalka Hani ay ku sugan tahay iyo sida ay wax u dhaceen, aad ayuu u calool-xumaaday wuxuuna usoo diray lacag $300 (saddex boqol) oo doolar ah, 8 maalmood oo ay dhakhtarka ku jirtay kadibna waa ay fiicnaatay!!!.

Hani, waxa nolosheeda soomaray ninkii saxda ahaa ee mudnaa nolosheeda, balse way garanwayday, soomaaliduna waxa ay ku maah-maahdaa:- wax badso wax beelbay dhashaa, ee inta aad isleedahay ka kordhi, intii gacanta kuugu jirtay hayska daadin ama hawaayin!!!.

IRRIDAHA GUUSHA (4)

XAALAD-WALIBA WAA SIDA AAD KADHIGATO!!!



Wiil ayaa gabadh ay wada sheekeysan jireen u sheegtay in uu aad u Jecelyahay oo uu rabo in uu guursado, way diiday, ma uusan murugoon ee wuu dhoolacaddeeyay, kadib saaxiibkiis ayaa waydiiyay sababta uu u dareemi waayay qalbi-jab, maadaama dadka inta badani markii qof ay jeclaadeen diido ama qof xidhiidh ka dhaxeeyay ay kala hadhaan ay dareemaan qalbi-jab, qaarkoodna ayba ku waashaan matag, cuntada cuni-waayaan, dhawr maalin qol iskusoo xidhaan ama qaarkood baraha-bulshada ku ciil baxaan?, wuxuuna ugu jawaabay:- maxaan u murugoonayaa?, waxa aan anigu waayay qof aan i Jeclayn, laakiin waxay iyadu wayday qof aad u Jeclaa!!!.

Xaalad-waliba sida uu qofku ka dhigto ayay u noqonaysaa, sida dadku wax u arkaan ayaana kala duwan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

KUDOORO DIIN!!!



Bal kawaran hadii ninkii aad u doonanayd ee aad dartiis indhaha u beeshay maalinkii aad garabkiisa ubaahnayd uu ku yidhaahdo:- kuma guursanaayo!, Sara Maxaammed waa gabadh u dhalatay dalka Masar, waxayna caan katahay barta bulshada eeTiktogga, waxa uu xidhiidh jacayl kala dhaxeeyay wiil lagu magacaabo Mustaf, labadooda oo wada socda oo gaadhi wada saaran ayaa waxa soo weeraray budhcad, kadibna iyadii ayaa isu dhigtay xabadihii, iyadoo islahayd badbaadi Mustaf, laakiin labadoodiiba dhaawacyo ayaa soo gaadhay, gabadhii madaxa ayaa xabbadi kaga dhacday, aragiina way beeshay, Mustaf-se waa ka kacay dhaawacii soo gaadhay, dhaawaca oo yaraa awgeed!!!.

Arrinta dhaxdinta leh ayaa ahayd in ninkii Mustaf uu yidhi:- anigu gabadh aragga naafo ka ah nolol lama wadaagaayo, iyada oo ay maalmo ka dhinaayeen

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

maalinkii ay qorshaysteen aqal-galkooda!, Sara ayaana tidhi:- dhaawaca isoo gaadhay waxa igaga xanuun badnaa hadalkii uu yidhi qofkii aan dunida ugu jeclaa ee aan islahaa wax walba wuu kula qaybsan, ee cidlada igaga dhaqaaqay!!!.

Diinteena suubban ee islaamku waxa ay ina faraysaa in aynu ku dooranno cidda aynu nolol-wadaag la noqonayno arrin kaxeel-dheer muuqaalka oogada oo ah ruuxdiisa iyo Diintiisa balse aynaan ku dooran muuqaalka sare ee oogada, jacayl lammaane-nimo oo kasta oo ku bilaabma muuqaalka oogaduna waxa uu aakhirka ku dambeeyaa qoomamo iyo arrinta aynu qisadan ka dheehan-karayno oo kale, sidaa daraadeed sida uu ina faray Rasuulkeennii suubanaa ee Muxammed scw kudooro lammaanahaaga Diin, si aad uwada dhadhamisaan macaanka dhabta ah ee nolosha qoysnimada!!!.

Allah swt arageeda ha usoo celiyo.

IRRIDAHA GUUSHA (4)

GADO XUBNAHAYGA!!!



Wuxuu si aad ah u jeclaa xaaskiisa, waxay haysteen laba carruur ah, wax kasta oo uu awoodo wuu siin jiray, balse xaaskiisu marnaba maqsuud kuma ahayn, inkasta oo ninku uusan taajir ahayn haddana wuxuu la wadaagi jiray wax kasta oo uu heli karayay, hadduu usoo iibiyo dhar waxay ku odhan jirtay:- waxani waa wax liita oo mar hore laga baxay, ninku wuu udhoolacaddayn jiray xaaskiisa, wuxuuna ku odhan jiray:- maalin ayaan taajir noqon doonaa, waxaana kuu iibin doonaa dhammaan waxyaabaha qaaliga ah ee aad ubaahan tahay!!!.

Haweenaydu marnaba telefoonka kama wici jirin, illaa mar ay wax ka codsanayso maahee, haddii uusan fulin karin codsigaa waxa keliya ee ay samayn jirtay waa inay muranto maalmo, marmarna dagaalanto, galab isagoo shaqadii kasoo rawaxay ayuu soo iibiyay hal kiiloo oo hilib ah, isagoo faraxsan oo is leh xaaskaaga

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ka yaabi maanta oo caawa si fiican reerku ha ucasheeyo kolkuu gaadhay gurigii oo uu xaaskiisii tusay ayay lasoo booday:- ah!, nin baad sheeganaysaa oo hal kiiloo oo hilib ah guriga keenaysaa, ma saliid baa taal iyo wax kale oo lagu daro?, kadibna bannaanka ayay ku tuurtay hilibkii isaga oo arkaaya, ninkii aad ayuu u cadhooday, balse wuu is dejiyay, wuxuuna is yidhi:- marnaba hoos ha u dhigin jacaylka aad reerkaaga u qabto!!!.

Maalin ayuu xanuun badan ka dareemay cagta bidix, kadibna buro wayn ayaa kasoo baxday, 3 bilood kadib markii ay aad u waynaatay xanuunkiina ku batay ayuu dhakhtar tegay, waxa laga helay xanuunka kansarka, wuxuu ahaa sabool aan awoodin daryeel caafimaad oo wanaagsan, taasoo ay usii dheeryihiin inuu marwalba ka wal-walayo xaaskiisa iyo ubadkiisa, iyaduna ay caadi iska tahay oo aysan arrimihiisa isku mashquulinin, inkastoo uu aad u xanuunsanaa haddana wuxuu isku deyay wax kasta oo uu awoodo inuu reerkiisa quudiyo!!!.

Laba sano kadib, xaaladdiisii way kasii dartay, waxaana la dhigay dhakhtarka, lugtii ayaa qalliin lagu sameeyay oo laga jaray, balse nasiib darro waxay ahayd xilli dambe, xanuunkiina wuxuu saameeyay jidhkiisii oo dhan, wuxuu u yeedhay xaaskiisii si uu ula dardaarmo, wuxuuna ku yidhi:- xanaanee oo daryeel carruurta, waxaan dareemayaa inaan adduunkan ka socdo, waan ka xumahay waxaan ku guulaysan waayay inaan jacaylkaaga helo, igana raalli noqo haddaan baahiyahaaga dabooli waayay, saad rabtayna aan kuu noqon waayay, hadday macquul tahay kollay waaba dhimanayaayee labadayda kelli waad iibsan kartaa, fasax ayaadna u tahay oo ku maareeya noloshiina, kana baxa faqriga, Allah-na swt ha idin dhawro!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Wuxuu neefsaday neeftiisii u dambaysay, wuuna geeriyooday, haweenaydii & labadiisii carruuri waa ooyeen, maalmo ayay baroordiiq ku jireen, waxa ku adkaatay nolosha iyo korinta carruurta, caqabado badan ayaa soo wajahay illeen mas'uuliyadda reerka ayaa dusha usaaran, ugu dambayn waxay guursatay nin ay qaraabo yihiin oo ganacsade wayn ah, waxay ku faraxday noloshan cusub, waxayna is dhahday:- hadda ayaad nolosha macaankeeda dhadhaminaysaa, balse waa u dhadhami wayday, waxa qalbigeedii kusoo laalaabanaayay ereyadii uu ku yidhi markii naftu kasii baxaysay iyo qaabka ay ula dhaqmi jirtay markuu noolaa, way ka seexan wayday, waxayna noqotay maqane jooge, illaa markii dambe ay furriin dalbatay!!!.

Muddo kadib ayay xaaskii booqatay qabrigiisii, way ag-fadhiisatay iyadoo leh erayadan:- gacaliye, wax kasta oo wanaagsan waad ii samaysay, waxaad iila dhaqantay si naxariis iyo dulqaad leh, balse waxa keliya ee aad iga helaysay waxay ahayd buuq iyo dagaal, marnaba ma garowsan muhiimaddaada iyo jacaylkaaga illaa hadda oo aad naga tagtay, niyada waan kaa saari la ahay, xittaa waxaanu is-guursanay maal-qabeen wax walba aan ka helaayo, balse jacaylkaaga oo kale kama helin, hadda waxaan dusha uritay mas'uuliyadda carruurta, waana is daynay maal-qabeenkii, waan xasuustaa goortii aan tuuray kiiladii hilibka ahayd, waxaan kaloo xasuustaa erayadaadii danabka ka darnaa ee ahaa:- fasax ayaad u tahay ee gado oo iibso xubnahayga, kollay waaba sii socdaaye intaanan dhiman, alla maxaan kuu dareemi waayay intaad noolayd!!!.

Gabadha wanaagsani waata had iyo jeer ku qanacsan oo ka mahad-celisa wixii la siiyo, hadday yar-tahay ama badan-tahayba, kuwa xidhiidhku idinka

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dhaxeeyo kula hadal mar kasta hadalo wanaagsan inta ay nool-yihiin, qofna ma garanayo xilliga uu dunidan ka tegaayo, marnabana ha ku ciyaarin kuwa ku jecel qalbigooda, sababta oo ah waxa hubaal ah maalin intaad baraarugto ayaad garan doontaa inaad dayaxa wayday adoo xidigaha tirinaaya!!!.

Jaceylku ma'aha wax badan in la haysto, balse waa sida la isula wadaago waxa yar ee la haysto!!!.

SAMIRKU WAA FURAHA GUUSHA!!!



Waxay tidhi:- waxa aan ku bartay fur-furnaan, hadal debecsan iyo fud-fudayd, illaa xilligii isbarashadayada waxa aanu ahayn dad isla jaan qaada oo aad u wada qosla, marna kama aanan daali jirin inuu i farax geliyo, kalsoonida dhexdayadu waxay ahayd mid la mid ah dad isku dhex nool oo hal calool, hal wadne iyo hal maskax leh, weligiis imuusan dhibsan, waxa aan waydiistana wuxuu ahaa mid markasta ii fududeeya, xittaa hadduusan hayn ima uuna odhan jirin ma hayo, waxa aanu isku guursanay farxad tii ugu bilnayd, waxaanuna noqonay lammaanaha ifka ugu farxad iyo quruxda badan!!!.

Waxa aan u'addeecaa sidii Ilaahay swt i faray, waligayna hadal ka cadhaysiiya kuma odhan, xilliga uu shaqada ka yimaado anigu waan aqaanay, sidii saacadda ayayna qalbigayga ugu xidhnayd, xilliga uu shaqada kasoo baxona daqiiqad

masoo dib dhici jirin, wuxuu ahaa shakhsi igu farax geliya waxyaabo madadaalo ah, xattaa mararka qaar wuxuu iikeeni jiray hadiyado qaaliya, waxaanse meesha ka madhnayn inuu iikeeno mar-mar alaabo iga qoslin jirtay, sida:- nac-nac, shukhulaato iyo jalaato, weligiis albaabka cid aan ani ahayni kama furin, waxaana ahaa qofka koowaad ee markuu albaabka kasoo galo indhihiisu qaban jireen, farxad aan dareemayo darteed albaabka markuu kasoo galo indhahaan isku qaban jiray si uu ii qaado!!!.

Xattaa ma eegi jirin inuu qof kale la socdo, waayo kalsooni ayaan ku qabay oo wuu iisheegi jiray haddii cidi lasocoto intuusan soo bixin, saas albaabka markaan uga furo wuu i qaadi jiray, wuxuu sidii ilmihii ii xambaari jiray illaa qolka, waxaaba udiyaarsan biyo diirran iyo wixii uu xilligaas cuni lahaa oo aad ucarfaaya, waxaanu farxad iyo barwaaqo dhex mushaaxnaba waxa ii dhashay sannadkii saddexaad oo aanan wax ilmo ah u dhalin gacaliyahayga, sannadkan saddexaad wuxuu iigu bilowday murugo, waxaanu waynay farxaddii na-dhextaalay, waxaanu noqonay dad kusii siqaya farxad la'aan, waxaana dhibkaas keenay ku tidhi ku teen iyo qoyska wiilku ka dhashay oo aad noo cadaadiyay!!!.

Mar-marka qaar sodohday waxay guriga iigu iman jirtay ayadoo ay cadho ka muuqato, waxay ayadoon isalaamin i odhan jirtay naa-guumaysyahay uur ma leedahay, wiilkayga iska haysta, waa laguu sixray, mar hore ayuu carruur dhalilahaa, balse waxaan rumaysnaa qadarta oo aan aaminsanaa Allaah swt, wiilka waad iga sixirtay iyo hadalo qalbigayga xabad ku dhacaysa lamid ah ayay i odhan jirtay soddohday, balse anigu wax jawaab ah uma celin jirin oo xun, aan ka ahayn hooyo macaan soo fadhiiso, is deji hooyo qaali, Allaah swt ayaa bixiya hadiyaddaas, welina

ma hayno, si jees-jees ah ayayna iiga tegi jirtay, mar-marka qaarna waxa ii iman jiray anoo iska ooyaya gacaliyahayga!!!.

Waxaanu saas ahaanaba waxa dhashay sannadkii 4aad, waxaan go'aan ku qaatay inaan tago, waxaan la xidhiidhay aabahay oo xilligaas joogay ameerica, waxaan go'aan ku gaadhay inaan wax walba lasocodsiiyo, wuxuu ii sheegey ameerica inuu ikeeni doono oo lacag 30-kun oo doolar ah uu u qorsheeyay si layn laygu gado, arrintii ayaan hoos ugu sheegay xaajigayga, waxaana ku idhi:- sidaas ayaa jirta ee adna iska guurso, aniguna inaan wakhti dambe kaasii lumiyo ma rabo!!!.

Xaqiiqdii wuu i jeclaa, walow uu awlaad rabay, haddana isagoo ilmaynaaya ayuu iga aqbalay codsigayga, intaanan tegin waxaan bilaabay inaan cuno malab iyo xabad-sowdo ay hooyaday hadda kahor ii keentay, muddo 20 cisho ah ayaan cunayay, waxa soo dhawaatay bishii aan bixi lahaa, waxaan sabtida ku qoranahay diyaaradda usocota itoobiya si halkaas hawshaydii iigasii socoto, waxaan iswaydiiyey 20 cisho oo aad cunaysay daawadaas ma aadan helin wax caado ah ee maantaba isasoo baadh, waan shakiyay, si hoose ayaan dhakhtar u aaday, waxaan iska baadhay uur, waxaan xilligaas helay Ilaahay swt hadiyadaha uu bixiyo kuwa ugu qaalisan mid kamid ah oo ah ilmo, waxaan ogaaday inaan uur uleeyahay gacaliyahayga, waxaan laba beri kadib ku qoranahay diyaaraddii aan ku amba-bixi lahaa, waxaan ku laabtay xaafadda anoo wata warqaddii shaybaadhka oo xilligaas aan qaadi waayay culayskeeda, warqaddaas waxay igala cuslayd 100 kiiloo, waana wax iga yaabshay runtii!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Sida caadada ahayd xilligiisii uu iman jiray markii lagaadhay ayaan oohin iska qabsaday, mar waan kacaa, mar waan fadhiistaa, sidee ugu sheegtaa, maxaad samaysaa, qalbiga ayaa hadba wax idhahaaya, albaabka markuu saas usoo garaacay ayaan anoo maro kafudud booday, waxaan ka furay albaabka, hab ayaan siiyay anoo maanta shucuurtaydu ka badalan tahay sidii hore, waan soo kexeeyay, kuma deg-degin inaan u sheego hadiyadda aan uwado, markuu qobaystay, cunadii uu cunay oo uu sariiirta isku kala bixiyay ayaan si diiran intaan usoo ag jiifsaday u dhiibay warqaddii!!!.

Wuu furay warqadii, wuu iska ilmeeyay, wuu uqaadan waayay, habeenkaas ma aanaan seexan farxad iyo oohin darteed, waxaan sidii uga baaqday safarkii, waxa noosoo noqotay farxaddii naga haajirtay, hadda waanu wada noolnahay, waxaan u hayaa wiil iyo gabadh, sodohdayna qadarta Alle swt ayay rumaysatay, weliba hadda farxad ayay igula jogtaa, inay dembi iga gashayna markasta way qirtaa, wayna i raali galisaa!!!.

Ugu dambayna hadalkeedii waxay kusoo gunaanaday oo ay tidhi:- Alxamdulillaah, waxaan halkan kusoo gaadhay Samir, Ilaahayna swt wuu ii naxariistay ee samirka hala ogaado, sababtiina halala yimaaddo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SAAMAYNTA QOYSKA EE TIGNOOLAJIYADDA CASRIGAN!!!



Sidii caadadu ahayd marwadii waxay u kacday karinta quraacda, saygeediina wuu jiifay isagoo ku duuduubnaa buste, waxay guda gashay hawshii iyadoo isticmaalaysa teleefan, dhegahana gashatay eerfoon, daqiiqado kadib waxa soo kacay ninkii, wuxuu qaatay caag biyo kujiraan, wuxuu eegay jikadii, wuxuu damcay inuu la hadlo xaaska, balse fursadda musqusha uu ugu baahnaa ayaa aad usarraysay, iyaduna dhegaha ayay kula jirtay eerfoonkii, taasi oo keentay inuusan lahadlin, wuxuuna galay musqushii!!!

Isla markiiba waxa soogalay guriga ninka saaxiibkii isagoo dhahaya:- dumaashi waan ku salaamay, qoraacduse diyaar matahay, balse maysan ujawaabin, waayo maba maqasho, wuu eegay mise eerfoon ayaaba ugu jira dhegaha, muusan

isku mashquulinin oo wuxuu is yidhi:- soo-saalan saaxiibkaa, balse isagiina wuu ka waayay qolkii, illeen musqusha ayuu ku jiraaye, wuxuu bilaabay sariirta inuu isku tuuro, isna yidhi:- waa guriga saaxiibkaa, wuxuu gal-gashaba waxa ku timid hurdo isagoo ku duuduuban bustihii!!!.

Waxa uu ku dheeraaday mushqushii ninkii, sidoo kale waxay soo geba-gebaysay hawshii ay gabadhu haysay, waxay soo aaday qolka si ay xaajigeeda ugu kiciso quraacda, balse waxay is tidhi:- muuqaalka aad kaga soo baxday jikada yeysan indhihiisu qaban, waxay bilawday inay albaabka xidho iskana bedesho dharkii, yara habayso wejiga iyo tinta, xaalku markuu halkaa marayo ayaa mur-qudha albaabka lasoo qaraacay, waxayna tidhi:- yara sug aan is asturee, wuxuu ugu war-celiyay:- habeen iyo maalinba waan ku aragnaayee maxaad iska asturi, way yaabtay oo tidhi:- codkani waa codka xaajigaaga, haddaba hadduu isagu bannaanka joogo waa kuma qofkan sariirta jiifaa, hal mar ayay ka qaadday bustihii, saa waaba dumaashigeed, naxdin iyo yaab, waxay furtay albaabkii, indhaha wuxuu ku dhuftay xaaskiisa oo xidhan dirac qafiif soo jiidasho leh, iyo sidoo kale saaxiibkiis oo dhididsan, iyadana dhidid ayaa ka socday, waxay tidhi:- arrinkan ma ogi, sidaad moodaysidna ma'aha ee shaydaan yuu sawir qaldan ku siin!!!.

Balse isaga maysan qancinin ereyadaasi dhegihiisa soo gaadhay, waxa cirka isku shareeray buuq, heer ay markii dambe gaadhay arrintu gacan ka hadal, waxa isugu yimid goobtii dad ka ag-dhawaa iyo deriska, waxa dadkaa ku jiray oday xikmad badan, daqiiqadba daqiiqadda ku xigtay waxa cirka isku shareerayay buuq iyo dood, mararka qaarna kala celiyaay ayaa ka dhacaysay, odaygii ayaa aamusiiyay sawaxankii dadka, waraysina ka qaaday saddexdii is haysatay, markii loo sheegay

sidii arrinku ahaa oo dhammaystiran ayuuna u jeestay dhankii ninka, deetana ku yidhi:- miyaad aragtay iyagoo samaynaaya waxaad uga shakisantahay, wuxuu ugu jawaabay:- maya, odaygii ayaa yidhi:- haddaba adigoo aan ku arkin sideed ku dhihi kartaa way samaynayeen, mase haysaa sabab macquul ah oo aad udaliishanayso!!!.

Wuxuu ku jawaabay:- haa, way jirtaa, intaanaan is guursan way wada sheekaysan jireen, ugu dambayna aniga ayuu calafkeedii noqday, waxay ku jireen qol ka xidhan hoos, sidoo kale markay iga fureen way dhidid-sanaayeen, waxayna xidhnayd dhar qafiif ah, misana soo jiidasho leh, arrimahaas ayaan u daliishanayaa!!!.

Odaygii ayaa yidhi:- hagaag, waan gartay, haddaan bur-buriyo oo aan keeno sabab macquul ah oo burinaysa sababaha aad la timid maxaad samayni, wuxuu ku jawaabay:- shakiga ayaa iga baxaya, raalli-galina waan samayn, duqii ayaa bilaabay hadalkii oo yidhi:- marwadaadu waxay kugu ogayd qolka, sida aad sheegtay maad lahadlin markaad soo baxday, sida uu saaxiibkaa iisheegayna maysan u jawaabin markii uu lahadlay, illeen waxbaa dhegaha ugu jiraye, wuxuu galay qolkaaga, wuu kaa waayay, wuu iska seexday, maadama uu is yidhi:- waa qolka saaxiibkaa, markay hawsha dhammaysay ayay qolka gashay, kana soo xidhatay hoos, illeen adiga ayay kugu ogayde, haddaba arrinkaasi saw macquul ma noqon karto!!!.

Wuxuu ku jawaabay:- haa, way noqon-kartaa, odaygii oo hadalkiisa sii wata ayaa yidhi:- kabasoo-qaad waxaad uga shakiday ayay samaynaysay, balse macquul ma noqon kartaa marwo aan hubin ninkeedu meeshuu jiro inay damacdo arrinkaas, waayo hadday damacdo xittaa waa inay iska hubisaa meesha aad jirto, muddada aad maqnaanayso, xilliga aad imanayso, saaka waad huruday, xilligaad

musqusha gashayna maysan ogayn, kaba soo qaad wayba ogaatay, ma kula tahay inay wax samaynayso intaad musqusha ku jirtid, ninkii ayaana garwaaqsaday hadalkii ninka odayga ah, raalli-geliyay saaxiibkiis, marwadiisii iyo deriskiiba, una mahad-celiyay odaygii!!!.

Tignoolajidadda wakhtigan casriga ahi waa sida mindi laba-af leh, kafaa'iidaysigeeduna waxa uu ku xidhanyahay hadba dhanka aad uga faa'iidaysato ama ka isticmaasho, sidaa daraadeed si taxaddar leh u isticmaal, ugana faa'iidayso dhanka wanaagsan, ka dhawrsiga waxyaabaha khaladaadka ama aan habboonaynina waa muhiim, haddii inuun uu si khalad kaaga dhacona, haba yaraadee, kuwajah jawi deggan iyo taxaddar sidii aad uxallin-lahayd dhibaatadii katimid khaladkii kaa dhacay, lafteeda cidda gefka tirsanaysaana iyana waa in ay arrimaha jawi deggan iyo hubsiimo kuqaabishaa si aanu iyagana cadawgii aadamuhu uga faa'iidysan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HADDABA, HOTEELADA QADO KASOO QAAD!!!



Nin ayaa xaaskiisii ku yidhi:- berri waxaan casuumayaa xaafadayadii beryahaa ismaanu arage, aabahay, walaaladay iyo hooyaday, markaa casuumad fiican qado inoogu kari, waayahay ayay ku tidhi, markii waagii beryay ayuu ninkii shaqadiisii u baxay, duhurkii markii uu shaqadii ka yimi ayuu guriga soo galay, waxa uu arkay iyada oo aan waxba lakarin, wuxuu ku yidhi xaaskii:- maxaad cunto wanaagsan usamayn wayday, miyaanan ku odhan ehelkaybaa imanaaya, waxay ugu jawaabtay:- dee xaafaddiinu ma'aha qariib ee waxaynu cunno oo kale ayuunbaynu siin, dadka qariibka ah ayaa la iska hagaajiyaa oo casuumad fiican loo sameeyaaye!!!.

Ninkii wuu yaabay, gurigii waa uu iskaga baxay, cabbaar kadib albaabka guriga ayaa lasoo garaacay, gabadhii ayaa ka furtay, mise waxa taagan debedda hooyadeed, aabaheed iyo walaaladeed, naxdin ayay la aamustay, aabeheed ayaana ku

yidhi:- odaygaagii ayaa nala soo hadlay shalay oo noo sheegay in casuumad xaafadda berri lagu samaynaayo!!!.

Haweenaydii yaab iyo amakaag ayaa kasoo hadhay, wuu yara baxay ayay ku tidhi, ninkeedii ayay garaacday, waxay ku tidhi:- maxaad iigu sheegi wayday in aad xaafadayadii soo casuuntay!, wuxuuna ugu jawaabay:- ehelkayga iyo ehelkaagu inay iskumid yihiinbaan moodaayay, oo anigu ehelkiina ehelkayga ayuunbaan u haystaa, waxay ku tidhi:- haddaba hoteelada qado kasoo qaad, kadib intuu ku qoslay ayuu ku yidhi:- qadadii aad ehelkayga ugu-tala-gashay sii!!!.

Nolosha lammaanenimada waa in labada qof ee nolosha wadaagaaya midba midka kale uhaystaa inuu isaga yahay dhankasta oo nolosha ay kanoqotoba, yacni dhib iyo dheefba, wixii aanu naftiisa lajeclayna uu isna ka ilaaliyaa, wixii uu naftiisa lajecelyahayna lajeclaadaa, runtii arrimaha qaar iyo xaaladaha qaarna xittaa in laysku jirrabo ama laysku qiimeeyo mawanaagsana, waayo haddii ay arrimahaasi dhanka aan wanaagsanayn udhacaan waa arrimo idin wada saamaynaaya qoys ahaan, balse aan ku koobnaanayn xubin qudha, sida aynu ka arki karnoba qisadan aynu kor kusoo xusnay, sidaa daraadeed naftiisu waa naftaada, nafteeduna waa naftaada!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SAW EDEB UMA YEELIN!!!



Nin ayaa muddo dheer xaas lahaa, xaaskiisu wax carruur ama ubad ah ma aysan u dhalin, xaaskii ayaa maalintii dambe ku tidhi:- maad iska guursatid xaas kale, waxa laga yaabaa inay carruur kuu dhasho'e, ninkii ayaa ku yidhi:- maya xabiibti, ma samaynaayo, waxa laga yaabaa inaad murantaan, kadibna aad kamasayrto, xaaskii ayaa ugu jawaabtay:- maya, ma dhacayso, waan ku jeclahay xabiibi, iyadana waan soo dhoweynayaa (haddii Eebbe idmo), mana is khilaafi doono, ninkii ayaa ogolaaday arrintii iyada ahayd, wuxuuna ku yidhi:- haddaba dhul kale ayaan ka doonanayaa mid halkan qariib ku ah, si aydaan isku khilaafin ee la soco!!!.

Maalinkii dambe ayuu safar ubaxay, maalmo kadib ayuu soo laabtay isaga oo wata caruusad ka samaysan dhoobo oo uu usoo xidhay dhar dumar, cabaayadna usoo geliyay, wuxuu dhex-dhigay qol kamid ah qolalkii guriga caruusaddii oo lebisan

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

oo gabadh u 'eeg, wuxuuna xaaskiisii ku yidhi:- taladaadii waan qaatay xabiibi, waana taa halkaas jiifta gabadhii aan soo helay, aad ayay udaalan tahaye ha utegin, berri ayaan iskiin bari doonaana insha Allah, kadib shaqadiisii ayuu iska aaday!!!.

Galabtii markii uu shaqadii kasoo laabtay ayuu uyimid xaaskiisii oo oohin indhuhu casaadeen, wuxuu ku yidhi:- maxaa kugu dhacay macaan?, yaana kaa oohiyay?, waxay ugu jawaabtay:- naagtan aad keentay saaka illaa hadda cay iyo afxumo ayay igu waday, madaxaaga ayaan ku dhaafayay maahane wax ay ii reebatay ma jiraan, sharaftaydana meel ayay kaga dhacday!, ninkii ayaa intuu iska xanaajiyay ku yidhi:- ma adiga ayay kugu bilawday isla maantaba, haddii aanan garaacin bahasha caloosha kuusan, kadibna ul wayn oo bud ah ayuu inta uu sooqaatay laba ka kala dhigay caruusaddii dhoobada ahayd ee gabadhu ka masayrtay dharka dumarkana xidhnayd!!!.

Xaaskii ayaa madaxu wareegay xishood, ceeb iyo yax-yax dartiis, ninkii ayaana ku yidhi:- haye, hadda raalli ma tahay?, saw edeb uma yeelin?!, cod diciif ah ayayna kutidhi:- Alla waan ku baryayaa walaalow ee ha i eedaynin, maxaa yeelay naag lagula qabo way dhib badan tahay, xattaa caruusadba ha ahaatee!!!.

Allah swt ayaa inoo sheegay in shirqoolka dumarku uu waynyahay, halka ka shaydaanku uu diciifka kayahay, iyadoo haween oo dhami aanu isku mid ahayn, haddana arrimohoodu hubsiimadooda dheeraadka ah ayay ubaahanyihiin, waxaana suuragal ah in ay raggooda usoo bandhigaan barnaamijyo badan ama siiyaan macluumaaddo lagayaabo in qaarkood aanay wax-jiraba ahayn, iyaga oo ku jirrabaaya, arrimo kale kaga go'aan qaadanaaya ama barnaamijyo gaar ahba ku

fushanaaya, lab ama dhedig-base qoysaska lammaanayaasha ah uma wanaagsana arrimaha lahalmaala jirrabaaddu, sidaa daraadeed uraadi halbeeg sax ah ama lagu go'aan qaadankaro arrin kasta oo laguusoo bandhigo ama aad ka go'aan qaadanayso, haddii kale waxa laga yaabaa in khaladaadka kaa dhacayaa ay farabataan!!!.

Hubsiimo iyo taxaddar kuwajah dhammaan arrimaha kugu hareeraysan!!!.

JACAYLKU WAA INDHO LA'YAHAY!!!



Carabtu waxa ay ku maah-maahdaa maah-maah uu macnaheedu yahay **'Jaceylku waa indho la'yahay, laakiin ma'aha in xeryaha dawladda uu kula galo'**, Lucy Aharish waa gabadh falastiiniyad saxafiyad ah, waxa ay jeclaatay oo ay guursatay jilaa caan ah oo yuhuudi ah lana yidhaahdo Tsahi Helavi, ahna wiilka sawirkiisu kor ku xusanyahay, timirtaba laf kamay deyine wasiirkii arrimaha gudaha Israa'iil Arya Deri ayaa markiiba inantaas Jaceylkeedii yaraa ka hadlay, isaga oona yidhi:- waan kasoo horjeedaa, sababtuna waa waajibka naga saaran ilaalinta dadka yuhuudda ah!!!.

Wasiirka gudaha ayaana idaacadda ciidamada yuhuudda u sheegay in carruurta ay dhalaan Lucy Ahresh iyo Tsahi Helavi ay tarmi doonaan, kadibna ay

dhibaatooyin culus la kulmi doonaan, xildhibaannada yuhuudda ayaa iyana qaarkood ku timaameen gùurka Lucy iyo Tsahi mid halis ku ah qaranka Israaiil!!!.

Gabadhan ayaa ah saxafiyad Falastiiniyad Muslim ah aadna ugu hadasha afka cibriga ama hebrew ee asal ahaan yuhuuddu ku hadasho, halka isna uu ka yahay jilaa yuhuudiya afka carabigana aad ugu hadla!!!.

Waxa habboon in qofku uu umeel dayo qofka iyo qoyska uu ka guursanaayo labadaba, waayo qofka ama qoyska xun ee aad ka guursataa kama dhacdo xero ciidan oo aad gashay!!!.

SAMADE IYO CYNTHIA!!!



Samade, wuxuu soo dhammaystay cilmiga Applied Physics oo uu ka baran jiray jaamacadda Nigerian University ka hor inta uusan ku dhacin xanuun maskaxda ah, wuxuu ahaa shakhsi aad looga jecelyahay magaaladiisa, maadaama xanuunka dhimirka ah ee ku dhacay uusan wada seejin hibooyinkiisii uu lahaa, wuxuu heesi jiray oo ciyaari jiray qoob ka ciyaar, isaga oo aan haysan miyuusik, taas oo dadka daawadaa aad uga heli jireen.

Wuxu xidhiidh jacayl dhex maray haweenay iyana lanool xanuunka dhimirka oo sidiisa oo kale ah lana yidhaahdo Cynthia, waxay si wada jir ah ugu noolaayeen buush ay iyagu samaysteen oo ku yaala buundo caan ka ah magaalada ay joogeen, waxay halkaas isku wehelinayeen muddo laba iyo labaatan sanno ah, waxa marar badan la arki jiray iyaga oo qaylinaaya oo murmaaya, laakiin qofna ma ogayn

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

sida ay u xalistaan khilaafkooda!, nasiib darrada Samade iyo Cynthia u dheerayd taasna waxa ay ahayd inaanay isku luuqad ku hadli jirin, maadaama ay kasoo kala jeedeen laba gobol oo kala duwan!!!.

Lammaanahan qurxooni waxay kala heleen oo isu dhaleen saddex carruur ah, waxay muddadaa dheerna wada noolaayeen, caruurna wada dhaleen iyaga oo aan lala farxin, aroos loo dhigin, aqal loo sharrixin, hadiyad iyo tahniyadna aanay cidna ka helin!, way xanuunsanayeen, laakiin way isku qanacsanaayeen, waxaana la arki jiray iyagoo is shuminaaya, laabta is gelinaaya isna waydaarsanaaya dareen jacayl!!!.

Waxay wadaageen wax walba, waxay uwada qobaysan jireen wada-jir, waxay uwada ciyaari jireen oo martidooda umaaweelin jireen wada-jir, waxay u xanuunsanayeen wada-jir, waxay u noolaayeen wada-jir, waxayna u dhinteen wada-jir iyagoo wada geeriyooday sanaddii 2007!!!.

Noloshu waa qanaaco, seeska qanaacaduna waa Iimaanka.

Jacaylku ha waaro!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

DAVID IYO HEATHER!!!



Jacaylku waa dareenka ugu wanaagsan uguna daacadsan ee qalbiga soo mara, waa mid kamid ah nimcooyinka nolosha ee uu Rabbi swt bixiyo in lagu jeclaado ama inaad wax jeclaatid, in uu qof si qoto dheer leh kuu jeclaadona waxa ay ku siinaysaa quwad, jaceylku waa markii farxadda qofka kale kaaga muhiimsan tahay adiga farxaddaada, run ahaantii qof weliba oo nool mar uun buu jaceylka dhadhamiyaa, jaceylku waa inuu ahaadaa mid aanay sharuudi ku xidhnayn amaba wax xadidaad ah lahayn, Jaceylka dhabta ahina qofku dan gooni ah ma eegto, wax khiyaamo ahna kuma kaco wax walba oo dhaca, haddaba haddii aad doonaysid jaceyl dhab ah, waa inaad u hurtaa wax walba, inkasta oo waayadan dambe ay adagtahay inaad heshid jaceyl daacadnimo ku dheehan tahay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Tani waa qiso jacayl oo adinka ilmaysiin doonta, waa qiso jacayl oo dhab ah kuna dhacday Heather iyo David oo Maraykan ah, waxay isbarteen 2015, laakiin sannad kadib ayaa waxa laga war helay Heather inay ka cabanayso kansar naasaha gudahooda ku dhaca, taariikhdu markay ahayd 23-Desember-2016 David ayaa qorshaystay inuu guur usoo bandhigto jacaylkiisa, balse isla maalinkaa ayay ahayd maalinkii Heather laga helay inay qabto kansar naasaha ah, David ayaa yidhi:- kamaysan warhaynin inaan habeenkaas u faraanti gelin rabo, laakiin aniga ayaa niyadda iska idhi:- waa inay ogaataa inaysan keli ku ahayn dhibaatadan, waxa uusoo kiraystay gaadhi faras aad u qurux baban uuna ugu talagalay farraanti geliska, waa ay wada raaceen labadooduba, markii meel dhexe la maraayo ayuuna farraantigii ugu geliyay jacaylkiisii!!!.

Nasiib darro Heather caafimaadkeedu waxa uu bilaabay inuu sii liito marba marka ka dambaysa, shan maalin kadib dhakhtarka ayaa usheegay kansarka hayaa inuu yahay nooc xun oo aad u daran oo naasaha kudhaca, war kale oo murugo leh ayaa haddana loo sheegay oo ah in uu gaadhay maskaxda, labo bil kadibna waxay kusoo arurtay xaaladdu in oxygen lagu xidho!!!.

Waxay doonayeen inay is guursadaan 30-Desember-2017, laakiin Heather caafimaadkeeda oo aad u liitay darteed waxay u bedesheen 22-Desember-2017, Heather iyo Davidna way is guursadeen isla maalintaas dhakhtarka dhexdiisa, waxaana arooska kasoo qayb-galay reerahooda iyo saaxibadood, 18 saacadood kadibna Heather waxa ay ku geeriyootay isla dhakhtarka dhexdiisa!, David ayaana yidhi:- waxa ay ahayd jacaylkayga, waan ogahay inaan waayayo, laakiin ilaabimaayo weligay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Jacaylka dhabta ahi kuma xidhna goob, wakhti iyo xaalad toona, balse waa ka ku garab-taagan xaalad walba oo aad ku sugantahay, kulana qaybsanaaya oo si dhab ahna kuula dareemaaya dhib iyo dheefba, sidaa daraadeed dooro jacayl dhab ah, halkii aad lanoolaan lahayd jacayl dhalanteed ah, tanina waa mid kamid ah qisooyinka sida dhabta ah dareenkeedana wadata inoo tusinaaya qiimaha uu leeyahay jacaylka dhabta ahi iyo wanaagga ku daahsooni heerka uu gaadhsiisanyahay!!!.

Uhawlgal waad heliye!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

CAQLI LA IMOW!!!



Wiil iyo gabadh ayaa sheeko wadaag ahaa, gabadhii ayaa wiilkii kutidhi:- hoteel in aad igu casuunto ayaan rabaa ama igu marti qaaddo, wiilkiina ‘haye’ ayuu ugu jawaabay, way israaceen, hoteelkii ayayna tageen, waalasoo dhaweeyay, way fadhiisteen, way sheekaysteen, waxoogaa markay fadhiyeen ayuu mudalabkii uyimid, maxaan idiin keenaa ayuu waydiiyay:- gabdhii baa tidhi:- aniga waxaad iikeentaa digaag, baasto iyo sharaab, wiilkii wuxuu dalbaday fuul suudaani, illeen wiilku wuu is ogyahay inuuna lacag fiican haynine mudalabkii markuu kategay ayuu kadaba kacay, kuna yidhi:- wll labada cashoba fuul noogasoo dhig oo noosoo safaarigaree xaafaddaanu uqaadanaynaaye, anigu lacag fiican mahaysto, iyaduna anigay ilasocotaaye!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Wiilkii halkiisiibuu kusoo noqday, gabadhiibuu lasoofadhiistay, deedna mudalabkiibaa ukeenay wixiiyoo diyaarsan, gabadhiibaa tidhi:- oo halkan kuma cashaynayno miyaa, wiilkii ‘maya’ ayuu ugu jawaabay, waan daahsanahay ee inamari xaafaddaynu lategaynaaye, gabdhiina ‘haye’ ayay tidhi, wayna israaceen, wuu sii dhaweeyay, markay kala leexanayeen ayuu siiyay cashadeedii, markay guriga tagtay ee ay furtaybayna yaabtay, illeen waxay dalbatay ma ahayn fuul’e, iyadoo yaaban ayuu wiilkii soo wacay, wuxuuna kuyidhi:- xabiibti cashadii way inoo kala bedelantay, taadiibaanaan anigu qaatay, markaan furay uunbaanaan arkay inaysan taydii ahayn!!!.

Caqli la imow xilliyada xaaladaha ama arrimaha ad-adagi kusoo wajahaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

MAQAAL-KASAMIR!!!



Qalbigaaga ayay jebinayaan, waxay kaaga tegayaan sabab la'aan, waxaad ka dooratay dad oo dhan, waxaad aamintay in badan, waxaad u ahayd daacad, waxaad u hurtay naftaada, waxaad u samaysay wax kasta oo aad awooday, laakiin wax kale iyo meel kale ayaa u muuqatay mar kasta, waxa kugu soo hadhay su'aalo maskaxdaada u garaacaaya sida mowjadaha badda oo buur ku dhacaaya, waxaadna is waydiinaysaa:- maxaan sameeyaa?, xageese wax ka bilaabaa?, iyo maxaa xal ah?!!!.

Haddaba, ha niyad jabin, waad isku filan tahay, waadna ku saxsanayd in aanad naftaada u khiyaamin qof aan kala saari karin quruxda rasmiga ah iyo midda khiyaaliga ah, aan kala garan karin wanaagga & xumaanta, dhalanteedkana mooda dhabta, marnaba ha u ciqaabin naftaada khaladaad qof kale sameeyay, ha u baabi'in

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

noloshaada qof aysan ka go'nayn inuu kula wadaago, waadna ku saxnayd markii hore inaad qalbigaaga u furtay adigoo u eegaayay shuruudihii kula qummanaa!!!.

Xusuusnow waad ka bogsanaysaa xanuunkan, waad hilmaamaysaa wixii aad soo martay, waxaadse baratay cashar wayn, waxaad noqotay waaya-arag, samee wixii wanaag ah, xoogga saar waxa naftaada horumar u horseedi kara, iskuna mashquuli wixii wanaag ah, ha furnaado qalbigaagu, kuna ducayso beddel khayr qaba in Alle swt ku siiyo, cafi una ducee qof kastoo ku xumeeya, marnabana haku fikirin inaad ka aar goosato, waayo, ogow oo waxaad is aaminteen xilli aad isku dhoweydeen!!!.

Ugu dambayn ma lagu jebin karo haddii aadan adigu is dhiibin ama dhulka is dhigin, ogsoonow hadda dhaawac ayaa tahay, laakiin kuumay dhammaan oo weli waxaad leedahay rajo aad u sarraysa, la socona in goobtani (dunida) ay tahay goob imtixaan, marwalbana Rabbigaaga swt talo saaro, xus oo xasuusnow.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Q: SADDEXAAD, QISOOYIN QUBANE AH:-

HOOYO MAXAAD U-OOYAYSAA!!!



Wiil yar oo ay wejigiisa ka muuqato yaab iyo su'aal ayaa hooyadii oo indhaheedu guduudan yihiin waydiiyay:- Hooyo, maxaad u ooyaysaa?, ma cidbaa wax kuu dhintay?, hooyadiina waxay ugu jawaabtay cod naxariis leh:- ma jiro wax i gaadhay wiilkaygiiyow, balse waxaan ahay dumar, waana sababta aan u ooyayo, jawaabtaasi ma qancin wiilkii yaraa, waxayna ku reebtay su'aalo hor leh, isagoo jaah-wareersan ayuu aabbihii waydiiyay sababta ay hooyadii mar walba u oydo iyadoon sabab muuqata lahayn, aabbihii wuxuu ugu jawaabay si kooban:- dumarka oo dhami sidaas ayay u ooyaan sabab la'aan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Wakhtigu wuu socday, wiilkii yaraa wuxuu noqday nin wayn, balse weli waxa maskaxdiisa ka guuxayay su'aashii carruurnimada, si uu u helo jawaabta dhabta ama saxda ah ayuuna wuxuu u tegay caalim-wayn oo xikmad lagu tiriyo, markii uu hordhigay su'aashii sannadaha badan maankiisa ka dhex-guuxaysay caalimkii wuxuu u eegay si qoto dheer, wuxuuna ugu jawaabay cod deggan oo xikmadi ku dheehan tahay, wuxuu ku yidhi:- wiilkaygiiyow, markii Eebbe swt abuuraayay haweenka, wuxuu siiyay awood mucjiso ah oo aanay cid kale la wadaagin, wuxuu u yeelay garbo aad u adag oo ay ku xambaari karaan culayska dunida, haddana uu ka dhigay kuwo jilicsan oo bixiya naxariis iyo degganaansho!!!.

Wuxuu geliyay laabteeda awood qarsoon oo ay ku adkaysato xanuunka foosha, isagoo siiyay dulqaad ay kaga gudubto diidmada carruurteeda iyadoo weli qalbiga ugu haysa jacayl aan shuruud lahayn, waa tii ilaalinaysa midnimada qoyska, xittaa marka qalbigeedu daalanyahay ee aan waligeed ka cabanayn rafaadka nolosha, xittaa haddii ay carruurteedu dhaawacaan iyada ayaa mar walba ah tan ugu horraysa ee wax cafida una ducaysa!!!.

Sheekhii oo hadalkiisa sii wata, ayaa yidhi:- ugu dambayntiina, markii culaysku ku bato, Alle swt wuxuu siiyay hadiyad gaar ah oo la yidhaahdo 'Ilmo', ilmadaasi ma aha calaamad daciifnimo, ee waa habka keliya ee ay kaga nefisto culayska saaran, waana luqadda keliya ee ay ku cabirto dareenkeeda marka afku uu awoodi waayo inuu hadlo, sidaa darteed, ixtiraam ilmadaas, waayo dhibic walba oo kamid ahi waxa ay xambaarsan tahay dareen iyo duco aan qalin iyo qoraal toona lagu koobi karin!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Weedhahaas xikmadda leh kadib, waxaad ogaataa in hooyadu tahay tii laga jaray xudduntaada markii aad dunida timid, balse aanu weligeed qalbigeedu kaa go'in, waa tii ku korisay, ku daryeeshay, ku jeclaatay xilli aanay kuba arag oo aad ku jirto caalamka riximka, sidoo kalena aanad naftaada waxba u qaban karin, maantana iyadaa u baahan naxariistaada, ee inta aynu noolahay ee aynu fursadda haysanno aynu gacmaha u taagno ducada kuwa inoo hibeeyay noloshooda.

Rabbiyow, Hooyaday iyo hooyooyinka muslimiinta ah oo dhan ka waraabi xawdka Nebigeenna Muxammed scw, kana dhig boqoradaha Jannadaada Firdowsa.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ALLAAHU AKBAR!!!



Diyaaraddii Lion Airlines ee laga lahaa Dalka Indonosia ee badda ku bur-burtay ayaa laga helay badda korkeeda ilmo yar oo xidhan jaakadda badbaadada, waxaana u xidhay sida la ogaaday hooyadii ilmahan yar dhashay, taas oo sabab u noqotay in uu ku kor sabbeeyo badda muddo saddex maalmood ah!!!.

Hooyadiis waxa ay ku fikirtay in uusan canugeedu dhiman, ayaduna waxay ku jirtay kuwa geeriyooday, Allahu akbar!!!.

Dareenka waalidka ee ilmihiisa waxa uun si dhab ah udareemi kara qof marxaladdan waalid-nimo Allah swt uu ku simay, kuna deeqay, waajibkiisana gartay, ee udedaal oo usama-fal waalidkaa inta aad ifka wada joogtaan iyo aakhiroba haddii ay kaa horreeyaan, Diinteenna suubanina waajib faral ah ayayba inagaga dhigtay

usamafalka waalidka xittaa hadday Diin-laawayaal yihiin, iyadoo weliba innagusii adkaysay xuquuqda Hooyada oo saddex-jeer kasarraysa Aabaha, jannadana laba hoos-dhigay cagaheeda, waxyaabaha kale ee aynu qisadan ka dhex arki karaynona waxa kamid ah in wixii uu Allah swt qoro uun ay dhacaan, waadna dareemi kartaa ilmo yar oo keligii muddo saddex maalmood ah bad-wayn dusheed mawjaduhu isu celinayaan!!!.

Allaahu akbar.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

CIDHIBTA CAASI-WAALIDKA!!!



Nin ayaa guursaday haweenay, habeenkii markii la gaadhay ayaa waxa u timid xilligii cashada hooyadii ninka dhashay, ninkii ayaa wuxuu ku yidhi xaaskiisii:- inoo keen cashada, markii ay cashadii keentay xaaskii ayuu yidhi:- aynu cashayno, xaaskii ayaa tidhi:- hooyo aynu casho siino, ninkii ayaa wuxuu yidhi:- inaga daa way hurudaaye, waxay ku tidhi:- waar waa hooyo, casho la'aan ma ahaan karto, wuxuu ugu jawaabay:- cashadu inaga keliya ayay inagu filan tahay ee iska dhaaf, sidii ayay ku casheeyeen, hooyadiina casho la'aan ayay iska seexatay, subaxdii markuu waagu beryay ayay gabadhii ku tidhi ninkii:- i fur, sidaana ku wada joogi mayno, ninkii ayaa la yaabay oo ku yidhi:- maxaa kugu dhacay, reerkaaga dhaqo, lagama yaabo ayayna tidhi, ee i fur, sidii ayuuna ku furay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Gabadhii nin kale ayay guursatay, waxa ay udhashay carruur badan oo baariyaal ah, muddo kadib islaantii xajka ayay ilmaheedii u soo kaxeeyeen, iyaga oo maraya dhul saxare ah oo ay carruurteedu hareeraha ka socdaan, oo ay cunto iyo wax walba u wadaan ayaa waxay ay aragtay nin oday ah oo keligii lugaynaaya, dhar wasakhaysan oo jeex-jeexan wata, dhibaato fara badani ka muuqato, way garatay inuu yahay ninkeedii hore, way la hadashay oo ay ku tidhi:- heblaayo oo aad furi jirtay ayaan ahay, waxaan kugu nacay oo keliya waa caasinimada aad caasi ku ahayd hooyadaa, waxaana ka baqay in aan dhalo ilmo caasi ah sidaada oo kale!!!.

Hadda waa kaa, Allah mahaddii Ilaahay swt wuxuu isiiyay carruur baariyaal ah oo ii adeegaaya, wax walba oo aan u baahanahay ayay i siinayaan sida aad aragtidba, adiguna keligaa ayaad socotaa oo ilmahaagii caasi ayay kugu noqdeen, halkii ayayna cunto iyo dhar ku siisay!!!.

Sida sunnaha noloshu ina tusinaayo inta badan waxa jira xidhiidh kadhaxeeya ladhaqanka iyo hab-dhaqanka waalidkaa iyo natiijada aad adna kala kulmayso ubadkaaga, waaba haddii aad ubad dhashee, sidaa awgeed uwanaagsanow waalidkaa si adna ay kuu addeecaan kuwa kaa beermaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

JACYLKA KELIYA EE BILAA SHURUUDDA AH!!!



Kadib markuu Aabihii dhintay halkii wiil ee ay dhaleen wuxuu go'aansaday inuu hooyadii kaga tago guri qaraami ah oo gaboobay, wuxuu soo booqan jiray hal mar bishii, taas oo markii dambe isu bedeshay hal mar sannadkii, wuxuu guri wayn ka dhistay magaalo kale oo uu ka shaqayn jiray, wuxuu yeeshay reer, maalin ayaa lasoo wacay oo loo sheegay in hooyadii ka codsatay inuu deg-deg ugu yimaaddo oo ay rabto inay la dardaaranto, markuu u yimid ayuu arkay inay aad u liidato, dhimashana qarka u saaran tahay, wuxuu waydiiyay hooyadii:- ma jiraan wax aan kuu qaban karo?, hooyadii ayaana ugu jawaabtay:- fadlan marawaxad kusoo xidh gurigan, waxaadna keentaa tallaagad!!!.

Wiilkii ayaa isagoo yaaban su'aalay hooyadii:- sannado badan ayaad joogtay halkan marawaxad iyo tallaagad la'aanna marna kama aadan caban, hadda

oo aad saacadihii ugu dambeeyay ee noloshaada ku jirto maxaad u rabtaa?, hooyadii ayaana ku tidhi:- taasi waa sax, anigu adkaysi ayaan u lahaa, waana maareeyay inaan ku noolaado, laakiin adigaan kaa wel-welayaa haddii carruurtaadu halkan kuusoo diraan, waxaan ka baqayaa inaad xamili waydo, aadna rafaaddo, wiilkiina illin aan hadda waxba qabanayn ayaa indhihiisii kasoo qubatay, naxdin iyo ceeb ayuuna la hadli kari waayay!!!.

Waalidkaa kaama tegin kolkaad aadka ugu baahnayd ee aad yarayd, ee cidla ha kaga tegin markii ay waayeel noqdaan, Jaceylka keliya ee aan shuruudi ku xidhnayn, aan xad lahayn, aanana sugayn soocelin, lagana waynaani waa Jacaylka hooyada!!!.

Waalid kasta Allah swt hasiiyo awlaad aan cidla kaga tegin oo baarri u ah.

WIILKAYGII AYAA IMANAAYA OO GEBIGIINABA IDIN LAYNAAYA!!!



Hooyo ayaa ku noolayd wiilkeeda gurigiisa, kaas oo ku yaalay meel cidlo ah oo magaalada ka fog, wiilkeedu waxa uu ahaa mid hooyadii neceb oo karahsada, nacaybkiisii wuxuu gaadhay inuu ku fikiro sidii uu hooyadii u dili lahaa, wiilkii waxa uu go'aansaday inuu hooyadii cidlada kaga baxsado, habeen ayuuna reerkiisii alaabtii u xidh-xidhay, hooyadii oo hurudana reerkiisi raray!!!.

Markii waagii dillaacay ayaa ninkii iyo reerkiisi magaaladii soo gaadheen, waxay galeen hoteel oo ay laba qol ka kiraysteen, ninkii xaskiisa oo ka damqatay arrinka foosha xun ee uu ninkeedu ku kacay ayaana ku tidhi:- ogsoonow in carruurtaaduna cadow kugu noqonayso adiga hadhaw, ninkii hadalkii xaaskiisa ayaa ka nixiyay, cabsi iyo beertaabasho ayuu ku noqday, dib ayuuna usoo cararay si uu

hooyadii usoo kaxeeyo, waxa uuna u tegay hooyadii oo ay waraabayaal ku uruursanyihiin iyaduna dhexda ay ugu jirto oo ay leedahay:- wiilkaygii ayaa imanaaya oo gebigiinaba idin laynaaya!, oohin iyo ilmaa iskusoo taagtay, intuu qori qaatay ayuu waraabayaashii eryaday, hooyadiina waa uu soo kaxeeyay!!!.

Ax, hooyo waa hooyo, waa mid marwalba ubadkeeda wanaag lajecel xittaa iyada oo og xumaantooda, udhibirsanow kuwii kuu dhibirsanaa markaad ubaahnayd, ogowna saad kayeesho in adna berri lagaa yeeli doono!!!.

Wixii aad beerato ayuunbaad goosanysaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

JANNADU WAXAY TAALLAA CAGAHA HOOYADA HOOSTOODA!!!



Waxa ka dhacay gacanteeda koob ay caano ku jireen, dhulka ayuu ku dhacay wuuna kala jabay, caanihiina waa ay daateen, mar alla markii uu arkay in hoyaadii caanihii ka daateen saa'id ayuu ugu qayliyay, dabeedna isagoo cadhaysan ayuu iskaga tegay, waxayse u qortay farriin gaaban, intii aysan farriintii gaadhsiin halkay rabtay ayay gama'day, waxa yimi wiilkii oo warqaddii arkay oo akhriyay, waxaana ku qornaa:- wiilkaygii aan jaclahayow, midkay indhahaygu ku qabowsadaanow, waan ka xumahay, aniga waxa isoo gaadhay gabow, heerka aan maanta joogona waxa gacantayda ka dhaca cunada oo waxay ku daadataa xabadkayga, ma awoodo inaan iska ilaaliyo ama iska dhawro, waana heerka gabowga aan ka joogo, waxaan soo joogay wakhti adigoo yar aanadna aqoon socod iyo sida

loo socdo, waxaan ku baray socod, waxaan ku baray sida cunnada loo cuno iyo xittaa sida dharka loo gashado!!!

Wiilkaygiiyow kuma noqon doono sidaan ahaa xilli hore, balse adigu waxaad noqon doonta sidaan ahay oo kale, wiilkaygiiyow maanta i caawi, mana awoodo inaan tago xittaa meel ii dhow, alla meeqa mar ayaad gacantayda qabsatay adigoo yariis ah, anigoo ku socod-bara oo ku daadihiyay, oo ku baray sida loo socdo, wiilkaygiiyow haku fikirin maanta sidaad tahay bes, ee ka fikir sidaad ahaan jirtay iyo sidaad ahaan doonto, ahow mid i saacida, sababtoo ah waxaan ahay mid adiga kula jooga kuuna baahan, qosolkaaga ayaa farxad ii ahaa markaad yarayd ee wiilkaygiiyow ha iga xaaraantinimayn dhoolla-caddayntaada, waxaan ahay mid kula jooga illaa uu mawdku iiga imanaayo, ee waaxaad ahaataa la-jirkayga illaa inta aan ka dhimanaayo!!!

Bal ka fikir meeqa mar ayaad waalidkaa ku qaylisay, ka carartay, kuna af-celisaa?, meeqa mar ayaad waalidkaa xumaysaa oo af-lagaadaysaa, xanaaqna kagasoo baxdaa?, hooyadaa hadday nooshahay ogow jannadu waxay taallaa lugaheeda hoostooda, hadday dhimatayna duco ayay kaa rabtaa runtii, waxaad shaqaysato ayuunbaadna if iyo aakhiroba natiijadeeda helaysaa!!!

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WEJIGAAGA WAAN DHIBSADAY EE INNA-KEEN!!!



Waxay ahaayeen hooyo waayeel ah iyo wiil ay dhashay oo guri qudha wada deganaa, wuxuu qabay xaas aad u xun oo markastaba ku diri jirtay waalidkiis, maalin maalmaha ka mid ah ayuu wiilkii ka yimid shaqada, wuxuu galay gurigiisa, isagoo cadhaysan ayuu qolkii kasoo baxay, wuxuu hadal ku gubay qalbiga naxariista badan ee hooyadiis, hooyadiis ayuu ku jees-jeesay oo ku yidhi:- wajigaaga waan dhibsaday ee inna-keen waxaan ku gayn doonaa meel aad ka sheekayn doonto'e!!!.

Hooyadu maysan garan wuxuu kala jeedo hadalkan wiilkeedu, wuxuu geeyay buur dheer isagoona go'aansaday inuu cidhifka sare ee buurta ka soo tuuro, wuxuuna ku yidhi:- waad ka leexan wayday xaaskayga ee iska samir maanta ayaa kuugu dambaysa dhib dambe oo aad xaaskayga dhibto'e!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Hooyadii oo ilmaynaysa ayaa iyadoo deggan waxay tidhi:- waxaad doonto samee, laakiin ii ogolow inaan tukado laba rakco oo salaad ah, wuu ka ogolaaday, laakiin markay salaama dhaqsatay ayaa wiilkii qaybtuu taagnaa buurtu la go'day, wuxuuna galay dhulka hoose, isagoo aad u qaylinaaya!, hooyadii ayaa qaylisay, illaa ay maqleen dadkii magaalada joogay, waxay codsatay in wiilkeeda lagasoo saaro buurta, laakin lama awoodin illaa loo tegay wadaadkii deegaanka oo sheegay inaysan jirin cid buurtan kasoo hoos bixin karta, waayo wuxuu mutay abaal marinti caasinta waalidka, wuxuuna shiikhu sii raaciyay hadalkiisa inay iyadu ducadeeda ku badbaadin karto oo keli ah!!!.

Hooyadii waxay sacabaha u hoorsatay Allah swt, kadibna wiilkii ayaa isagoo aanay cidina saacidin kasoo baxay buurtii hoosteeda, halkaasna waxa ku cibra qaatay dadkii goobta joogay iyo intii qisadani ay soo gaadhayba!, wiilkiina wuu noolaaday, laakiin ma awoodin inuu wax ku cabbo ama ku cuno illaa gacanta hooyadiis maahee, haddii uu qof kale ama gacantiisa wax ku cuno ama ku cabbona si kastaba lagama yaabo inuu dhergo!, sidaasna waxa Ilaahay swt ku hanuuniyay wiilkii oo bilaabay inuu hooyadiis u sama-falo!!!.

Fadlan, haddii aad is-leedahay inyar oo caasin waalid ah ayaa kugu jirta qalbiga ufur qisadan oo waalidkaana saacid illeen la'aantood maad jirteene.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IFUR!!!



Marwadiisa ayuu wacay kuna war-geliyay hooyadiis inay usoo socota magaalada ay ku nool-yihiin, ayna joogayso muddo bil ah, dabeedna ay kasii safrayso, sidaa darteed ay usii diyaariso hoy iyo cunno macaan, saa waxay dhahday:- hooyadaa maxay nagasoo doonaysaa maad hoteelada qol uga kiraysid, wiilkii yaab ayay ku noqotay, mana aanu ka filaynin xaaskiisa oo uu jeclaa inay saas ula hadli-doonto, wuxuu yidhi:- udul-qaado waa hooyadaa oo kale'e waxayna inala joogaysaa waa hal bil oo keliyee, way ka diiday, dood dheer kadib ayayna ugu dambayn waxay soo istaagtay laba mid soo gal wax sadaxeeyana may, guriga ama anaa joogi ama hooyadaa, wiilkii su'aashii ayaa beerka kaga dhacday, wuxuu sameeyo ayuu garan waayay, kadib ayuu yidhi:- adiga ayaa joogi, dhib malaha, hooyadayna waxaan dejin hoteel!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Dib ayuu u wacay hooyadii, wuxuuna ku yidhi:- hooyo hoteel ayaan ku dejin, hooyadii ayaana tidhi:- dhib malaha hooyo, kugumaan ogayn caasi inaad tahay ee waan ogahay dhibka meesha kajira, illeen hooyaan ahay waana dareemi karaa arrimaha'e, wuu dejiyay, halkii ayuu ku booqan jiray isaga iyo xaaskiisuba, lacagta hoteelkana isagaa bixiyay, muddadii ayaa dhammaatay, si fiicana waa loo macasalaameeyay, wayna kasii gudubtay!!!.

Sidii maalinba maalin isugu dhiibaysay, isbuucna isbuuc, bilna bil, ayaa maalin maalmaha kamid ah wuxuu arkay xaaskiisa oo guriga hagaajinaysa xilli uusan ku aqoonin hagaajinta guriga, misaa wuxuu waydiiyay:- maxaa maanta jira, waxay ku tidhi:- hooyaday ayaa soo socota markaa guriga ayaan usii hagaajinayaa, wuxuu ku yidhi:- igalama tashanaysid miyaa, iyadoo cadhaysan ayayna tidhi:- ma dejinta hooyaday ayaan kaala tashan, wuxuu ugu jawaabay:- haa, weliba hoteel u kiree ayaan ku dhihi lahaa!!!.

Gabadhii afka uunbay furatay, haa, hooyaday ayaad nacaysaa miyaa, sheekadaasaad keentay miyaa, hadda ifur, warqadayda isii, meeshan nololi iima taal, nin hooyaday nacay muxuu kaloo iisoo wadaa, markay dhammaysatay ayuuna ku yidhi:- war kale makuu hadhay, may ayayna tidhi, waan ku dhagaystay, haddaba anigana idhegayso, mana iga garab hadli kartid, keliyana waxaan kuu ogolahay haa ama maya bes, ayuu ku yidhi!!!.

Wuxuu yidhi:- shalay hooyaday ma timid, haa ayay tidhi, anigoo ah mas'uulka guriga maamula iskana leh, misana awooda in hooyaday aan soo kaxeeyo gurigana aan keeno, kadibna aan qol dejiyo, haddana maan samaynin ee saw adiga

kulama tashan, haa ayay tidhi, saw maad dhihin aniga ama hooyadaa mid ayaa guriga joogaya, haa ayay tidhi, saw adiga dartaa kharash igagama bixin hoteelka aan dejiyay hooyaday, haa ayay tidhi, haddaba ma hooyaday ayaa hooyadaa ka fiican?, may ayay tidhi!!!.

Hagaag, haddaba laba mid soo gal wax saddexeeyaana majiro, guriga ama anaa joogi ama hooyadaa, gabadhii yaab iyo amakaag ayay ku noqotay, waana laga gar leeyahay, xoogaa ayay aamustay kadibna waxay tidhi:- iga raalli noqo, adiga ayaa guriga joogaya, kadib ayay hooyadeed wacday si ay ugu sheegto inaysan guriga iman karin oo ay hoteel qol uga kiraynayso, talefoonkii ayuuna ka dafay, wuxuuna yidhi:- aniga hooyadaa waa hooyaday oo kale, sodohdayna waan jeclahay, kaliyana waxaan rabay inaan ku dareensiiyo dhibka aad shalay imarsiisay, waadna soo dejin kartaa!!!.

Ha yaabin!, waana xaalad kajirta in badan oo qoysaskeena kamid ah, saad jeceshahay in loola dhaqmo reerkiina ula dhaqan reerka kale ee darafka kale, gabadha ama ninka sida dhabta ah kuu jecelina waa ta/ka ka fekeraysa/fekeraaya adduunyadaada iyo aakhiradaadaba, kuuna horseedin inaad caaq ku noqoto hooyo iyo waalidba, si aad uhesho lammaane kaalintaas kuu buuxiyana marka hore kudooro lammaanahaaga iyo shakhsiga aad nolosha lawadaagayso Diin, sida diinteena suubani ina farayso, haddii kale waxa kaagasoo baxa adiga ayaa isaga jawaabi!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

OROD OO AAD GURIGA ILLEEN JANNADAADA AYAA KUGU SUGAYSEE!!!



Wuu soo wacay, maysan ka qaban, wuu ku celiyay, sidoo kale maysan ka qaban, aad ayuu u cadhooday, wuxuu wacay walaalkii una sheegay inay xaaskiisu telka ka qaban wayday, ee bal adiguna wac jawaabna igusoo celi ayuu ku yidhi, wuu wacay walaalkii, wayna ka qabatay, xaaladeeda ayuu waydiiyay, waan fiicanahay ayay ku tidhi, wuu usheegay inay xaaskiisu caafimaad qabto, isagoo yaaban oo dhahaya:- walaalkay telka way ka qabanaysaa, anigoo xaaskeeda ahna igama qabanayso, mar-dambe ayuu wacaa, sidii hore si lamid ahna ma qabanayso, illaa uu safarkii kasoo laabtay isagoo ujeedadii uu usafray aan gaadhin, si deg-deg ah ayuu guriga ku tegay isagoo cadhaysan, waydiiyayna sababta ay uga qaban wayday telka!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Waxay ku tidhi;- hooyadaa gormaa kuugu dambaysay oo aad wacday, wuu yara fikiray, dabeedna wuxuu yidhi:- mar hore, waxay tidhi:- saad iiga wal-walayso si kadaran bay kaaga wal-walaysaa, marar badan ayaan ku dareensiiyay hooyadaa, balse waad fahmi-wayday, markaad safarka gashay ayaana idhi:- xilligan ayaa ugu habboon inaad dareensiiso hooyadiis siday uga wal-walayso ee orodoo aad guriga, illeen jannadaada ayaa kugu sugaysee!!!.

Mala helayaa boqorad noocaas oo kale ah, waxase badan inta laga kari la'yahay sodohdood, ogow ka aad leedahay waan jecelahay iyada ayaa sabab u ah jiritaankiisa dhanba, ee jooji jacaylka beenta iyo khiyaaliga ah, gabadha sida dhabta ah kuu jecelina waa ta inta aad jeceshahayna jecel, dhanka wiilkuna waa lamid, sidaa daraadeed umeel-day naftaada, waalidkaa iyo ubadkaagaba!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HOOYADAY WAA JACAYLKAYGA!!!



Nin qoraa ah ayaa sannadkii 2013 waxa uu qoray buug lamagac baxay ‘my mother, my love’, oo macnaheedu yahay ‘Hooyaday waa Jacaylkayga’, buuggan ayaa ah buug kahadlaayay hooyada, waxaana lawaydiiyay sababta ku kalliftay qoraalka buuggan, waxa uuna ku jawaabay:- maalin maalmaha kamid ah markaan jiray laba iyo toban sanno ayaa habeen waxa xanuunsatay hooyaday, waxa ay lahayd uur toddoba bilood ah, markii ay xanuunka dareentay ayaa waxa iqabatay hurdo, waana seexday!!!.

Xilli ay saacaddu ku beegnayd 8:00 subaxnimo ayaan soo baxay oo waxa iqabatay kaadi, markii aan soo maraayay jikada ayaa waxaan dareemay sanqadh, markii aan soo galay jikada ayaan arkay arrin aan la'ooyay oo ahayd:- hooyaday oo xalay oo dhan xanuunsanayd ayaa hadda waxay dabka saaraysaa shaah, intaan soo

orday ayaan idhi:- hooyo maxaad usamaynaysaa shaaha, waabaad xanuunsantahaye, aniga ayaa kuu jooga oo karin lahaa, waxayna igu tidhi:- hadal aanan weligey illaabi doonin oo ahaa:- hooyo, xanuun walba oo aan dareemo waxa kawayn xanuun walba oo uu dareemayo ilmahaygu markuu gaajoodo!!!.

Hooyo haddii ay kuu nooshahay ka ducayso una ducee oo ha illaawin, **{Ilaahayow hooyo unaxariiso if iyo aakhiroba}.**

MAXAAD MAR-WALBA UGA HADASHAA XAQA HOOYADA!!!



Weriye udhashay waddanka Syria ayaa waxa uu qoray buugaag badan, waxa uu ahaa qof hooyada jecel, waxa uu had iyo jeer khudbadihiisa kusoo qaadan jiray hooyada xaqeeda, maalintii dambe ayaa ay dadkii waydiiyeen maxaad marwalba uga hadashaa xaqa hooyada, waxana uu ku jawaabay:- maalin maalmaha kamida aniga oo kuguda jira shaqadayda, duubayana warar, ayaa waxa ay ishaydu qabatay hooyo afar carruur ah dhashay, waxa ay soo qaadatay xabbad roodhi ah, waxa ay ahayd hooyo bilaa hoy ah, markii ay roodhidii soo qaadatay ayay uqaybisay afar jab, waxay jab walba siisay afartii carruur ahayd ee ay dhashay, halkaas ayay ayaduna ku qaday, waxaana kamuuqday diif, maalintaa wixii kadambeeyayna

waxaan noqday qof kahadla xaqa hooyada, waxaana indhahayga ku joogsata ilmo faro badan markaan ka hadlaayo arrintaas iyada ah!!!.

Naxariista hooyadu waa mid kamid ah naxariisaha ugu caqiibka badan, dareenada ku duuganna aan runtii laga dhammaanayn, lanasoo koobi karayn, waana mid uu Allah swt ku abuuray iyada iyo haween oo dhan, waana ta ay ku xamisho culaysyada iyo dhibaatooyinka kala duduwan, kalana dam-dambeeya ee ay lamarto korinta ubadka, markastana waxa laynooga baahanyahay in aynu dib-u-xasuusanno marxaladihii kala-duduwanaa, kalana dam-dambeeyay ee ay hooyooyinkeen inalasoo mareen markii aynu hanaqaadaynay, si aynu iyagana ugu dhibirsanaano!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ALLAHAYOW CAAFI HOOYADAA XANUUNSAN!!!



Waxa aan ka shaqaynaayay shirkad shidaalka iibisa, waxaanaan la noolaa hooyaday oo qabtay cudurka kansarka, inta badan shaqada waxaan kasoo bixi jiray duhurradii, dabeedna maalin maalmaha kamid ah ayaan go' aansaday inaan dhulka meesha saxaraha ah aado anigoo hore usii qaatay laba weel oo ay ku kala jiraan biyo iyo cunno si aan ugu waraabiyo una quudiyo xayawaanada saxaraha ku nool ee baahan, waxaan go'aansaday in aan maalin walba aado saxaraha waqtiga qorraxdu ay aad u kulushahay, kadibna badhtanka saxaraha ayaan dhigay labadii weel anigoo kayara fogaaday si an dusha sare ugula socdo, inyar kadib Ey cararaaya oo harraadsan ayaa ag-yimid labadii weel isagoo cabay in kufilan oo biyihii ah dabadeedna iskaga tegay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Inyar kadib haddana waxa timid bisad duureed iyadoo abbaartay weelkii hilibku ku jiray kana cuntay in ku filan dabadeedna way ka tagtay, kadib xayawaano fara badan ayaa yimid goobtii xittaa shimbiro harraadsani ay ku jiraan iyagoo cabbay biyihii walibana ku dabbaashay, halka kuwona ay ku ciyaarayaan sida in ay joogaan bad ama webi agtiisa, samaynta ficilkaana waan ku cel-celiyay, subixii shaqadayda ayaan aadi jiray, duhurkana gaadhigayga intaan soo kaxaysto, soona qaato weel biyo ku jiraan iyo mid cunto ku jirto ayaan saxaraha aadi jiray, galabtiina dhakhtarka ayaan hooyaday oo xanuunsan ugu tegi jiray.

Dhakhaatiirtii markay kulmeen waxay ii sheegeen in hooyaday nolosheedu ay gabaabsi tahay, sabatoo ah cudurka kansarka ayaa ku faafay jidhkeeda oo idil, xaaladeeduna waysii xumaanaysaa, aad ayaan u ilmeeyay una murugooday, Ilaahay swt ayaan kabaryay in hooyaday uu caafimaad siiyo, sida caadada ii ahaydna saxaraha aadidiisii ayaan guda-galay, intaanan kasoo tegin saxaraha ayaa waxa iisoo dhacay telefoon, wuxuu ahaa maamulaha dhakhtarka isagoona igu yidhi:- dhakhtarka ku imaw sida ugu dhakhsiyaha badan, gaadhigaygii ayaan soo qaatay anigoo usoo deg-dagay dhanka dhakhtarka aadna u wel-welsan, waxaan soo galay qolka hooyaday ku jirtay, waxa ku jiray dhakhaatiirtii iyo kalkaaliyayaashii uxilsaarnaa xaaladdeeda caafimaad!!!.

Waxaan arkay hooyaday oo qoslaysa, sheekaynaysa, markaasay igu tidhi:- hooyo kaalay, wiilkaygiiyow halkeed jirtay oo aad kusoo daahday?, saakadii hore ayaan boorsadayda xidhay si aynu xaafadda ugu laabanno, waan ku caajisay halkan sidaan kuu sugaayay!, anigoo yaaban ayaan dhakhaatiirtii waydiiyay waxa dhacay iyo waxan socda waan fahmi la'ahaye?!, dhakhtarkii ayaana igu yidhi:- subixii

waxaanu u nimid inaanu hooyadaa baadhno caafimadkeeda, natiijada noosoo baxday ayaana noqotay inaysan cudurka kansarka qabin oo ay caafimaaday, waanuna wada takbiirsanay **(Allaahu Akbar)** dhakhaatiirtii iyo kalkaliyayaashii aanu meesha wada joognay!!!.

Hooyo ayaanu waydiinay arrintani sida ay ku dhacday, waxayna nagu tidhi:- Allaah swt ayaan ku dhaartee wiilashaygiiyow salaadda subax markaan tukaday kadib hurdo yar ayaa i qabatay, waan seexday, riyo ayaana waxaan ku arkay xayn xayawaano ah oo isugu jira Eeyo, Masas, Shimbiro iyo kuwa kale, kuwaas oo gacmaha kor u tagaaya iyagoo leh:- Rabbiyow sharaftaada iyo waynidaada waad awooda wax walba ee Allahayow caafi hooyadaa xanuunsan, wiilashaygiiyow muuqalkaas aad baan ula yaabay, haddana waan caafimaad qabaa boqolkiiba boqol!!!.

Intaas kadib wiilkii wuxuu u sharraxay dhakhaatiirtii, kalkaaliyayaashii iyo intii meesha ku sugnaydba waxa uu samayn jiray ee ahaa in saxaraha uu aadi jiray, xayawaanadana quudin jiray wakhtiga kulaylka aadka u darani uu jiro, dhammaan intii goobta ku sugnayd oo dhami way wada ilmeeyeen oo Eebbe swt ayay ku shukriyeen farxad darteed!!!.

Walaal masaakiinta iyo xayawaanaadka baahanba intaad ka kari-karto quudi, fursadbayna kuu tahay aad maanta oo aad nooshahay haysatid, albaab kaa xidhnaa in uu Eebbe swt kuugu furo ayaa dhici karta, dhib ku haysatay in uu kaaga faydaa laga yaabaa, xanuun hadduu ku hayana inuu Eebbe swt caafimad kugu siiyo ayaa suuragal ah, waxaas oo dhan markaad iskusoo wada xoorisona waa kayd iyo maal-gashi aakhiro kuusii yaalla oo aan marnaba lagu khasaarayn!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SAAXIIBTINIMO!!!



Saaxiibkiis ayuu wacay wuxuuna ku yidhi:- hooyaday waa xanuunsantahay, aniguna mahayo lacagtii daawada, wuxuu ugu jawaabay saaxiibkii:- dhib malaha saaxiib, waxaad isoo wacdaa salaadda casar kadib, ballantii markay gaadhay ayuu wacay, laakiin nasiib darro teleefankiisu waa uu xidhnaa, marar badan ayuu ku cel-celiyay teleefankii, laakiin waa uu dansanaa, haddana aad ayuu uwacay, illaa uu ka quustay!!!.

Wuxuu bilaabay inuu raadiyo qof amaahiya qiimaha daawada hooyadii, laakiin nasiib darro cid amaahisa ma uu helin, wuxuu dareemay in adduunka oo dhami uu ku cidhiidhiyoobay, wuxuuna aad uga murugooday jirrada hooyadiis iyo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

inuusan caawin karin, balse murugadiisa ugu wayni waxay ahayd sida uu saaxiibkii u hoojiyay!!!.

Wuxuu garan-waayay wax uu sameeyo, wuxuu dib ugu noqday gurigii isaga oo aad uniyad-jabsan, wuxuu arkay hooyadii oo huruda oo nasiino wejigeeda ka muuqato, ayna ag-taallo bac ay daawo ku jirto, farxad iyo amakaag ayaa kala jiitay, wuxuu u tegay walaashii, wuxuu waydiiyay qofka daawada keenay, waxay ugu jawaabtay:- saaxiibkaa ayaa yimi, isagaana keenay daawada, wax-yar kahor ayuuna halkan ka tegay!!!.

Farxad ayuu la qoslay, ilmo ayaa indhihiisa kusoo istaagtay, gurigii ayuu kasoo orday isaga oo raadinaaya saaxiibkii, illaa uu ka arkay, wuxuu ku yidhi:- waan kusoo wacayay illaa galabta, telefoonkaaguna waa xidhnaa?, maxaa kugu dhacay?, saaxiibkii ayaana ugu jawaabay:- waan iibiyay teleefankii saaxiib, waxaanaan lacagtiisii kusoo gaday daawada hooyo, Allahu Akbar!!!

Saaxiibtinimadu ma'aha liiska dheer ee dadka kuugu jira taleefankaaga, buuggaaga, ama bartaada bulshada, balse waa dadka kula garab-taagan taageero wakhtiyada aad tamar-darantahay, una baahantahay garab-istaaggooda!!!.

HOOYO LABA SAAC KADIB ITOOSI!!!



Wuxuu ku yidhi:- hooyo laba saac kadib hurdada iga toosi duulimaad ayaan ku qoranahay, waa-yahay ayay ku tidhi, hooyadii iyadoo telefiishanka daawanaysa ayaa waxa soo galay war deg-deg ah oo sheegaaya in shacabka duulimaadyada ku qoran feejignaadaan, sababtoo ah waxa jira cimilo xumo laga yaabo inay diyaaradaha saamayso, kadib hooyadii waxay go'aansatay inaanay toosin wiilkeeda oo duulimaadku uu dhaafo cabsi ay ka qabto in wiilkeedu hawada ku geeriyoodo awgeed, markay is tidhi:- duulimaadkii waa dhaafay ayayna utimid si ay utoosiso, mise waaba mayd, innaalillaahi wa innaa Ilayhi raajicuun!!!.

Waxay is lahayd yuu kaa dhiman ee ha toosin, balse waxay isaga dhex-baxday asaga iyo malakul-mawdka, maamadu way dedaashay, balse umuurta Allena

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

swt meesha kama madhna, haddaba aynu feejignaano wllayaal illeen geeridu meelna inagamajirtee!!!.

Innaa lillaahi wa innaa ilayhi raajicuun.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HOOYO RAALLI AHAADA!!!



Waxay ahayd hooyo dhashay saddex wiil, saddexda wiilba way guursadeen, hooyadu waxa ay ahayd qof ladan oo xoolo leh, laakiin waa ay gabowday ama duqowday, waxayna qaadatay go'aan ah in ay imtixaan ka qaaddo saddexdeeda wiil, si ay xoolaheeda iyo nafteedaba ugu aaminto midkii ku guulaysta imtixaankeeda, waxay ka bilowday midkii ugu waynaa, waxay timid xaafaddiisii, waxay la hoyatay habeenkii, aroortii ayayna xaaskiisii ku tidhi:- hooyo wayso ii keen, markii ay u keentay biyihii ayay ku waysaysatay, intii soo hadhay ayayna ku shubtay furaashkii ay xalay ku jiiftay, waxay u yeedhay gabadhii, waxayna ku tidhi:- hooyo raalli ahaada, gogosha waan ku kaajay, waxaan ahay waayeel, markaa iska dulqaado, gabadhii way canaanatay soddohdeed iyadoo uu maqlayo ninkeedii, aadbayna uga cadhootay ama uga xanaaqday, waxayna ku tidhi:- mar dambe haku kaadinin gogoshayda!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Hooyadii waa ay baxday, waxay aadday gurigii wiilkeeda labaad ee kii hore ku xigay, waxay samaysay intii ay gabadhii hore ku samaysay, waxay tan dambe dheerayd way ceebaysay oo waxay u sheegtay ninkeedii, isaguna kama uusan xanaaqin xaaskiisa oo ma canaanan!, ugu dambayntiina hooyadii waxay tagtay midkii ugu yaraa wiilasheeda gurigiisa, waxay samaysay isla intii ay ku samaysay kuwii hore, markii ay u yeedhay gabadhii oo ay ku tidhi:- hooyo waxaan ahay waayeel oo waxaan xalay ku kaajay gogoshii ee raalli ahaada, ayay gabadhii ku tidhi:- hooyo dhib maleh see kuugu xanaaqnaa, waalidiin ayaad tihiin, immisaad nasoo koriseen, immisaanu dhabtiina ku kaadinay, immisaad noo samirteen, dhib ma leh hooyo, gurigaagii iyo carruurtaadi ayaad la joogtaa!!!.

Intaas kadib hooyadii waxay isugu yeedhay wiilasheedii, waxay u sheegtay in ay imtixaan ka qaadday saddexdooda, ayna heshay gurigii ay nafteeda iyo xoolaheeda ku aamini lahayd, waxayna hantideedii dhammaan ku wareejisay wiilasheeda midkii ugu yaraa, halkaas ayayna ku baraarugeen kuwii kale, uuna mid kastaaba ku yidhi:- waxa ku dhaafay fursaddii ugu waynayd ee raalli ahaanshaha waalidka iyo ducada hooyonimo, iyadoo hantidii hooyadoodna uu la wareegay wiilkii ugu yaraa reerka!!!.

Waalidka mar-kastaba haloo samo-falo, dulqaad haloo muujiyo oo haloo dhimriyo, weliba marka ay waayeel noqdaan oo ay u baahan-yihiin xannaano gaar ah, ragna haweenbaa is-dhaafshay ee dumarkana haloo meel-dayo!!!.

Wixii aad maanta beerato ayaad berri goosanaysaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HOOYADAY MISE CUNUGAYGA!!!



Qisadani waxay ka dhacday waddanka Masar gaar ahaan magaalada Qaahira, guri ay daganaayeen gabadh, carruurteed iyo hooyadeed oo duq ah ayuu dab qabsaday, gabadhii waxay bilawday inay daabusho ciyaalkii oo badbaadiso, igu dambayntii dabkii waa soo dhawaaday waxaana u hadhay hooyadeed iyo cunug yar oo naas-nuug ahaa, waxay samayso ayay garanwayday, ma hooyadey mise cunugayga oo beerkayga ah ayaan badbaadiyaa ayay uurka ka tidhi, waa arrin culus, Ilaahay swt gabadhii wuxuu waafajiyay inay hooyadeed qaaddo oo cunugeeda ka tagto, ugu dambayntii gurigii oo dhami waa uu gubtay, gaas iyo waxbaa is qabsaday, markii dab-damis yimid oo la damiyay goobtii ayaana la raadiyay maydkii cunugii yaraa, shiikhii qisadan sheegay ayaana wuxuu ku dhaartay oo uu yidhi:- wallaahi baan ku dhaartaye cunuggii yaraa waxa loo yimid isagoo aanu saxar gaadhin,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

meeshiisii ooyaaya, sariirtii uu ku jiifayna waa ay gubatay, meelkasta oo kale oo gurigii ahina waa gubatay dambas ayayna noqotay!!!.

Allah swt awooddiisa ayuu cunugii yaraa ku bad-baaday, sababtana waxa lahaa xaqa waalidka ama hooyadaas tabcaansanayd ee qoftaas dumarka ah uu Allah swt waafajiyay muhiimadda ama kala horraynta arrimaha, Allah swt ha inaga dhigo kuwii waalidkood addeeca, baarina u noqda.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

AABAHAA HALKUU KU GEERIYOODAY!!!



Nin ayaa nin kale oo kalluumaysato ah waydiiyay:- Aabahaa halkuu ku geeryooday?, wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi:- badda, haddana wuxuu waydiiyay;- awowgaana, isna uxuu ugu jawaabay:- isna badduu ku dhintay, markaasuu sagoo ku jees-jeesaaya ku yidhi:- markaasaad adiguna weli badda ku jirtaa!!!.

Ninkii kalluumaystaha ahaa ayaa ku yidhi:- adiga Aabaha halkuu ku geeriyooday?, wuxuuna ugu jawaabay:- furaash ayuu ku geeriyooday, misuu haddana waydiiyay?:- awowgaana, markaasu ugu jawaabay isna furaash!, kadib kalluumaystihii intuu isna ku qoslay ayuu ku yidhi:- markaasaad weli furaash ku seexata!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Qaddarka iyo goobta ajashaadu ku qorantahay Allah swt ayuunbaa og, balse adiga taxaddar intii awoodaada ah ayaa kugu waajib ah, sidaa daraadeed kudedaal marwalba intii awooddaada ah in aad naftaada iyo nafaha kaleba badbaadadooda if iyo aakhiroba kafikirto.

Asbaabtu waa waajib.

HAL FICIL AYAA UDHIGMA MALAAYIIN KELMADOOD!!!



Nin oday ah ayaa waxa uu uyeedhay wiil uu dhalay, waxa uuna ku yidhi:- waxa aad soo qaaddaa galaas ama koob, waxa kale oo uu ku yidhi:- waxa aad soo qaaddaa saliid iyo biyo, waxa aadna isku dartaa biyaha iyo saliidda, wiilkii markii uu isku darayna odaygii ayaa ku yidhi:- wiilkaygiiyow, marwalba oo aad isku darto biyo iyo saliid way isdiidayaan oo waa ay kala maaxanayaan, wiilkaygiiyow, ogow adna haddii aad noqon waydo qof wanaagsan dadka oo dhan way kaa cararayaan, wiilkaygiiyow weligaa ha illoobin salaadda, waayo salaaddu waa sida furaha oo kale, haddii aad tukatidna noloshaada oo dhami way hagaagaysaa, wiilkaygiiyow, marwalba waxaad ogaataa in aan dunida lagu waarayn oo qof waliba uu dhimanaayo,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

waana inaad sii diyaarsataa sahay, wiilkaygiiyow, weligaa baarri u-ahaw hooyadaa, waayo hooyadu ma aha mid xuquuqdeeda laga dhammaanaayo!!!.

Hal ficil oo aad arrin ugu hoga-tusaalayso shakhsi aad rabto in aad wax fahamsiiso ayaa udhigma ama kaba qiimo sarreeya malaayiin kelmadood ama weedhood oo laga yaabo in ay wakhti badan kaa qaadan lahaayeen, nidaamka tusaalaynta mas'alooyinkuna waa mid kamid ah qaababka ugu qaalisan ama ugu sarreeya ee basharka aadamuhu ay wax iskula fahmaan, waana qodob muhiim ah in aad markastaba maanka kuhayso oo aad barnaamij cid usoo bandhigayso!!!.

SAAMAYNTA UBADKA EE DEEGAANKA QOYSKA!!!



Nin ayaa soo martiyay reer, wuxuu uyimid haweenay bur-dubanaysa, wuxuu ku yidhi:- waxaan ahay marti, waxayna ku tidhi:- wax dan ah kama lihi martinimadaada, waxay iskasii dubatay burkeedii, markay dhammaysatay qolkeedii ayay iska gashay, intay cuni karto way cuntay, intii kalena way dhigatay, xoogaa kadib waxa yimid ninkeedii oo dhiil caano kuwada, wuxuu lakulmay ninkii martida ahaa, wuxuu kuyidhi:- waar maxaad ahayd, wuxuu ugu jawaabay:- waxaan ahay marti, dhiishii hadhuubkeeda ayuu ugu shubay caano, wuu cabbay oo laacay, haddana wuu ugu shubay, wuu cabbay haddana illaa uu ka dhammeeyay, ninkii wuu yaabay, wuxuu yidhi:- gabadhu wax kuma siinin miyaa, wuxuuna ugu jawaabay:- maya!!!.

Xaaskiisa ayuu ugalay, wuuna canaanatay isagoo ku leh:- saw kuma dhihin martida soo dhawee, waa maxay ninkan gaajada aad ku dishay, qolkii ayuu kasoo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

baxay wuxuuna gawracay ratigii uu watay ninkii martida ahaa, wuu yaabay martidii, wuxuu arkayaa ratigiisii oo la gawracay, ninkii reerku ratigii ayuu qalay, dab wayn ayuu shiday oo waa uu dubay, qayb ayuu soo ag-dhigay ninkii martida ahaa, qaybna xaaskii ayuu ugeeyay, wuu sii dubay illaa uu wada dubay, weelal ayuu ugu guray oo uu siiyay ninkii martida ahaa si uu jidka ugusii maro, kadib ayuu baxay, wuxuuna soo kaxeeyay rati isagu uu lahaa oo aad uqurux-badnaa, wuxuu ku yidhi ninkii martida ahaa:- qabso midkan, waxa aan ka baqay inta aan kayga kumaqanahay in ay gaajo ku qabato, sidaas ayaana kaaga ugawracay ee kaygan qaado oo kaxayso, hilibka aan kuu dubayna ku qaado!!!.

Ninkii intuu farxay ayuu baxay oo tegay, muddo markuu socday ayay ka dhammaadeen wuxuu watay, wuxuu kusoo baxay reer kale oo meel degan, wuxuu ugu yimid haweenay, wuxuu ku yidhi:- waxaan ahay marti, way soo dhowaysay, cunto iyo cabitaan ayay siisay, isagoo dheregsan ayaana waxa u yimi gabadha ninkeedii, wuxuu ku yidhi:- maxaad ahayd, wuxuu ugu jawaabay:- waxaan ahay marti, intuu xanaaqay ayuu ugalay xaaskiisa, wuxuu ku yidhi:- maxay weeye ninkani, saw kuma aanan dhihin guriga marti ha igasoo gelinin, dhirbaaxo ayuubana ku dhuftay haweenaydii, ninkii martida ahaa wuu qoslay, ninkii ayaana uyimid oo waydiiyay wuxuu ku qoslay?!!!.

Wuxuu ugu jawaabay:- waxaan ku qoslay, waxa aan soo arkay iyo waxa hadda aan arkaayo sida ay ukala duwanyihiin, waxaan soo arkay gabadh aan isoo dhowaynin, ninkeedii ayaa yimi, si fiicana iisoo dhoweeyay, wuxuuna ku canaantay maxaad usoo dhowayn-wayday martida, saw kuma dhihin martida soo dhowee, imminkana gabadha ayaa isoo dhowaysay, adiguna waxaad ku canaanatay maxaad

usoo dhowaysay, sida aad ukala duwantihiin ayaana ku qoslay!, ninkii ayaana yidhi:- gabadhii aad soo aragtay aniga ayay ila dhalatay, ninkii aad soo aragtayna xaaskayga ayuu la dhashay!!!.

Maansha Allah, waxa halkan inooga muuqanaaya saamaynta qoyska ee ubadka, waxaadna kadheehan-karaysaa in labada qoys ee ay afarta shakhsi kasoo kala jeedaan yihiin laba qoys oo kala duwan, sikale haddaynu udhigno ay kala yihiin qoys wanaagsan iyo qoys aan wanaagsanayn, qolo kastaana ay wadato dhaqankii qoyskooda, waana wax iska caadiya in ubadka ay saamayn wayn oo togan ama taban kuyeeshaan deegaanada ay kusoo koreen ama kusoo hana-qaadeen oo ay udoor-waynyihiin deegaanka qoysku, taas oo ina tusinaysa in ubadkeenuna ay u'eekaanayaan sida aynu inagu u eegnahay!!!.

Waxa aad tahay tusaalaha ubadkaaga ee wanaaji hab-dhaqankaaga nolosha, si aad usoo saarto ubad hab-dhaqan wanaagsan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ALAAB AYAA KAA DHACDAY!!!



Nin mooto wata ayaa haweenay waayeel ah ku dhuftay mootadiisii, dhulka ayay ku dhacday, dabadeedna ninkii intuu dhoolla-caddeeyay ayuu halkuu ka xumaan lahaa uu iska dhaqaaqay, haweenaydii ayaana kadaba qaylisay, waxayna ku tidhi:- **hooy, hooy,** alaab ayaa kaa dhacday, ninkii waa uu soo noqday oo dhulka eeg-eegay, waxbana wuu ka waayay, haweenaydii ayaana ku tidhi:- raganimadaadii ayaa kaa dhacday oo dibna uma helaysid!!!.

Allahu akbar, raganimadaadii yacni mas'uuliyaddaadii, waa muhiim qof kastaa in uu garto mas'uuliyaddiisa iyo wixii waajibkiisa ah ee saaran oo hadba ku xidhan xaaladda lagu suganyahay, sidoo kalena uu guto, haddii uu gabona runtii waa bar-madaw oo ku taalla, sidaa daraadeed ku dedaal goor-kasta, goob-walba iyo xaaladay ahaatoba in aad garato, gudatona waajibaadkaaga mas'uuliyadeed ee ku

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

saaran intii aad kakari karto, markaas ayaadna noqonaysaa mid xasilan oo dhalleecona kamadhan!!!.

Suubaneheennii Muxammed-na scw waxa lagasoo weriyay xadiis uu macnihiisu noqonaayo:- qof walba waxa raaci looga dhigay ama laraaciyay intii uu arrimaha mas'uul-kayahay.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ALLAHAYOW WAXA UU ITUSAY AWOODDIISA, EE ADNA TUSI AWOODDAADA!!!



Gabadh ayaa waxa ay la socotay ninkeeda, waxa dhinac marayay oday da'ah oo xanuun hayo oo giriiraaya, markii ay soo gaadheen odaygii ayaa gabadhii ku dhacay odaygii, dabadeedna waxa ay ku dhacday meel dhooqo lahayd oo way wasakhawday, way qaylisay oo ninkeedii ayay ku tidhi:- miyaanad arkayn xayawaankani siduu ii galay, ninkii ayaana odaygii gacanta u qaaday oo feedhay, dhulka ayuu ku dhacay, kadib waa uu soo istaagay, waxaanuu arkay ninkani inuu xoog wayn yahay oo aanu iska celin karin, waa uu gunuusay, halkiina kamuu dhaqaaqin illaa ay gabadhii iyo ninkeedii galeen guri u dhawaa meesha, markii uu ninku korayay salaamada guriga oo fooq ahaa ayaana uu kasoo siibtay, madaxa ayuu dhulka ku dhuftay waanuu dhintay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Gabadhii ayaa qaylisay oo tidhi:- odaygaa ayaa dilay ninkaygii, dadkii oo dhan ayaa isugu yimi waxanay isla tageen maxkamadda, waxay gabadhii u sheegtay xaakimkii inuu ninkani hadalo kadaba yidhi aan la fahmayn ninkeeda, kadibna uu u dhintay sababtaa, xaakimkii ayaa waydiiyay odaygii maxaad kadaba tidhi ninka:- odaygii ayaana yidhi:- gabadhan ayaanu isku dhacnay, ninkeeda ayaa markaa gacanta ii qaaday, waxaan is yidhi iska celi, laakiin waxaan arkay inuu iga xoog-waynyahay, anna waxaan idhi:- Allahayow waxa uu i tusay awooddiisa, ee adna tusi awooddaada, kamanay soo wareegin daqiiqado illaa uu kasoo dhacay sallaanka oo uu dhintay!!!.

Walaalkayga muslimka ahow noqo mid ka dambeeya oo ixtiraama dadka kawaawayn, una naxariista kuwa ka yar-yar sida Diinteenna suubban ee Islaamku ina farayso.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXA IGU FILAN KELIYA CHEESE-BURGER!!!



Wiil yar oo kasoo jeeda gobolka Alabama ee dalka Maraykanka da'diisuna tahay 5 jir ayaa ka ilmaysiiyay koox dad ah oo ku cashaynaayay makhaayad la yidhaahdo "Waffle House", kadib markii uu hooyadii ka baryay in ay casho u iibiso nin derbi-jiif ah oo uu ku arkay debedda makhaayadda, isagoo markii cuntada loo iibiyayna miiska la fadhiistay, una duceeyay!!!.

Wiilkan yar oo magaciisu yahay Joseiah Duncan, ayaa hooyadii ka dul ooyay, kana codsaday in ay ninka miskiinka ah ee uu debedda ku arkay, xidhnaana maryo uskag ama wasaq ah ay u iibiso casho, taasina ay keentay in dadkii makhaayadda ku sugnaa oo dhami ay naxariis dareemaan, hooyada wiilkan yar dhashay oo magacadeedu yahay Ava Faulk, ayaa wiilkeeda u sharraxday in ninkani

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

yahay derbi-jiif, isagoo waydiiyay su'aal ahayd:- waa maxay derbi-jiif?, markii uu kawar helay in ninkani aanu cunto haysan oo uu dawarsado ama tuugsado, ayuuna hooyadii ka baryay in ay makhaayadda uga iibiso cunto sida uu baahiyay telefiishanka WSFA-TV!!!.

Hooyada dhashay wiilkan yar way aqbashay codsigii wiilkeeda, wiilka yar ayaana inta uu u tegay waydiiyay ninkii waxa uu doonaayo inuu cuno?, waxaana uu ugu jawaabay:- waxa igu filan oo keliya Cheese-burger!, dad ku dhawaa 11 qof oo ka mid ahaa macaamiisha ka cuntaynaysay makhaayadda ayaana runtii ilmeeyay, markay arkeen sheekada ninka derbi-jiifka ah iyo wiilka yar dhexmartay!, hooyada wiilka dhashay ayaana tidhi:- inaan arko wiilkayga oo falka uu sameeyay taabtay quluubta 11 qof oo makhaayadda Waffle House habeenkaa ku sugnaa ma illaabaayo, waxaanay noqon doonta dhacdo aad iigu mudan oo aan waalid ahaan xasuusan doono noloshayda!!!.

Dareenka aadaminimadu kuma xidhna da' iyo xaalad-toona, balse waa ciddii uu Allah swt dhex-geliyo ee uu ku beero ama ku abuuro, garashaduna waa lamid ee aynu isu naxariisanno, keenna baahan iyo keenna tabaalaysanbana aynu hoos u-eegno, una samafalno intii aynu ka kari-karno.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXA AAN JECLAHAY IN AAN NOQDO SAXAABI!!!



Macallin ayaa ardaydiisa ka dalbaday mid kastaaba inuu qoro wuxuu jeclaan lahaa inuu noqdo mustaqbalka marka uu waynaado, macallinkii wuxuu bilaabay inuu akhriyo wixii ku qornaa warqadihii aydaydu qoreen, si lama filaan ah waxay macallinka ishiisu qabatay, qalbigiisana gil-gilay mid kamid ah warqadihii ardayda, waxaana ku qornaa war culus oo u dhignaa sidan:- "waxa aan jeclahay markaan waynaado inaan noqdo Saxaabi, asxaabta Nebiga scw ka mid ah"!!!.

Macallinkii si deg-deg ah ayuu fadhiga uga kacay isagoo gacanta ku haya warqaddii ka yaabisay, mar kale intuu fiiriyay warqaddii ayuu kor ugu dhawaaqay magacii ardayga warqadda qoray, isla markiiba wiil yar ayaa wuxuu ka joogsaday safafka dambe ee fasalka, wuxuu macallinkii waydiiyay wiilkii yaraa:- maxaad ku

dooratay inaad Saxaabi noqoto, wiilkii yaraana wuxuu ku jawaabay:- hooyaday waxay habeen kasta iiga sheekaysaa hal saxaabi siduu u jeclaa Allah swt, Rasuulkiisa scw iyo Diintiisa, aniguna sidaasaan u jeclahay inaan Saxaabi noqdo!!!.

Maxaa ka wanaagsan hooyo iyo aabbe carruurtooda Diin ku bar-baariya, aynu ku barbaarino ubadka jacaylka Allah swt, Rasuulka scw iyo Diinta, si hadba waafaqsan da'dooda iyo garaadkooda caqliyeed, si aynu usoo saarno ubad ruux ahaan xooggan.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HIMILO FOG YEELO!!!



Waa aabbe af-ganistani ah iyo wiilkiisa, aabuhu waa kabo-tole ku hawlan shaqadiisa iyo korinka ilmihiisa, wiilkuna waa arday ku mashquulsan kobcinta maskaxdiisa iyo dhismaha mustaqbalkiisa!!!.

Dadka qaar iyaga oo hanti haysta ayaanay waalidiintood ku karayn inay wax bartaan oo ay meelahaas daroogada ku cabbaan, dadka qaarna iyaga oo aan haysan hantidii wax lagu baranaayay ayay ku seexanayaan sidii ay wax u baran lahayeen oo ay mustaqbal uu dhisan lahaayeen, marxaladda iyo xaaladda aad ammintaas ku sugantahayna ma go'aamin karto himiladaada iyo hiigsigaaga ee dedaal intii aad kadedaali karto!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MACALLIN WAA AFAR (4)!!!



Waxay tidhi macalimaddii:- haddii aan ku siiyo tufaax iyo tufaax iyo tufaax, immisa tufaax ayaad haysataa?, ardaygii ayaana si kalsooni buuxda leh ugu jawaabay afar (4) tufaax, macalimaddii ayaana tidhi:- mar labaad aan su'aasha kuugu celiyo malaha si fiican iimaad maqline, si fiicanna uga fikir oo ku noqo, wiilkii yaraa intuu farihiisii yar-yaraa tirsaday ayuu waayay jawaab kale, wuxuuna ku celiyay:- macallin waa afar (4)!!!.

Macalimaddii oo wajigeedii niyad jab ka muuqdo ayaa su'aashii bedeshay, waxayna tidhi:- haddaan ku siiyo liin iyo liin iyo liin, immisa liimood ayaad haysataa?, wiilkii ayaana yidhi:- saddex (3) liimood macallin, macalimaddii oo faraxsan ayaana ardaygii haddana waydiisay:- immisa tufaax ayaad iyaga haysataa?,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ardaygii ayaana markale yidhi:- macallin afar (4), iyada oo cadhaysan ayayna ku tidhi:- oo maxay ku kala duwan yihiin liinta iyo tufaaxu?, wiilkii oo cabsanaaya ayaana yidhi:- macallin hal tufaax ayaa boorsada iigu jira!!!.

Markuu qof kusiiyo jawaab ka duwan taad ka filanaysay halasoo boodin jawaabtu waa qalad, ee waxa laga yaabaa inaanad arkayn waxa uu arkaayo ee dhegayso si aad u fahamtid, hana u dhegaysan iyadoo jawaab gaar ahi meel kuu taallo!!!.

IRRIDAHA GUUSHA (4)

AQOONI WAA DIIN!!!



Gabadhan yar ee aad aragtaan waxa lagu magacaabaa Jiini Hibbatu-Raxmaan, waxay u dhalatay waddanka Al-jeeriya, ayadoo 10 jir ah ayay Qur'aanka kariimka ah xifdiday, hadal ay tidhi munaasabadda xafladda kadib ayaana siwayn baraha bulshada ee bulsho-waynta caalamka u qabsaday, Jiini oo aan weligeed arkin aabaheed, isla markaana agoon ahayd, aabaheedna uu geeriyooday iyada oo caloosha hooyadeed kujirta, ayaa mar aabaheed wax laga waydiiyay waxay tidhi:- aabahay weligiis ima uusan arkin, imana yaqaano, anna ma aanan arkin oo anoo aan dhalan ayuu geeriyooday, balse cilmiga iyo Qur'aanka aan bartay ayuu maalinta qiyaame igu aqoonsan doonaa oo basharka oo dhan iigasoo dhex saari doonaa, waxaana aan jeclaa markaan Qur'aanka khatimay inuu ila joogo oo garabkayga ahaado, farxadana ila qaybsado!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Aqooni waa barashada kalaamka Alle swt iyo rasuulkiisa, shakhsigu hadduu qodobadaas ka dhisanyahayna wixii usoo raacaa waa iska faakihaysi'uun, ee aynu ubadkeena yar-yar kula dedaalno, inana ku dedaalno barashada iyo kucamal-falka kalaamka Eebbe swt ee kariimka ah iyo kalaamka Suubaneheenii Muxammed scw.

Aqooni waa diin!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MID DOORO!!!



Nin lacag leh oo aan wax carruur ah Ilaahay swt siin ayaa wuxuu marti-qaaday casho ahaan dadkii ushaqaynaayay oo dhan, markii ay cuntadii dhammaysteen ayuu wuxuu miiska usoo saaray kitaab Qur'aan ah iyo lacag, mid-walba uu dooransiiyay midkuu dooran lahaa, isaga oo ku leh:- mid dooro, wuxuu ka bilaabay ninkii guriga ilaalinayay, isagoo aan wax xishood ah muujin ayuuna yidhi:- waxaan rajayn lahaa inaan kitaabka Qur'aanka ah qaato balse ma aqaani sida loo akhriyo, markaa lacagta ayaa i anfacaysa, sidaas ayuuna ku qaatay lacagtii!!!.

Waxa ku xigay ninkii beerta ka shaqaynaayay, wuxuuna ku jawaabay:- waxa xanuunsan xaaskayga markaa lacagta ayaan ku daawaysanayaa, middaas ayaana igu kalliftay inaan qaato lacagta, sidaas ayuu isna ku qaatay lacagtii, su'aashii ayaa waxa ay ugudubtay gabadhii cuntada karinaysay, iyana waxay tidhi:- waan

jeclahay akhriska Qu’raanka, balse waqti igu filan mahayo oo aan ku akhriyo aayadna, sidaas ayay iyana ku qaadatay lacagtii!!!.

Waxa soo hadhay wiil yar oo adhiga iyo digaagadaha xanaanaynaayay, markuu ninkii lacaglayda ahaa arkay wiilka yar ayaa wuxuu yidhi:- waa hubaal oo wiil yar oo duruufi kamuuqato ayaad tahay, waana hubaal oo lacagta waad ubaahantahay ee iska qaado, si dhar iyo kabo aad ugu gadatid, wiilkii yaraa ayaana kujawaabay:- haa, waa runtaa oo dhar iyo kaboba waan u baahanahay, wayna adag tahay inaan diido lacagta oo xattaa hooyaday aan ugu iibin lahaa dhar iyo cunto ay cunto, laakiin hooyday ayaa markasta igu tidhaahda:- kelmad qur’aanka kamid ah ayaa ka faa’iido badan waxa dahab adduunka yaalla oo dhan, kana miisaan wayn maalinta qiyaame, sababtaas ayaanana lacagta u qaadanaynin, waxaana qaadanayaa kitaabka Qu’raanka, mar alla markii uu furay kitaabkiina wuxuuba kadhex helay warqad jeeg ah oo ay ku saxiixantahay 10 laab kabadan lacagtii kuwa kale ay qaateen iyo warqad ah in uu wiilka yari dhaxalka ninkaas lacaglayda ah qaadan doono!!!.

Ninkii lacaglayda ahaa ayaana la yaabay wiilka yar, wuxuuna yidhi:- qofkii si qalbiya Rabbi swt ugu xidhan, kana malaysta wax wanaagsan, Rabbi swt wuu lajirayaa markasta, wax la’aana manoqonaayo, runtiina waa arrin kudayasho mudan wiilkaas yari arrinka uu sameeyay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HOOYADAY AWOODDEEDU WAY DICIIFTAY!!!



Waxay ahayd hooyo mar walba dili jirtay wiilkeeda, wiilkuna ma uusan ooyi jirin, mana ka caban jirin, mana uusan ka carari jirin, waxa kasoo wareegtay muddo badan oo sannado ah, hooyadiina sidii ayay ugaraaci jirtay wiilkeeda, weliba si awoodi ku dheehan tahay, maalin maalmaha kamid ah hooyadii waxay wiilkeeda ku garaacday dadka hortooda, wiilkii ayaana oohin ka bixi waayay maalintaas oo idil, illaa illintu ay dharkiisa ku qubatay, kolkii ay hoyadii guriga gashay, dadkii meesha joogay ayaa kusoo orday wiilkii, waxa ayna ku yidhaahdeen:- maanta maxaa kaa oohisiiyay maadan ooyi jirine?!, wiilkii oo oynaaya ayaana ku jawaabay:- waxaan u ooyayaa maanta waxaan dareemay in hooyaday awooddeedu ay diciiftay, sababtoo ah waxay iitumi jiray si awood leh, laakiin maanta way itaal yaraysay, waxaana

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

kabaqayaa in uu soo dhawaaday albaabadii jannada mid kamid ahi in uu iga xidhmo!!!.

Waa wiil yar shakhsiga caynkaas ufekerayaa, maxaadse maanta umalaynaysaa kuweena waawayn, innaga, dhallin-yarteena maanta iyo dhammaanteenba waxa laynaga doonayaa in aynu sidaas oo kale iyo si kasii-xeel-dheerba ufekerno.

IRRIDAHA GUUSHA (4)

GABADHAADA IIGUURI!!!



Tuulo waddanka Hindiya ku taalla ayaa waxa deganaa nin beeralay ah, ninkaasi wuxuu daynsaday lacag fara badan, ninkuu ka daynsaday wuxuu ahaa nin aad u xun, maalintii dambe ayuu qabsaday oo ku yidhi:- isii lacagtaydii, markuu ka waayay ayuuna ku yidhi:- gabadha aad dhashay haddaba ii guuri dayn-tana waan kaa cafin!, ninkii ayaa argagaxay, illeen ninku waa nin dhaqan xune, markuu arkay ninkii daynta lahaa argagaxiisa ayuu ku yidhi:- haddaba qorshe kale ayaan kuu hayaa oo ah gabadhaada nasiib ayaan u qabanayaa, laba dhagax oo yar-yar oo midna caddaan yahay midna madaw yahay ayaan bac ku dhex ridayaa, waa inay qaadataa labada mid uun:-

1) Haddii ay ka madaw qaadato waan guursan, dayn-tana waan kaa cafiyayaa!!!.
2) Haddii ay ka cad qaadato mana guursanayo, dayn-tana waan kaa cafiyayaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

3) Haddii ay diido inay labadaba mid qaadatona waan ku xidhanayaa, oo xabsigaan ku dhigayaa!!!.

Markii la isu yimid, ayaa ninkii daynta lahaa intuu foorarsaday laba dhagax oo mad-madaw kasoo qaatay meel dhagxaan fara badani taallo, gabadhu waxay ahayd mid feejigan oo indha-dheer, waxay aragtay wixii uu sameeyay ninkii, markuu soo qaaday ayuu ku riday labadii dhagax bacdii gudeheeda, kadibna wuxuu yidhi labada mid qaado:- way aragtaa khiyaamada socota oo hadday mid doorato labadooduba waa madow, hadday diidona aabaheed xabsi ayuu gelayaa!!!.

Xeeelad ayay isticmaashay gabadhii yarayd oo inta ay gacanta gelisay bacdii ayay mid lasoo baxday, iyada oo aan gacanta kala furin ayayna intay la istaagtay oo yara dhaqaaqday sidii wax kufay iska dhigtay, markaasay dhagixii ku dhex tuurtay meeshii dhagxaanta badnayd, markaas lama garan karo nooca uu ahaa dhagaxa ay qaadatay, waxayna tidhi:- alla doqon-saniyaa!, laakiin waa caadi, waxaynu eegaynaa dhagaxa ku hadhay bacda, oo haddii uu noqdo caddaan kii madoobaa anaa qaatay, hadii uu ku hadho madawna kii caddaa anaa qaatay, haddaba maadaama oo uusan ninkii is fashili karin waxay noqotay in bacdii la eego oo laga helo dhagax madaw, sidaana ay gabdhii guurka ninkaa kaga badbaaday abaheedna dayntii kaga badbaadisay, ninkii xumaana talaa ku caddaatay!!!.

Mushkilad waliba xal ayay leedahay, balse innaga ayaan u fekerin sidii uu xalku ku iman lahaa, ee si maskax leh, indheer-garadna ah ufeker oo xal uraadi!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

OROD OO SEEXO!!!



Maalintii uu dhashay ayay dhimatay hooyadii, keligiina way ka tagtay, aabihii oo iska shaqo badnaa ayaa geeyay guriga dumaashidii si uu ula joogo, toddoba bilood ka bacdi ayuu aabihii gabadh kale soo guursaday, inankii yaraana gurigiisa ayuu keenay, gabadha odaygu qabo may ahayn mid daryeesha inanka yar, waxayna u samaysay shaqaale ilaaliya, waxay u dhashay odaygii laba carruur ah, gabadh iyo wiil, afar sano kadib guurkoodii ayay jeclaysatay inay maalin casuunto xafadoodii, aabaheed iyo hooyadeed, waxa bilaabmatay diyarintii xafladda, inankii yaraa aad ayuu u gaajooday waxaana uu doonay inuu cashada la kariyay wax ka cuna, laakiin gabadhii ayaa inta ay dishay ku tidhi:- bariiska halkaas ku daboolan cun oo orod oo seexo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Inankii yaraa isaga oo ooyaaya ayuu ubaxay debedda bariiskiina uu qaatay, xafladdii ayaa lagu dheeraaday, ninkii shaqaalaha ahaa ee inanka yar qaabilsanaana waxa uu ku mashquulay xafladda, inankii yaraa meel sibidh ah ayuu seexday oo qabow, odaygii reerka ayaa xaafaddii yimi, xafladdii way dhammaatay, waxa uu waydiiyay gabadhii:- mee inankii, waxay ugu jawaabtay:- shaqaalaha ayaa seexiyay iyada oo aan hubin, odaygii waa uu iska seexday, cabbaar kadib waxa uu ku riyooday gabadhiisii hore oo ku leh:- inankii yaraa miyaad ka warhaysaa, naxdintii ayuu soo booday, waxaanuu waydiiyay islaantiisii:- inankii yara mee?, waxayna ugu jawaabtay mar labaad:- shaqaalaha ayuu la hurdaa!!!.

Hurdadii ayuu ku noqday, waxa mar labaad haddana u timid islaantiisii hore, sidii hore oo kalena waxay waydiisay wiilkoodii, isaga oo naxsan ayuu soo booday, wiilkiina waa uu day-dayay, laakiin nasiib darro waxa uu helay wiilkiisii oo geeriyooday dhaxan iyo gaajo daraadeed!!!.

Allahu akbar, aynu mas'uuliyadeena dhan-walba oo ay noqoto kasoo baxno intii awoodeena ah, cidna yaynaan ku hallaynin, kuwa safarka aakhiro inooga horreeyayna aynu u ixtiraamno, usamayno, una qadarinno sidii aynu usamayn-jirnay markii ay noolaayeen, waayo Rasuulkeennii suubanaa ee Muxammed-na scw waxa uu inoo sheegay in mu'miniintu aanay dhiman balse ay hoygan ifka kabedeshaan, una bedeshaan hoyga rasmiga ah ee aakhiro!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

HOOYO IIKAALAY!!!



Canug yar oo heerka garaadkiisu hooseeyo ayaa iskuulka iskaga tegay, wuxuu ag-fadhiistay qabriga hooyadii oo geeriyootay, isagoo cabanaaya ayuuna yidhi:- hooyo ii kaalay, macallinku wuxuu igu hor garaacaa carruurta asaga oo dhaha;- 'Hooyadaa way wahsi badan tahay, kumana daryeesho'!!!.

Ha xukminin illaa aad jaanis siiso uu ku sharxi karo naftiisa, sidoo kalena ha xukminin illaa aad sifiican uga bogato deegaanka ku hareeraysan ama ku xeeran, immisa ayaynu qalbiyo kudhaawacnay, kuna waxyeelaynay xukunno mala'awaal ama aan xaqiiqda ku salaysnayn, immisa ayaynuse bani-aadam riyooyin fiican lahaa una halgamaayay ku curyaaminay hadallo iyo ereyo innaga inala fududaa markay inagasoo baxayeen, balse iyaga qudh-gooyo ku ahaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Umeelday hadalladaada iyo ficilladaadaba inta ay laabtaada ku jiraan ee aanay kusoo dhaafin, si aad uga nabad-gasho waxyeelaynta daahsoon ee makhluuqa!!!.

Hadalkaaga iyo ficilkaaguba waxa ay amaanadaa yihiin inta aanad ku dhawaaqin ama aanad samayn!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAA GOOBO LAGALA-SOCDO DAREENKA BULSHADA!!!



Nin macallin ka ahaa iskuul ama dugsi ay wax ku bartaan carruur yar-yari ayaa isaga oo fasal ama galaas uu wax ka dhigayay ku sugan waxa uu canaan iyo af-lagaaddo isugu daray wiil yar oo fasalka ku jiray, dabadeedna wuxuu u geeyay maamulaha dugsiga isaga oo ku yidhi:- maamule bal wiilkan yar dharka uskaga ama wasakhda ah ee uu xidhan-yahay eeg ama fiiri, iyadoo layliskii ama casharkii aan u dirayna aanu kasoo shaqayn, waa arday xun oo waxbarasho aan diyaar u ahayn, kadibna macallinkii wuxuu ku noqday fasalkii ama galaaskii uu xiisadda kaga jiray!!!.

Maamulihii ayaa waydiiyay ardaygii yaraa sababta uu uga soo shaqayn waayay layliskii ama casharkii, waxaana uu ku jawaabay:- maamule kamaan soo shaqayn waayin ee waxaan uga imi buuggii walaalkay oo gelinka dambe dhigta

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dugsiga, buuggaasi oo keliya ayaanuna wada leenahay oo layliska aanu u isticmaalnaa!!!.

Ninkii Maamulaha ahaa si naxariis leh oo aabonimo ah uyuu u eegay wiilkii, waxaana uu ku yidhi:- wiilkaygiiyow, maxaad usoo xidhatay dharkan wasakhda ah ee kaa waawayn?, waxaana uu ugu jawaabay:- anigu ma lihi dharkan, walaalkayga iga wayn ayaa leh, isaga ayaana galabtii ku taga iskuulka ama dugsiga!!!.

Sida ardaygaas yar oo kale waxa jira kuwo badan oo lamid ah oo xaaladdaas oo kale ama kaxun ku dhiganaaya dugsiyada ama iskuulada, goobaha waxbarashaduna ma'aha keliya xarumo wax lagu barto ama loosoo shaqo tago ee waa goobo lagala socdo dareenka bulshada, markaa maamulayaasha iyo macalimiintuba waa inay dhinaca iinsaaniyaddana ama bani-aadamtinimadana aad ula socdaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

MAANTA WAA MAALINTAADA!!!



Wuxa uu kamid ahaa qaxoonti la dejiyay xeebta, wuxuu ahaa caseeye, wuxuu ka helona wuxuu ku maarayn jiray noloshiisa, wax waalid ah uma noolayn, habeen ayaa isaga oo socda waxa uu si kedis ah ku arkay Ey ay ku dhegtay koronto xoog leh, taas oo kelliftay inuu naf-boxo, wuxuu si deg-deg ah uraadiyay korontada ku dhegtay Eyga, mise waaba fiilo soo go'day kuna dhacday biyo meel fadhiya, wuu ka saaray asagoo meel gees ah dhigay!!!.

Waxa daba socday maamule iskuul, lana socday wuxuu wiilka yari samaynaayo, wuu lahadlay kuna yidhi:- maxaad qabataa, wuxuu usheegay inuu qaxoonti ku yahay xeebta, sidoo kalena noloshiisa ku maareeyo kabaha oo la caseeyo, wuxuu uraaciyay in wax waalid ahi aysan u noolayn, maamulihii ayaa illini kusoo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

joogsatay, kuna yidhi:- maxaad kaleedahay waxbarasho, wuxuu ugu jawaabay:- aad ayaan u jeclahay, balse maba awoodo duruufaha ihaysta dartood, maamulihii ayaana ugu jawaabay:- haddaba waxa jira iskuul aan maamule ka ahay, waanaan kugusoo dhowaynayaa haddaad wax barasho diyaar u tahay!!!.

Wiilkii aad ayuu ugu farxay arrintii, wuxuuna ka bilaabay fasalka koowaad, wuxuu noqday arday ku fiican xaga waxbarashada, markuu usoo gudbay dugsi sare ayuu wadi-waayay waxbarashadii cadaadis kaga yimid dhanka maamulaha cusub oo yidhi:- arday aan wax lacag ah bixinayni ma dhiganaayo iskuulka, sidoo kale wuxuu jeclaaday gabadh ay isla dhigtaan iskuulka una sheegtay dareenkiisa, balse way ku jees-jeestay oo tidhi:- waan ka xumahay, caseeye isku heer manihin, riyada aad ku jirto ka bax, orodna oo cidda aad isku heer-tihiin raadso, dhabtii aad ayuu uga calool-xumaaday ereyadaa dhegihiisa kusoo dhacay, sidoo kalena wuxuu jeclaa inuu noqdo ganacsade markuu dhammeeyo iskuulka, balse maysan usuurtagelin, keliyana riyo ayay ku eekaadeen, ugu dambayna wuu ka baxay iskuulkii!!!.

Wuxuu iska joogay buulashii uu u hoyan jiray ee qaxoontiga, isagoo neecawdii yarayd ee macaanayd ee soo martay ku cel-ceshanaaya, mararka qaarna ilmaynaaya, maadaama oo wax-yaabahii uu ku riyoonaayay aysan usuurta-gelin, wuxuu noqday mid had iyo jeer fikira, murugooda, isla sheekaysta, xittaa wuxuu jeclaytay inuu isdilo, maalmo siduu umurugaysnaa ayuu maalin go'aansaday inuu noloshiisa wax kabeddelo, kana baxo ciirsigan uu maalin kasta ku jiro, isaga oo adeegsanaaya hadalo dhiiri-gelin ah ayuuna yidhi:- shalay haddaysan ahayn maalintaada, maanta waa maalintaada ee kabax khiyaaliga aad ku jirto, hormarinta

naftaaduna waa hawl adiga kuu taalla, hana ka sugin in qof kuu qabto hawshaas, wuxuuna bilaabay inuu barto habka loo dabbaasho!!!.

Wakhtigiisa inta badan wuxuu ku bixiyay dabbaasha, maadaama uu xeebta dhinaceeda qaxoonti ku yahay, markuu aad u bartay dabbaashii ayuu haddana bilaabay habka loo baro dadka dabbaasha iyo habka loosoo badbaadiyo, asagoona baraya ilmaha ay isku ayniga yihiin ee la qaxoontiga ah!!!.

Muddo kadib ayuu bilaabay inuu baro dabbaasha dadka imanaaya baddda ilmahooda, ilmo badan ayuu baray, sidoo kale wuxuu samaystay koox asagu uu madax u yahay, kooxdaas oo heegan u ah ciddii rabta wakhti yar gudaheed in lagu baro dabbaasha, waxay badbaadiyeen dad badan oo ku haftay badda, taas oo ay abaal-marino kala geddisan ku helaan, soona jiiteen indhaha dadwaynaha, muddo yar gudaheed ayayna caan ku noqdeen, waxa ay bilaabeen kaganacsiga barista dabbaasha, waxa magaalada laga qabtay tartan dabbaasha ah, waxaana ku guulaystay wiilkii madaxda u ahaa kooxda barista dabbaasha, kaalmaha ku xigana waxa qabsaday kooxdiisii, waxa lasiiyay abaal-marino, waxayna furteen xafiisyo laga diiwaan-gelinaayo cidda rabta iyo inta maalin ee ay ubaahantahay in lagu baro dabbaasha!!!.

Qisadiisii waxay ku baahday magaalada, waxa jeclaystay duqa magaalada inuu la kulmo kooxdaas, wuxuu u ballan-qaaday inuu horumarindoono ganacsigooda kuna bixin doono lacag badan, wuu kaga dhabeeyay, kana run-sheegay ballan-qaadkaas, waxay isu bedeshay kooxdii inay laamo ku kala yeeshaan waddanka, heer uu gaadhay wiilkii caseeyaha ahaa lakulankiisu inay qaadato maalmo ama usbuucyo, waxay noqotay arrin ka yaabisay ganacsatada waddanka, waxa laga qoray buugaag

badan, wuxuuna kusoo kordhiyay ganacsigiisii tababarro lagu baraayo dadka hadday kulasoo gudboonaato khatar sidii iyo qaabkii aad isu badbaadin lahayd inta karaankaaga ah, waxaase layaab ku noqotay dadwaynihii mar uu jeclaystay madaxwaynaha dalku inuu la kulmo wiilkaas, balse ay noqotay inuu yidhaahdo wiilkii:- waxa aan ku jiraa safar kormeer iyo indha-indhayn ah laamaha aan ku kala leeyahay waddanka iyo hawshoodu siday usocoto ee markaan soo gaadho caasimadda aad joogto ayaan kula kulmayaa, balse inta ka horraysa wakhti mahayo!!!.

Dedaal intii awooddaada ah, Allahna swt talo saaro, intaas kadibna waad gaadhi himilo kasta oo aad leedahay oo kuu wanaagsan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

AABBE SOO CELI WALAALKAY!!!



Saddex sano ayaa kasoo wareegtay markii uu guursaday xaaskiisa welina uusan noqon aabbe, wuxuu ahaa nin mu'min ah aaminsanna qadarta Eebe swt, asaga iyo xaaskiisu waxa ay raaadsadeen cunug ay wiil ka dhigtaan (carabtu dhaqan ay lahaan jireen weeye), wiilkii ayay korsadeen, muddo kadib Allah swt ayaa siiyay wiil, waxa ay ka tashadeen arrinta wiilkan kale maadaama oo ay heleen wiil ay iyagu dhaleen, waxay isku raaceen inay korsadaan oo uu sidii hore ula joogo!!!.

Labadii wiil waa ay wada bar-baareen, saaxiibo isjecelna waa ay noqdeen, maalin maalmaha kamid ah ayay wax walba isbeddeleen oo arrintu xumaatay, aabihii iyo hooyadii ay xanaaqeen, wiilkiina ay ceydhiyeen, kadib markii ay kaga tageen guriga labadii wiil ayna kusoo laabteen wiilkii ayagu ay dhaleen oo daanku dhiigaayo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Wiilkii la eryay waxa ubilaabantay nolol weji kale leh, wuxuu bilaabay inuu cunto ka dhigto waxyaabaha ay dadku kusoo tuuraan jidadka, habeenkiina wuxuu kusoo laaban jiray beerta reerkii eryay oo uu seexan jiray, wakhti kadib wuxuu codsi udirsaday waalidkiisii soo korsaday, laakiin way kadiideen oo waxay ku adkaysteen go'aankoodii hore, sidii ayuuna ugu jiray noloshaas adag!!!.

Wiilkii ay dhaleen ayaa aabiihii ku yidhi:- aabbe soo celi walaalkay?!, aabihiina wuxuu ugu jawaabay:- walaalkaa ma aha aniguna ma-dhalin!, wiilkii ayaana aabihii ku yidhi:- aabbe ma ogtahay sababta aan kuu leeyahay soo celi?, aabihii ayaa yidhi:- maya ee aabbo iisheeg?, wiilkii wuxuu yidhi:- aabbo aniga iyo isaga oo isla joogna ayaan idhi:- aabahay muu dhinto ama ay belaayo ku dhacdo si aan dhaxalkiisa u qaato, intaas markaan idhi ayuuna si naxariis darro ah iidilay, iguna yidhi:- aabahay waan jeclahay, waa uu isoo bar-baariyay, hadduu dhintona aniguna waan dhimanayaa, la'aantiisna nolol marabo, waana uu iga aamusay!, markii aad soo gasheena xaalku sidaas ayuu ahaa, laakiin si kale ayaad wax ufahamteen, waadna eriday!!!.

Odaygii wuu qoomameeyay go’aankiisii, wuuna raadiyay wiilkii, laakiin wuxuu utegay wiilkii oo naftu ka dhacday gaajo iyo oon awgood!!!.

Inta aanad falin kafiirso ayaa hore loo yidhi, bal fiiri hadalka wiilku uu aabihii ku yidhi, arrin walba xilli iyo wakhti ayaa ku habboon hubsashadiisa, ee ku dedaal in aad aqoonsato ammintaas, halkii aad berri qoomamo iyo calaacal aan waxba soocelinayn ku dambayn lahayd!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

NIMCADA IYO NAXARIISTA ALLE SWT ISIIYAY AYAAN LA OOYAY!!!



Wiil dhallin- yaro ah ayaa xanuunsaday, waxa loo qaaday dhakhtarka, dhakhtarkii markii uu baadhay wiilkii ayuu ku yidhi:- xanuun xun ma lihid, keliyana daawo ayaa lagu siinayaa, dawadaana toddoba (7) daqiiqo oo keliya ayaad ku jiifaysaa adiga oo aan wax dhaqaaq ah samaynaynin!!!.

Wiilkii dawadii ayaa lagu muday, muddo afar (4) daqiiqo ah markii uu jiifay ayuuna u adkaysan waayay inuu bilaa dhaq-dhaqaaq ku jiifo, dhakhtarkii ayaa ku yidhi:- inyar ayaa kuu hadhay ee ha is dhaqaajinin, markii toddobadii (7) daqiiqo dhammaadeen ayuu wiilkii ooyay, dhakhtarkii ayaana ku yidhi:- ma xanuun ayaa jira maxaad la ooyaysaa, wiilkii ayaana ugu jawaabay:- maya, xanuun lama oynaayo,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

balse waxa aan xasuustay dadka faaligu ku dhacay ee aan dhawr sano dhaqaaqin, nimcada iyo naxariista Alle swt isiiyay ayaana la ooyay!!!.

Allah swt waxa uu kalaamkiisa kariimka ah inoogu sheegay in nimcooyinka uu inagu deeqay ama inagu mannaystay haddii aynu isnidhaahno tiriya aynaan tirin karayn, ee marwalba aynu uun ahaano kuwo kumashquulsan shukriga iyo mahad-naqa Eebbe swt.

MID QAADO!!!



Nin tima-jare ah ayaa isagoo qof macaamiishiisa kamida u adeegaaya waxa usoo galay wiil aad u da' yar, wuxuuna tima-jarihii ku yidhi ninkuu tinta u jaraayay:- maku tusaa adduunyada dadka ku nool qofka ugu doqonsan ee aan abidkay arkay?, ninkii ayaa ugu jawaabay haa, markaasuu farta ku taagay isagoo tilmaamaaya wiilkii yaraa ee usoo galay!!!.

Waxa lays-waydiiyay sababta uu wiilkan yari doqon ku noqday, tima-jarihii oo arrintaas sii caddaynaaya ayaana wuxuu u yeedhay wiilkii, markuu uyimid ayuu soo bixiyay laba warqadood oo lacag ah (tusaale:- mid waa kun shilin, midna waa shan boqol), waxa wiilkii lagu yidhi:- mid qaado, wuxuuna durbadiiba la kacay shantii boqol, tima-jarihii oo ninkii macaamiishiisa ahaa la hadlaaya isla markaana

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

qoslaaya ayaana yidhi:- sow kuuma sheegin inuu doqon yahay wiilkani, bal arag oo kunka ma qaadanaayo, shanta boqol ayuu wax fiican moodayaa!!!.

Ninkii timaha loo jarayay oo arrintan ka yaabay ayaa markii hawshii loo dhammeeyay soo baxay, wuxuu bannaanka ku arkay wiilkii yaraa, markaas ayuu go'aansaday inuu bal ogaado sababta wiilku shanta boqol udoortay ee uu kunka uga tegay, wiilkii oo su'aashaas ka jawaabaaya ayaana wuxuu yidhi:- tima-jarahani maalin kasta qofka uu tinta ujaraayo ayuu tusaale iigaga dhigtaa isagoo doqon igu sheegaaya, aniguna shantaas boqol uunbaan iska qaataa, maalin kasta oo aan shan boqol helo ayaana iiga fiican inaan maalin qudha caqligayga bannaanka usoo saaro oo kunka shilin qaato, illeen markaas ciyaartani waysoo dhammaanaysaaye, shan boqol oo dambena ma heli doonee, kunna warkiisaba daa!!!.

Qofku waxa uu samaynaayo laguma salayn karo caqligiisa, dhaqankiisa iyo shaqsiyaddiisaba, waxaana lagayaabaa in falkaas uu ku kacaayo ay sababo kale oo ku riixaaya ama arrimo uqarsooni jiraan, markaas hubi wax kasta kahor inta aanad go'aan kaqaadan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAA MAXAY QIIMAHA NOLOSHU!!!



Maalin ayaa wiil yari ku yidhi aabihii:- aabbo, waa maxay qiimaha noloshu?, intii aanu uga jawaabin ayaa waxa uu u dhiibay dhagax, una sheegay inuu u iib geeyo suuqa, haddii qof weydiiyo qiimihiisana aanu kelmad odhan ee laba farood kor u taago, wiilkii waxa uu tegay suuqa isaga oo wada dhagixii, gabadh ayaa waydiisay:- immisaad siinaysaa dhagaxan?, waxaan doonayaa inaan beertayda dhigto'e, wiilkiina kelmad ma odhan ee laba farood ayuu kor u taagay, gabadhii ayaana tidhi:- laba doolar miyaa?, waan qaadanayaa haddaa!!!.

Wiilkii gurigii ayuu ku noqday, aabihiina wuxuu u sheegay inay gabadhi doonayso inay laba doolar ku iibsato dhagaxa, aabihii wuxuu ku yidhi:- wiilkaygiiyow, waxaan doonayaa inaad matxafka gayso, haddii qof ku waydiiyana

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

kelmad ha odhan ee laba farood kor u taag, wiilkii yaraa wuxuu tegay matxafkii ninbaana waydiiyay qiimaha dhagaxa, kelmad ma odhan ee laba farood ayuu kor u taagay, ninkii ayaana yidhi:- laba boqol oo doolar miyaa?,waan qaadanayaa haddaa!!!.

Wiilkii yaraa gurigii ayuu ku noqday, aabihiina wuxuu u sheegay in nin doonayo inuu ku iibsado dhagaxa laba boqol oo doolar, aabihii ayaa ku yidhi:- wiilkaygiiyow, meesha ugu dambaysa ee aan kuu dirayaa waa goobta lagu kaydiyo dhagxaanta qaaliga ah, mulkiilahana tus, qiimihiisa markuu ku waydiiyana kelmad ha odhan ee laba farood uun kor utaag, wiilkii wuxuu tegay goobta lagu kaydiyo dhagxaanta qaaliga ah, wuxuu tusay ninkii mulkiilaha ahaa, mulkiilihii goobtuna wuxuu ku yidhi wiilkii:- halkee ayaad ka keentay dhagaxan?, waa mid kamida dhagxaanta naadirka ku ah dunida, immisaad siinaysaa?, wiilkii kelmad ma odhan ee laba farood ayuu kor utaagay, mulkiilihiina wuxuu yidhi:- laba kun oo doolar miyaa?, waan ku qaadanayaa!, wiilkii yaraa aabihii ayuu dib ugu noqday isaga oo fajacsan, una sheegay in mulkiilihii doonaayo inuu ku iibsado dhagaxan laba kun oo doolar, aabihii ayaana ku yidhi wiilkii: wiilkaygiiyow, iminka ma fahamtay qiimaha ay noloshaadu leedahay?!!!.

Muhiim ma’aha halka aad ka timid, halka aad ku dhalatay iyo midabka aad tahay, laakiin waxa muhiim ah halka aad go'aansato inaad naftaada dhigto, qof kastaa waa sida dahabka noociisa qaaliga ah oo dadka kamida, isaga ayaana ka caawin kara dadka kale inay fahmaan qiimaha uu leeyahay, naftaada waxaad ka dhigi kartaa mid liidata oo laba doolar lamid ah ama mid sare oo laba kun oo doolar lamid ah, dadka kugu xeermaayana si xigmad leh u dooro, maxaa yeelay iyaga ayaa saamayn ku yeelan kara farqiga noloshaada!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

UBAX AYAAN DAAQADDA KATUURAY!!!



Gabadh yar oo ardayad ah oo dhib-badnayd ayaa maalin xafiiska maamulaha loogu keenay, wuxuu waydiiyay:- maxaa lagugusoo saaray?, waxay ku jawaabtay:- ubax ayaan daaqadda ka tuuray, maamulihii ayaa isagoo yaaban wuxuu yidhi:- bal macallinkan daya, ma intaa keliya ayuu xafiiska kuu keenay, ubax ayay tuurtay bes!, kaasi waaba macallin waalane orodoo fasalkaaga aad!!!.

Inyar kadib waxa la keenay gabadh kale oo rif- rifan, jilbaha iyo dhabarka haysata, jidhku buur-buuranyahay, madaxuna dakhran yahay, wuxuu maamulihii waydiiyay:- yaa sidan kuu galay?, waxay tidhi iyadoo ooyaysa:- aaaa, xamdi ayaa daaqadda iga tuurtay, maamulihii ayaa yidhi:- oo ubax ayaan tuuray ayay igu tidhiye?, gabadhii ayaana tidhi:- macallin, ubax anaa la iyidhaahdaa!, maamulihii

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ayaana yidhi:- laa xawla, oo ubaxii geedka ka bixi jiray ayaan moodaayaye, waar soo celiya tii!!!.

Hubsiimo halbaa lasiistaa, weligaa arrimaha cagta udhig, deg-deguna ma wanaagsana ee kafeejignow!!!.

HOOYO, AMARKA QAADO!!!



Aabaheed wuxuu joogay Maraykanka, reerkuna waxay joogeen dalkooda hooyo ee India, wuxuu usoo dhammeeyay wax alla wixii lagu dhoofi lahaa ama lagu tegi lahaa Maraykanka, reerkii ayaa yimid garoonkii diyaaradaha, waxa la bilaabay in lafatasho ama labaadho dadkii, gabadhii ayaa laga codsaday inay siibto ama bixiso xijaabka, laakiin way diiday, hooyadeed ayaa ku tidhi:- gabadhaydiiyey hal-mar ood xijaabka bixiso waxba kaama dhimayso, diyaaraddiina bixitaankeeda daqiiqado yar ayaa ka dhiman ee hooyo amarka qaado, way diiday gabadhii, tidhina:- Allah swt ma ogola, waxa soo wacay aabaheed kuna yidhi:- waxaan idinku sugayaa garoonka ee masoo baxdeen, hooyadii ayaana ku jawaabtay:- wax yar kadib ayaanu soo baxaynaa, wayna ka qarisay diidmada ay gabadhiisu samaysay oo ah inay xijaabka bixiso!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Sidii la isku haystay ayay diyaaraddii ka tagtay, hooyadii murugo ayaa udhammaatay, gabadhii ayay canaanatay iyadoona leh:- hoogto haddaad halmar bixin lahayd maysan inaga tegi lahayn diyaaraddu!!!.

Maamadii waxay aragtay nin ay isku qaraabo yihiin oo garoonka ka duuli raba una sheegtay dhibka dhacay, wuxuuna yidhi:- dhib maleh ee diyaaradda xigta raaca anaana dhammaynaaya arrintaas, lana hadlaya qolyaha wax baadha, way raaceen diyaaraddii xigtay ayadoo aan laga bixin xijaakii, markay ka degeen garoonka dalka maraykanka ayaana aabihii oo ilmaynayaa arkay reerkii, isagoo naxsan ayuu kusoo orday, yidhina:- manooshihiin, yaab, oo maxaa dhacay ayay tidhi xaaskiisii, wuxuuna ku yidhi:- diyaaraddii idinka horraysay ee aad soo raaci rabteen ayaa dhacday, dadkiina kuwada dhinteen, aniguna dadkaas ayaan idinku xisaabiyay, maamadii oohin ayay qabsatay, gabadheeda ayay hab-siisay tidhina:- maanta xijaabkaaga ayaa na-badbaadiyay!!!.

Haddii gabadhu ogalaan lahayd in xijaabka ay bixiso kadibna raacdo diyaaraddii u horraysay dadka shilkaasi ku dhacay ayay kamid noqon lahaayeen, balse diidmada ay diiday ayaa badbaadisay, gunta iyo gunaanadkana gabdhow xijaabku ama asturnaantu waa badbaado ee ilaashada, wixii uu Allah swt kugu amray ayaana khayrku kuugu jiraa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

KELIGEED MAYSAN AHAYN!!!



Gabadh ayaa habeen waxa ay ku soo daahday guri ay deganayd gabadh kale oo ay saaxiibo yihiin, halkaas oo ay habeen kasta wax ku baran jireen, markii ay waxbarashadoodii soo dhammaysteen ayay gabadhii soo baxday, intii ay wadada maraysay ayay cabsi dareentay, maadaama oo ay waddadu cidlo ahayd, waxay talo saaratay Allah swt, wax yar kadib waxay aragtay nin geed horteeda ah ku gabanaaya, way naxday waxayna Allah swt ka bariday inuu badbaadiyo, qur'aankana afkeeda ayay ku qabatay, si uu Allah swt ugaga badbaadiyo cadawga horteeda taagan, ayadoo qur'aanka afkeeda ku haysa ayayna si tartiib ah ninkii u ag-martay, gurigoodii ayayna si nabad ah ku tagtay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Subixii ayaa waxa ay maqashay in waddadii ay soo martay geedkii ninku ku jiray agtiisa lagu dilay gabadh, xilliga uu dilku dhacayna waa qadar 10-daqiiqo kadib markii ay meesha martay, waxay dareentay in ninka dilka gaystay uu yahay kii ay soo ag-martay, si ay booliska ugu sheegto ninka tilmaantiisa ayayna u aaday saldhiga, taliyihii saldhiga joogay ayaa u sheegay inay hayaan dhawr nin oo habeenkaas lasoo qabtay, loogana shakisanyahay dilka gabadha inay gaysteen, sidaa darteedna wuxuu gabadhii ka dalbaday inay ragaas wajiyadooda eegto oo ay sheegto haddii uu ku jiro ninka ay habeenkii aragtay!!!.

Gabadhii ayaa si geesinimo leh usoo hor istaagtay raggii eedaysanayaasha ahaa, waxay ka aqoonsatay ninkii, wayna sheegtay, ninkii ayaa isna dembigii qirtay, gabadhii ayaana taliyaha ka codsatay in ninka loo waydiiyo sababta uu iyada usoo weerari waayay, markii la waydiiyayna waxa uu ku jawaabay:- kaligeed maysan ahayn ee waxa dhinacyada ka socday laba nin oo dhaadheer oo xoog badan, Allaahu akbar!!!.

Markasta oo aad Allah swt raalli-geliso, waa markasta oo uu Allah-na swt kaaga filnaado mid kasta oo kamid ah makhluuqiisa kuunasoo qasdiya in uu kudhibo ama kuwaxyeeleeyo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXA LAGA YAABAA IN AY WASAKHI KU DHACDAY!!!



Macallimad ayaa cashar u bixinaysay hablo , waxay soo qaadday xalwado ay soo iibisay, xalwadaha qaar waxay lahaayeen dahaadh bac ah oo kii shirkadda ahaa, kuwa kalena bilaa bac ayay ahaayeen, waxay ku tidhi hablihii:- xalwaddaa cuna maanta waynu iska xafladaysanaynaaye, kadib hablihii fasalka oo dhami xalwaddii bacda lahayd ayay qaateen, macallimaddii ayaana waydiisay:- waayo, maxaad u qaadan waydeen xalwadda furan ee bilaa dahaadhka ah?!, hablihii ayaana ugu jawaabay:- macallin waxa laga yaaba inay wasakhi ku dhacday ama waa la isticmaalay oo qofbaa dahaadhkii (bacdii shirkadda) ka furay!, macallimaddii ayaana ku tidhi:- hablayahaw idinkuna xalwad oo kale ayaad tihiin, xijaabka ama

asturnaantuna halka bacda ayuu idiinku jiraa, haddaad ka tagtaana wasakhda iyo jeermiska ayaa idinku daadan (ragga xun-xun)!!!.

Asturnaantu iyo in jidhkeena iyo cawrooyinkeenaba aynu asturno, kana asturno makhluuqa kale waa mid uu Allah swt inagu addoonsaday haddaynu nahay rag iyo haweenba, haba lagu kala duwanaado xaddiga jidhka laga asturayo ama inta jidhka cawrada ka ahe, wax-kasta oo Allah swt ina faray samaynteedana waa wax inoo wanaagsan, sidoo kale wax kasta oo layna faray in aynu katagnona, kategisteeda ayaa inoo fiican.

Farnow wixii Allah swt ku faray, kana reebtoonow wixii Allah swt kaa reebay.

MAXAANU U-ADEEGSANAA LACAGTA!!!



Haweenay qabta cudurka halista ah ee kansarka oo wadatay shandad ama boorso lacagi ka buuxdo ayaa tagtay dhakhtar, kadibna dhakhaatiirtii halkaas ku sugnaa ayay ka codsatay in ay nolosheeda badbaadiyaan ayna siinayso lacag aad u badan, markii baadhitaan lagu sameeyay haweenaydii ayaa dhakhaatiirtii waxa ay u sheegeen inaysan badbaadin karin nolosheeda, sababtoo ah kansarka ay qabto in uu marayo marxaladdii udambaysay oo aan waxba laga qaban karin!!!.

Haweenaydii oo aad ucadhaysan ama uxanaaqsan ayaana lacagatii oo dhan ku daadisay dhakhtarka dhexdiisa, waxayna tidhi:- haddaba markaa maxaanu u adeegsanaa lacagta?, maxayse tahay hadafka aanu u adeegsanno lacagta, haddii aysan nolol badbaadinayn?!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Dulucdu waxa ay noqonaysaa in aynaan lacagta ku iibsan karin waxyaabo badan oo nolosheenana muhiim u ah, balse dhammaantood ah nimcooyin uu Allah swt innagu deeqay, sida:- caafimaad, wakhti, nolol iwm!!!.

Alxamdulillah, aynu u xamdi-naqno marwalba Rabbigeen swt ina siiyay nimcooyinka aan xadka lahayn oo caafimaadku uu kamid yahay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

IS-URURI!!!



Gabadh si qurux badan u lebisan ayaa biinka timuhu kaga dhacay dariiqa dhakhtarka dhexdiisa, way ku qosleen, kadib markay ku caayeen inay bidaar leedahay, waxa caawiyay wiil dhallinyaro ah oo meesha ka dhowaa, iyadoo ooyaysa ayayna ku tidhi:- maxaa dembi ah oo aan galabsaday haddii kansarku iga baabi'iyay tintaydii quruxda badnayd?!!!.

Kadigtoonow hadallada qaar ee niyad dilka ah, cudurraduna ma haleelaan jidhka oo qudha, balse waxa kale oo ay wax-yeeleeyaan anshaxa iyo dad la dhaqanka dadka, haddii aad aragtid qof xanuunsan ama si kale loo imtixaanayna Allah swt uwaydii caafimaad, adna u mahad-celi.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Waxa la inaga abuuray candhuuf, asalkeenu waa dhoobo, dharkeena ugu qaalisan waxa laga sameeyaa dirxi, cunadeena ugu macaan waxa aynu ka helnaa shinni, hoygeenna dhulka hoostiisu waa iil yar, innagoo dhan ayaana iska wada diciif ahba, saasoo ay tahayna cidna ha iska waynaysiinin, hana ku gefin ee is ururi intii aad is-ururin-karto, dadkana kula dhaqan qaab-fikirkooda hana haku quudhsan qaab-dhismeedka jidhkooda, midab-kooda ama waxa ka muuqda ee diif iyo darxumada ah, waxaad doontona noqo maanta waxaadse socotoba berri waa lagu aasayaa, waanaad lakulmaysaa wixii aad sii hor-marsatay ee lasoco!!!.

Noqo mid is-dhul-dhig badan!!!

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAXA JIRTA MAALIN LAYS-KASHIFAAYO!!!



Waxay ahayd shaqaale ka shaqaysa guri, balse reerka gurigu maysan ixtiraami jirin, waxa ugusii darnayd hooyada guriga, way ku tuman jirtay xuquuqdeeda, mushaharkana way ka daahin jirtay, illaa markii dambe ayba iska eryeen gabadhii, waxay maqashay shirkad looga baahan yahay gabadh xaaqda xafiis-yada, way aaday, waa laga shaqaalaysiiyay, waxay bilawday xaaqista xafiis-yada, sida caadadu ahayd waxay aaday aroor-nimadii shirkaddii si ay u qabsato shaqadeedii!!!.

Waxay bilawday xaaqista xafiis-yada, markay maraysay xafiiska maamulaha shirkadda ayay aragtay lacag dhan 1000 doolar oo lagu illoobay miiska, waxay gashatay jeebka, waxay sii wadatay hawsheeda, markii ay dhammaystirtay

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

shaqadii ayna soogaleen dhammaan shaqaalihii shirkadda iyo maamulihii, ruux walbaana bilaabay shaqadii loo igmaday ayay gashay xafiiska maamulaha, kuna tidhi:- waan ku salaamay mudane, adigaan ku sugaayay, saaka aroortii mar aan xaaqayay xafiiskaaga ayaan ka dhax helay lacag dhan 1000 doolar, dabcan adigaa ku hilmaamay, waana kan mudane ee hoo!!!.

Maamulihii ayaa si deg-deg ah uga qaaday lacagtii, waydiiyayna sababta ay u qaadan wayday, waxayna ugu jawaabtay:- waan isku deyay inaan qaato, balse waxa jirta maalin lays-kashifaayo waana maalinta qiyaame, soona xasuustay maalintaas, deetana waan bedelay go'aankaygii, wuu layaabay maamulihii arrinta, wuxuuna ku yidhi:- waxa jira nin u fadhiya qaybta imtixaan-qaadista qofkii raba inuu shaqaale ka noqdo shirkaddan, waxaana ka shakiyay ninkaas in laaluush lasiiyo, waayo shaqaalaha waxaan ku sameeyay dabagal, waxaanaad mooddaa inaysan u bislayn qaarkood shaqada, sidaa darteed adiga ayaan kugu bedelayaa, waxaanaan kusiinayaa maalmo kooban casharro ku saabsan shaqada aan kuu dhiibayo!!!.

Wuu siiyay casharradii, way ku fadhiisatay kursigii, balse maxaa dhacay, maalmo kadib waxa yimid wiil rabay in laga shaqaalaysiiyo shirkaddan, waxa la socotay hooyadii, markii loo tilmaamay xafiiska qaabilaadda iyo qaadista imtixaanka shaqo-raadiyahana way soogaleen, markii indhaha qac laysku siiyay waaba reerkii ay u shaqayn jirtay iyo gabadhii ay u shaqayn jirtay, yaab iyo amakaag kadib ayaa la bilaabay qaadista imtixaanka, wuu ku guulaystay wiilkii imtixaankii, islamarkaana waxa soo galay maamulaha shirkadda isagoo leh waan kuu baahanahay ee ii imow hawl deg-deg ah ayaad ii qabane, kadibna wuu is majiiray, waxay ka daba tuurtay

hadal ah:- wax yar kadib ayaan kuu iman, wuu istaagay oona yidhi:- hawshu waa deg-deg, istaag hana kuluminin wakhtiga dadkan!!!.

Waxay tidhi:- waa qaraabaday, wuu istaagay soona laabtay oo ku yidhi:- maansha Allah, soo dhawaada, saw maadan ka qaadin imtixaanka wiilka, kawarranse natiijada, waxay ku tidhi:- waa heer sare, haddaba berri waad iman kartaa ayuu ku yidhi maamulihii wiilkii, wuxuuna uraaciyay:- gabadhiina siday shalay ahayd iyo siday maanta tahay ismalaha, waxaana gaadhsiiyay daacad-nimadeeda, gabadhii ayaa tidhi:- haa mudane waa sax, illeen adduunku waa hadhkaa labadiisa geline, maamulihii ayaana qoslay oo yidhi:- sax, balse gabadhu ujeeddo kale ayay kawaday hadalkeeda, wiilkii iyo hooyadii afkii ayaa juuqda gabay, hadalbana wuu soo dhaafi waayay, indhataag iyo aamusnaan ayaana kasoo hadhay!!!.

Ula dhaqan si wacan xittaa hadduu yahay shaqaalahaaga kan ugu hooseeya, illeen aduunku waa hadhkaa labadiisa geline, kamana war haysid mustaqbalka soo socda iyo siduu xaalku noqondoono'e, iyadoo Islaam ahaan aanba laynoo ogolayn in aynu wanaag usamayno soocelin aynu berri kasugayno cid aan Allah swr ahayn, daacadnimada iyo kudhaqanka Diintuna waa shay qaaliya, waana ta ay ku jirto liibaanta ifka iyo ta aakhiraduba!!!.

Sameena ficil-kasta oo wanaagsan adiga oo Allah swt uun ku raalli-gelinaaya, Allah-na swt kuma dayacaayo if iyo aakhiroba.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

NOLOSHAADA AYAABA KHALAD AH!!!



Waxa ay ka dhalatay qoys faqiir ah, taas oo ay usii dheertahay in layaso qoyskeeda ama qabiilkeeda, waxay dhigan jirtay koolaj, ardayda koolajku maysan ixtiraami jirin wayna ku jees-jeesi jireen, murugo iyo walbahaar ayay ku noqotay oo ardayda ayay ka soocnayd, waxa aad ugu taagnayd gabadh madax u ahayd gabdhaha koolajka oo aad uqurux badnayd aabaheedna taajir ahaa, mar-walba oo ay xog gudbinayso waxa ay macallimiinta usheegi jirtay inay gabadhani tahay gabadh anshax xun, deetana waa la ciqaabi jiray!!!.

Maalin ayay u tagtay kuna tidhi:- walaal dembi aanan lahayn maxaad dusha iiga saaraysaa?, waxayna ugu jawaabtay:- noloshaada ayaaba khalad ah, maxaad dunida ka joogtaa, haddaad joogtona waa inaad noo shaqaysaa annagoo taajiriin ah,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

way ka cadhootay ereyadaa ay maqashay, waxay go'aansatay waxay tahay inay tusto, waxay joojisay koolaj-kii oo gabadhii ayaa ku dirtay wiilasha iyadoo isticmaalaysa quruxdeeda iyo maal-keeda, deetana way ka baxday!!!.

Waxay bilawday inay barato qaabka cillaanka loo saaro, muddo ayay ku qaadatay inay barato, kadib ayay bilawday inay usaarto walaalaheed iyo deriska, iyaduna isu saarto, muddo kadib waxa laga bartay xaafadda oo guriga ayaa loogu iman jiray, lacagtii ay ka ururisay ayay meel meherad ah ku furatay, halkaa ayay kaga bilawday hawshii ahayd cillaan saarka, balse waxa yaab noqotay markay la timid nashqado cusub oo cajiib ah, taas oo kelliftay inuu u yimaaddo ganacsade caan ah una sheegay inuu aad uga helay nashqadaha ay usaarayso dumarka, kadib markii uu arkay xaaskiisa oo ay usoo-saartay, diyaarna uu uyahay inuu horumarinaayo ganacsigeeda cajiibka ah, iyana way ku faraxday wayna soo dhawaysay!!!.

Sannado gudahood waxay caan ka noqotay magaalada, heer aroos walba oo dhaca loo iman jiray, iyadoo lasoo dhaafi jiray meelaha kale ee lamidka ah, waxa ku batay dadkii, waxay bilawday inay gabdho barto ayna shaqaalaysiisato, waxay ku kala yeelatay waddanka laamo badan, waxay fadhiisatay xafiis, iyadu ma saarayso ee keliya nashqadaha ayay hindisaysaa, shaqaalaheeda ayaa qabanaaya hawsha, maalin ayaa lasoo wacay laguna yidhi:- gabadh ayaa ubaahan in loo saaro nashqad cusub, sidaa darteed waa inaad u hindistaa, waxay ku jawaabtay:- iminka mashquul ayaan ahay ee usaara nashqadihii udambeeyay ee aanu hindisnay, haddii kale markaanu keeno nashqad cusub ha timaado, balse waxa loosheegay inay diiday diyaarna u tahay lacag badan inay bixiso, waxay ku war-celisay:- waan ka xumahay agtayda lacagi waxba kama aha ee saan sheegay ha samayso, haddaysan ahayna way bixi kartaa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Maalmo kadib ayay soo laabatay gabadhii ayadoo cadhaysan oo odhanaysa:- waxaan arkay gabadh loo saaray nashqad cusub, idinka ayaana usaaray, anigana waataa idhahdeen:- guddoomiyahayagu way mashquulsantahay, waxa loogu jawaabay:- mudanaha ayaa noo keenay, anaguna waanu u saarnay keliya, anagu shaqaale ayaanu nahay, wixii sameeya nala dhahona waanu samanaynaa, markaa ayay tidhi:- hagaag, hadda waca oo nashqad halay sameeyo, markaas ayay ku yidhaahdeen:- mashquul ayaanu nahay hadda ee markale noo imow, intay cadhootay haddana ayay tidhi:- kala qaada afkiina oo sheegta intaad rabtaan, intay dhoolacaddeeyeen ayayna ugu jawaabeen:- hadday lacagi wax kuu tarayso nashqad cusub hakuusoo hindisto!!!.

Gabadhii waxay bilawday baryo, ayadoona odhanaysa:- bani-aadminimada wax maka taqaanaan miyaa?, xaalku markuu halkaa marayo ayay soo gashay mulkiilihii meheraddu, iyadoo odhanaysa:- haye, hawshu sidee tahay, sifiican ma-usocotaa, maxaase idinkusoo kordhay, waxayna ugu jawaabeen:- haa mudane, waxayna usheegeen arrinta gabadhan iyo wixii dhexmaray, markii indhaha qac la isku siiyayna waaba gabadhii madaxda ka ahayd koolajka ee aabaheed uu taajirka ahaa!!!.

Gabadhii yaab, naa ma adigaa ruuxa aragiisu noqday qaaliga!, abaayoy iga raalli noqo wixii ina dhaxmaray waagii hore, waxaan ubaahanay inaad ii hindisto nashqad cusub, waxaad rabto diyaar ayaan kuula ahay, waa ku baryayaa ha iga diidin ee iga ogolaw ayayna ku tidhi, intay dhoola-caddaysay ayay ugu jawaabtay mulkiilihii:- bes, jooji calaacalka waad badisee, shaqaalahayga xittaa waad iga

mashquulisay, imow berri, waa diyaar, haddana waad bixi kartaa, qisadanina waxa ay kadhacday dalka India!!!.

Afkaaga iyo ficilkaagaba bani-aadamku haka nabad-galo, haddii kale ugu yaraan qoomamo ayaad noloshaada oo dhan ku qaadanaysaa (waa haddii damiirkaagu inyarna noolyahaye), haddii cid ladulminaayona waxa qurux-badan in aanad noqon ka wax dulmiyaaya, ee aad noqoto ka la dulmiyaayo, markaas ayaadna inta aad nooshahay kunoolaanaysaa nolol raaxo iyo bilaa qoomamo ah, intii awooddaada ahna ku dedaal horumarinta naftaada ee if iyo aakhiroba, wixii awooddaada kabaxsanna Allah swt ayaa kaa kor-qaaday ee ha isku mashquulinin marnaba!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

KALA-MAAN!!!



Nin ayaa soo galay hoteel cunto isaga oo u baxay fadhiistayna meel koone ah, ninkaasi waxa uu gacanta ku hayay warqad iyo qalin, oday da'ah oo goobta fadhiyay wuxuu u qaatay in ninkani hooyadii warqadan u qoraayo, wiil dhallin-yar ahi waxa uu u maleeyay in ninkani warqadda u qoraayo jacaylkiisa, wiil aad uyarina waxa uu u fahmay in ninkaasi wax sawiraayo, nin ganacsade ah ayaa isna dhankiisa u qaatay in uu heshiis saxeexaayo, halka nin shaqaale ahina uu u fahmay inuu ku qorayo warqadda qaanta lagu leeyahay ama daymihiisa!!!.

In badan qof kastaa waxa uu hab-dhaqanka dadka kale u fasirtaa xagasha uu danaynaayo ama isagu ka fikiraayo ee muhiimadda u leh, qof kastaana waxa uu dadka u arkaa hadba sida dabeecaddiisu tahay isaga, sidaa oo ay tahay cidna ha

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dulmin, adiguna samee oo yeel sida aad ku qanacsantahay, maxaa yeelay marnaba kama bad-baadaysid hadalka iyo carrabka dadka si kasta oo ay noqoto!!!.

Kudedaal xakamaynta dareemadaada shakhsiyeed marka aad arrimo ka go'aan-qaadanayso, adigaba haku khuseeyaane!!!.

TUSAALIHII TAARIIKHDA GALAY!!!



Macallin jaamacadeed ayaa cashar siinaayay arday, miiska hortiisa ah waxa saarnaa laba dhalo oo waawayn, hal dhalo ayuu wuxuu ka buuxiyay ciid, kadibna wuxuu ku shubay dhagax-dixeed (quruurux), wuxuuna ardaydii waydiiyay in ay dhaladu buuxdo?, waxay si fudud ugu jawaabeen:- haa, wuxuu soo qaaday dhagxaan waawayn, wuxuu isku dayay inuu geliyo dhalada ciidda iyo quruuruxu ka buuxo, balse waa ay geli waayeen, wuxuu haddana waydiiyay fasalkii sida dhagxaantan waawayn loo gelin karo dhaladan, waxay inta badan odhanayeen ciidda ka daadi qayb, kadibna xoog u-geli dhagxaanta, iwm!!!.

Macallinkii ayaa u sheegay inay hilmaameen inay jirto dhalo kale oo halkan taal oo faaruq ah, haddaba si uu u wada geliyo wuxuu marka hore ku riday

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dhagxaantii waawaynayd, wuxuu ku xejiyay quruuruxii, kadibna wuxuu ku shubay ciiddii, wuxuuna yidhi:- hadda waxaan rabaa inaad garataan in dhaladani ay metelayso naftiina iyo inkale, dhagxaanta waawayn waa waxyaabaha muhiimka noloshiina u ah sida:- Diintaada, Qoyskaaga, Caafimaadkaaga, Lammaanahaaga, Carruurtaada, waxyaabo haddii wax kasta oo kale la waayo oo iyaga keliya la haysto naftaadu ay weli ahaanayso mid buuxda oo fadhida!!!.

Quruuruxu waa waxyaabaha kale ee ku xiga, sida:- Shaqadaada, Gaadhigaaga, Gurigaaga, iwm, halka ciidduna ay katahay wixii kale ee soo hadha, yacni waxyaabaha yar-yar balse aan aadka muhiimka u ahayn sida Caways, Madadaalo, Ciyaaro, iwm, haddii aad ciidda ka hor buuxiso marka hore meelina uma bannaana dhagxaanta, waxyaabihii muhiimka kuu ahaa nolosha markaa waxa dhici karta in aad is tidhaahdo khasab ku geli halkaana aad ka qaaddo jaah-wareer iyo kadeed!!!.

Haddaba, haddii aad ku lumiso wakhtigaaga iyo tamartaada oo dhan waxyaabaha yar-yar marnaba boos u heli maysid wixii muhiimka kuu ahaa, markaa ka taxaddar waxyaabaha u daran naftaada, waqti fiican la qaado qoyskaaga, la ciyaar carruurtaada, qabo shaqo kasta oo kuu taal, iska hagaaji hoygaaga, iska habee xafiiskaaga, habeen kasta qoro waxyaabaha muhiimka ah oo ay tahay inaad qabato maalintii, kana taxaddar dhagaxda waawayn marka hore, waxyaabaha muhiimka kuu ahna ku mashquul, mudnaanta iyo ahmiyaddana sii!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

KUMA AYAA WELI DOONAAYA!!!



Nin codkar caalami ah ayaa bilaabay tababar isaga oo gacanta ku sita lacag 20 doolar ah, waxa tababarkaasi kasoo qayb galay dad gaadhaaya 200 oo qof si ay u dhegaystaan hadalkiisa, waxa uu waydiiyay dad-waynihii:- kuma ayaa doonaaya 20-kan doolar?, 200-dii boqol ee qofba gacanta ayay kor u taageen, taas oo macnaheedu tahay in 200-ba ay doonayaan, waxa uu mar kale ku yidhi:- waxa aan doonayaa inaan siiyo hal qof oo idinka kamid ah, kadib dhulka ayuu ku tuuray lacagtii wuuna ku jog-joogsaday, wuu soo qaaday wuxuuna tusay dad-waynihii, lacagtii hadda way duuduubantay waxayna noqotay uskag, kuma ayaa weli doonaaya?:- dhammaan weli gacanta ayay taagayaan., intaas dabadeed waxa uu yidhi:- asxaabey, keliya waxa aan doonaayay inaan idin baro cashar aad u muhiima , dhib maleh waxa

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

aan lacagta ku sameeyay, weli waad rabtaan, waayo qiimaheedii hoos ugamay dhicin, welina qiimaheedii waa 20 doolar!!!.

Marar badan noloshu waxay inagu tuurtaa hoos, habaaska ayayna ina dhigtaa, waxaynu qaadanaa go'aamo xun-xun, waxaynu moodnaa inaynu halkii aynu maraynay hoos ugasoo dhacnay, waxaynu dareennaa inaynu bilaa qiimo nahay ama noqonay, laakiin dhib maleh waxa inagu dhacayaa ama inagu dhici doonaa, adigu marnaba ma waayaysid qiimahaagii, haddii aanay adiga kaa iman ama aanad adigu iswaysiin!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

DHAL-DHALAALKA ADDUUNYADA!!!



Malab saafi ah ayaa dhulka ku daatay iskuna gadaamay goob wayn oo carrada ama ciidda dusheeda ah, in kastoo malabku yahay shay aad u soo jiita cayayaanka yar-yar, kunasoo xoomaan, waxa dhacday in durbadiiba qoyaanka malabka ay soo raacday qudhaanjo yar oo inta ay malabka dhadhamisay aad uga heshay macaankiisa, sidoo kale tiro dhawr jeer ah oo ay kabatay malabka ayaa ku abuuray dareen qanaaco, taas oo sababtay in qudhaanjadu gaadho go'aan ah in ay si fiican gudaha ugu gasho malabka illaa ay uga tallaabto darafka kale ee baaxadda malabku gaadhsiisanyahay, iyadoo ku han-wayn in ay ku raaxaysato guud ahaan malabka ku teedsan dhulka dushiisa!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Waa go'aan geesinimo leh walow aan la ogayn khatarta ka iman karta arrinta caynkaas oo kale ah, si kastaba qudhaanjadii markii ay gaadhay badhtamaha malabka waxa yaraaday awooddii ay debedda ugusoo bixi lahayd, lugaheedii ayaa qabsaday malabka oo udiiday in ay dhaqaaqdo illaa ay ugu dambayntii ka dhimato, sidaasna kusoo af-jarto nafteedii qaaliga ahayd!!!.

Haddaba, Culimada qisadan cabiray ayaa isku raacay in adduunyadu ay tahay sida dhibicdan malab ah ee wayn oo kale, qofkii qayb yar ka quuta kuna qanca waa uu badbaaday, laakiin axadkii ku dhiirrada inuu gunta ka gaadho malabkaas waa uu halaagsamay, dedaalka qofkuna ma aha mid reeban, balse waxa qasaare iyo nasiib-darro ah in dhal-dhalaalka adduunyadu uu kula fogaado, kuuna horseedo in mawdku uu kugu kediyo adiga oo aan diyaar ahayn, oo aad ka qoomamayso maalkii aad kaga mashquushay cibaadada Alle swt iyo sahaydii kaa anfici lahayd maalinta aakhiro, haddaba walaalka Muslimka ahow is xisaabi inta aan lagu xisaabin!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

GUULAYSO MAS'UUL!!!



Waxa uu uyimid maamulaha shirkadda, wuxuuna ku yidhi:- mudane laba maalmood kahor waxaan maqlay inuu boos kabannaanyahay shirkaddiina, waxaana diyaar u ahay inaan buuxiyo booskaas, waana tan warqadda codsigayga iyo shahaadooyinkayguba, maamulihii ayaa ku yidhi: waan ka xumahay waad soo daahday, waxa kaasoo horraysay in kabadan kun qof, wayna xidhmatay qabashada codsiyadu ee naga raalli-noqo wll!!!.

Wiilkii ayaa afka gacanta saaray, eegayna cirka, isagoo xoogaa yar fikiraaya ayuuna yidhi:- mudane haddaba iishaqaalaysii kala saaridda siifiiyada iyo shahaadooyinka goobtan yaala ee kunka qof ee codsiga soo dhiibtay ah, maamulihii oo layaaban sida uu wiilku udedaalaayo misana hadalkii uu ku yidhi kadhex-

samaystay shaqo ayaa ku yidhi:- haddaba saacan laga bilaabo waxaad tahay xubin kamid ah shirkadda, markaad dhammayso shaqadana waxaan kuu hayaa shaqo kale ee guulayso ayaan ku leeyahay mas'uul!!!.

Fikirku waa muhiim, ufiirsashada hadalka iyo inaad dhuuxdidna waa muhiim, wiilkanina hadduusan ufiirsan lahayn hadalka maamulaha wuu iska bixi lahaa asagoo murugaysan, balse hadalkiisa ayuu ufiirsaday kana abuurtay shaqo cusub!!!.

MA ISLEEDAHAY ISBEDDEL AYAA MUUQDA!!!



Waxa ay degeen hoteel, balse muddo yar kadib ayaa saaxiibkiis ku yidhi:- waynu iskaga guuraynaa hoteelkan gebi ahaantiisaba, waayo shaqaalihiisu way madax adag-yihiin, waxaanaad moodaa inaysan ubislayn shaqada, wuxuu ugu jawaabay:- haddaan xalliyo maxaad samayn, wuxuuna ugu war-celiyay:- waynu joogaynaa, waayo dhibka ihaysta haddii la xalliyo waa maxay sababta aan uguuraayo oo aan hoteel kale u aadaayo!!!.

Wuxuu aaday maamulaha hoteelka kana dhaadhiciyay inaysan shaqada ubislayn shaqaalaha hoteelku, maamulihii ayaa gundhiyay madaxa yidhina:- hagaag, haddaba maxaa xal ah, ma waxaan keenaa shaqaale cusub, maxaad fikrad igusoo

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

kordhinaysaa, wuxuuna ugu jawaabay:- waxaan u qabanayaa tababar, kuna barayaa qaabka loosoo dhaweeyo, loolana dhaqmo macaamiisha hoteelka iyo madaxdiisa!!!.

Wuu ka aqbalay, waxa lagu war-geliyay shaqaalihii inuu jiro tababar muhiim ah, waa loo qabtay, waana loo dhammeeyay, maalmo kadib ayuuna saaxiibkii ku yidhi:- ma isleedahay isbeddel ayaa ka muuqda shaqaalaha hoteelka, mise weli waad ka cabanaysaa, isaga oo yaab kamuuqdo ayuuna ugu jawaabay:- sidee ku dhacday inaad beddesho, waayo waxaan ku arkaa isbeddel wayn inay sameeyeen, maxaadse ku xallisay arrinkan, yaase ku baray qaabka loola dhaqmo macaamiisha hoteelka iyo madaxdiisa, isaga oo hadalkaba aan ku dheeraan, soona gaabinaya ayuuna ugu jawaabay:- badso akhriska, waxaana yaraanaaya cabashadaada, inta badana arrimaha kugu yimaada waxa kuu fududaanaaya xallintooda!!!.

Wuxuu dareemay mushkilad, wuxuu ku xalliyay inuu iskaga guuro hoteelka, balse saaxiibkii ayaa xalliyay mushkiladdii asaga oo xallinteedana lacag ku qaatay, magacna kaga yeeshay hoteelka, kasbadayna maamulkii hoteelka iyo shaqaalihiiba, waana farqiga u dhaxeeya ka wax akhriya iyo midka aan waxba akhriyin!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

CAQLIGU HA-SHAQEEYO!!!



Wuxuu ahaa khudaarle, mar Alla markii uu mashquulona waxa usoo daba mari jiray sac, isla mar-ahaantaana cuni jiray khudaarta, dadka ayaa uga celin jiray oo qaraaci jiray saca, una sheegi jiray isaga, markaasuu ku odhan jiray:- waa xayawaan ee maxaad ka qaraacaysaan, haddaadse qaraacdaan miyuu idin dayn, waa maya, dadkuna way layaabi jireen oo odhan jireen:- waxbuu kaa cunaa, waanaad u cudur-daaraysaa , maalinkii dambe ayaa uu sacii wax wayn xantoobsaday dadkii ayaana kulasoo deg-degay ulo, balse ninkii ayaa ka qabtay, wuxuuna qoray warqad uu u qoray sidatan:-

Ku:- qofka iska leh sacan.

Ka:- qof ay maalin kasta khasaariso.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Walaalow waxba kaama rabo, kuumana haysto intay iga khasaarisay, keliya iga cesho xoolahaaga.

Bashqad ayuu geliyay, xadhig ayuu ku xidhay, sacii ayuuna qoorta u geliyay, wuuna fasaxay, maalin dambena laguma arkin sacii suuqa!!!.

Gebagebadii, caqligu ha shaqeeyo!!!.

HALKEE AYAYNU JOOGNAA!!!



Nin shaqadiisu ay ahayd geedo-goyn ayaa maqlay in la baadigoobaayo qof shaqadaasi aad u yaqaana oo geedo badan jari kara, wuxuu soo aaday goobtii laga doonaayay shaqada, wuxuu la kulmay ninkii doonayay, waxa lawaydiiyay hal su'aal oo keliya oo ahayd:- waxaan leeyahay beer ay ku yaaliin 45 geed oo waawayn, haddii aan ku siiyo faas cusub immisa maalmood ayaad ku jari kartaa?, ninkii wuxuu yidhi:- shan maalmood keliya, way heshiiyeen labadii nin, lacag fiican ayaa loo sheegay ninkii geedaha jarayay, aad ayuu ugu qancay, waxa la siiyay faas cusub, waxa la dhex geeyay beertii uu ka jari lahaa dhirta, shaqo wacan ayaana lagu-yidhi!!!.

Maalintii kowaad ninkii wuxuu jaray oo uu dhulka dhigay 12 geed, markii uusoo hoyday habeenkii ayaa waxa uyimid mulkiilihii beerta, wuu waraystay,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

wuxuuna u sheegay in 12 geed uu hilfaha u qaaday maanta, hambalyo si fiican ayaad u shaqaysay halkaana kasii wad berri ayaa lagu yidhi, ninkii dhir-jaraha ahaa aad ayuu ugu muusooday hadalka mulkiilaha, wuxuuna niyadda iska yidhi:- waa in aad berrina si adag u shaqeysaa!!!.

Aroortii ayuu ku kallahay beertii, wuxuu bilaabay goyntii dhirta, laakiin wuxuu dedaalaba wuxuu jaray 8 geed keliya, maalintii ku xigtay wuxuu jaray 5 geed, maalinba maalinta ay ka dambaysayna hoos ayuu usii dhacayay wax-qabadkiisu, illaa ay dhammaatay shantii maalin ee uu qabsaday, waxa uyimid ninkii beerta lahaa, wuxuu waydiiyay xaalku meesha uu marayo iyo inta geed ee uu jaray?, isaga oo niyad-jabsan ayuuna ku jawaabay:- mudane, waxaan jaray 30 geed keliya, awooddaydii ayaa sii yaraanaysay maalinba maalinta kadambaysa, mana garanaayo sababta, markaa ballantii aan qaaday waan oofin-waayay, iga raalli noqo, ninkii beerta lahaa ayaana yidhi: goorma ayay ahayd markii kuugu dambaysay ee aad afayso faaska, ninkiina wuxuu yidhi:- yaaaah, afaynaa, maba afayn oo waxaan ku mashquulsanaa jarista geedaha oo ay madaxa igaga jirtay dhammayntoodu!!!.

Ugu dambayn nolosheenu waa sidaa oo kale, waxa aynu mararka qaarkood mashquul ku nahay shaqo raadin, shaqo helis, laakiin wakhti uma helno in aynu dib isu eegno, halkee ayaynu joognaa?, maxaa inaga khaldan?, waddadani sax matahay oo Alle swt raalli ma inooga yahay?, iimaankeena ma cusboonaysiinaa?!, waynu aragnaa sida uu umuuqdo caalamku, qof kastaa waa mashquul, waxaana laga yaabaa in aynu illownay qodobadan sida ninkii dhir-jaraha ahaa ku dhacday oo kale!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Haddaba aynu iswaydiino maxaynu mashquul ku nahay, waana in aynu fekernaa, haddii kale waxaynu maalinba maalinta ka dambaysa hoos ugu dhacaynaa in aynu sii caajisno oo ugu dambayna aynu is dhiibno!!!.

Inta aad waqtiga haysato qof walbow faaskaaga afayso!!!.

WAXA AAN USEEXDAY SIDA CUNUG-YAR OO DAALLAN!!!



Waxa ay tidhi:- gabadh macallimad ila ahayd ayaa lacag iga daynsatay, markaan u baahday inaan ka qaato waxay bilawday inay iga qaban-waydo wicitaanka!, maalin gudeheed ayaan 15 mar wacay, wayna iga qaban-wayday, waxaan ogaaday in ninkeedu uu guriga ka maqanyahay, waxaana u qoray farriin, waxaan ku idhi:- lacagtii kaalama hadli rabo ee waxaan arkay ninkaagii oo gabadh qurux badan ay gaadhi isla raacayaan, isla markiiba way isoo wacday, anna kama qaban, fariin ayay iisoo qortay, waxayna tidhi:- raalli ahaw madaama aanan kaa qaban wicitaanka, mashquul ayaan ahaa!, ugama jawaabin, nusa-saac gudihiisna waxay isoo wacday 21 mar, 3 farriin oo ay iisoo qortay ayadoo iwaydiinaysa gabadhu sida ay u eegtahay iyo goobta ay ku aragtay, anna kama jawaabin!, haddana saacad

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

gudeheed waxay isoo wacday 36 mar, markaan qaban waayayna farriin ayay iisoo qortay, waxayna igu tidhi:- kawarran lacagtaadi haddaan kusiiyo adna aad ii sheegtid wax walba?!!!.

Waan u jawaabay, waxaana ku idhi:- wax aan taksi kusoo raaco mahaysto ee lacagta moobilka iigusoo dir anigaana kuu imanaaya, 20 daqiiqo wax ka yar ayay lacagtaydii moobilka iigusoo shubtay, kadib moobilka ayaan dansaday, waxaana useexday sida cunug-yar oo daallan oo kale!!!.

Way imtixaamanyihiin, imtixaankiina way kufashilmeen, haddana kuwo kale ayaa iyana lagusii imtixaamayaa, waana laysku wada imtixaamanyahay, ee Alle swt waxa aynu waydiisanaynaa in uu imtixaanka ifka iyo ka aakhiroba innagu guuleeyo, intii awooddaada ahna arrimaha ifka iyo kuwa aakhiroba oo isa saacidaaya intii waajibkaaga ah kagudo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

QOF BAAHAN CAAWI!!!



Nin ayaa habeen meel madow ah soo maray, waxa uu arkay islaan gaadhi wadatay oo uu wadada kaga banjaray, dhinacii islaanta ayuu usoo dhaqaaqay, waxaanuu ku yidhi:- hooyo anigaa kuu hagaajinayee qalabkii lagu hagaajinayay keen, farxaddii ayay markiiba qalabkii usoo saartay, waxa uu bilaabay inuu gaadhigii kabedelo shaaggii, waanuu ku guulaystay, waxay damacday inay lacag siiso, laakiin nasiib darro wax lacag ah may haynin, isaguna waxba ma uu waydiinin, laakiinse wuuxu ku yidhi:- maamo aniga waxba hay-siin, laakiin qof baahan caawi!!!.

Ninku waxa uu ahaa nin faqiir ah wax shaqaana ma uu haynin, haweenaydiisa ayaa makhaayad yar ka shaqayn jirtay, iyada oo maalin makhaayadii joogta ayay islaani soo gashay, cuntana way dalbatay, haweenaydii way u keentay,

markay islaantii dhammaysatay cuntadii ayay lacagtii gabadhii siisay, gabadhii ayaa tirisay lacagtii, waxay aragtay in lacagtu tahay 100 doolar, waxay ku tidhi:- hooyo baaqi ma hayee ka gooso baaqiga, intay islaantii faraxday ayay ku tidhi:- adigaa iska leh, laakiin qof baahan caawi!!!.

Haweenaydii waxay gurigii kuuso noqotay iyadoo faraxsan, waxaanay odaygeedii uga sheekaysay waxay maanta aragtay iyo lacagta lasoo siiyay, waxay ugu dartay inay islaantaasi ku tidhi:- qof baahan caawi, ninkii odayga ahaana waxa uu gartay islaantu inay tahay tii uu caawiyay!!!.

Allah swt waxa uu ina leeyahay:- isu naxariista, markaas ayaan anna idiin naxariisanayaaye, waana waajib kusaaran haddii aad lakulanto walaal dhibban intii aad ka awooddo in aad kasaaciddo culayskaas uu dareemaayo, hal kelmad oo wanaagsanna hanoqotee, markaas ayaad adna helaysaa gar-gaarka Eebbe swt.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WANAAGGA BILOW, ISAGAA TARMAYEE!!!



Waxa uu yidhi:-waxa aan aaday suuqa soona gaadhay ujeedadii aan u aaday, waxaan soo raacay bas caasi buuxay, nasiib wanaag waan ka helay boos aan fadhiisto, daqiiqado yar kadib oday ayaa loo istaajiyay, balse odaygu ma qabsan karo baska, markuu eegay ayuu yidhi:- waa uu buuxaa, mana qabsan karo, waxa isla markiiba shidhka gaadhiga ee hore kasoo degay wiil dhallinyaro ah, yidhina:- gal halkan aniga ayaa qabsanayee!!!.

Wuu fadhiistay odaygii, balse anigaa istaagay oo idhi:- saaxiib fadhiiso anigaa qabsanayee, wuu iga diiday, balse waan ku adkeeyay, wuu aqbalay, wuuna fadhiistay, markuu gaadhay meeshii uu ubaahnaa ayuu degay wiilkii, lacagtii

gaadhigana bixiyay, kadib ayuu igu yidhi:- waan kaa bixiyay lacagta ee ogow, mahadsanid mas'uul ayaana ugu jawaabay!!!.

Waxaan fadhiistay booskii uu kakacay, markii lagaadhay halkaan usocday ayaan degay, waxaanse arkay wiil yar oo ay kadhimantahay lacagi, uuna ku dhegganyahay kirish-boygii, lacagtii aan ugu talagalay inaan iskaga bixiyo gaadhiga ee ii hadhay ayaana siiyay kirish-boygii kuna idhi:- sii-daa cunuga oo hoo lacagta!!!.

Keliya odaygii ayuu shidhka uga degay deetana waxa bilawday qofba qofka kale inuu caawiyo, una sama-falo, adigu wanaagga bilow, isagaa tarmayee!!!.

WAA NOOLE KULA MID AH!!!



Xayawaankan kuu muuqda waxa jiidhay gaadhiga hore oo gaadhsiiyay dhaawaca ka muuqda, dadkii meesha ka ag-dhowaa waxa ay ku xoomeen darawalka gaadhiga, balse nasiib xumo qofna uma iman xayawaankan dhibbanaha ah, waxaana runtii wax laga xanuunsado ah sida uu xayawaankaasi u eegaayo qofka sawiraaya, waxaana ka muuqata in uu ka sugayo in uu caawiyo oo uu u miciino!!!.

Waa sidan dhaqanka dadka badankood, maantana weliba siibadan, oo waxa ay miskiinka dulman ka jecelyihiin daalimka jeebka buuran, ee kafeejignow in aad kusifawdo dhaqanka ashkhaastaas!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SUBXAANA-LLAAH!!!



Wuxuu ahaa wiil dhallinyaro ah oo wax ka barta dalka urdun, kuna soo koray diin la'aan iyo in uusan Allah swt aqoonsanayn, maalin maalmaha kamid ah ayuu ardaydii isugu yeedhay isagoo doonayay inuu waddada xaqa ah ee islaamka ka weeciyo, waxa uuna yidhi:- haddii Allaha aad aamisantihiin uu yahay mid jira, hal saac kadib nafta ha iga qaado, waxa uuna fiiriyay saacaddiisa, isagoona daqiiqadihii ay maraysay tusinaaya ardayda (subxaana-llaah)!!!.

Wax waqtigu uu socdaba waxa lagaadhay saacaddii uu sheegaayay, welina ma-uusan dhiman, waxa uu markale yidhi:- waad ujeediin, saw ma ahan in Allah swt uusan jirin (subxaana-llaah), haddii uu jiri lahaa muxuu ii dili waayay?, ardaydii ayaana meeshii ku kala tegay, iyagoo qaarkood la yaaban-yihiin caqli-xumada

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

wiilkan, halka qaar kalena ay leeyihiin Allah swt ayaa sii daynaaya si cuquubadu ugusii badato!!!.

Ardaygii ayaa isaguna gurigiisii aaday, waxa uu guriga ugu tegay hooyadiis oo cunto u diyaarisay iyo aabihiis oo sugaya, waxa durbadiiba lagu yidhi:- gacmaha iska soo dhaq, cuntada adiga yaan kula sugaynaye, suuliga ayuu aaday si uu isagasoo maydho gacmaha, waxaana durbadiiba laga war helay wiilkii oo istaaga ka dhacay suuliga dhexdiisa, isla markaana naftu ka baxday si deg-deg ah, baadhitaan dheer oo lagu sameeyay sababta dhimashadiisa keentay ayuuna dhakhtarkii ogaaday in ay dhegta biyo ka galeen xilligii uu waji-dhaqanaayay, waxaana cad oo culimada caalamku ogaadeen in dameerka haddii dhegtiisa biyo galaan uu dhinto, taas oo lamacno ah in Allah swt lamid yeelay dameer dhegta biyo ka galeen, arrintan ayaana noqotay mid aad loola yaabay, oo wax badan laga qoray wadamada islaamka, gaar ahaan waddanka urdun, (subxaana-llaah).

Allah swt wuu jiray, wuu jiraa, wuuna jiri-doonaa, ee kafogow kana feejignow shayaadiinta makhluuqa insiga iyo jinkaba ee ku hawlan ilbidhiqsi-walba in ay xaqa tashuush kaaga furaan, kuna waydaariyaan dariiqa xaqa ah ee aad ku taagantahay, Allah swt ha innagu sugee!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

YAA ALLAH NA-HANUUNI!!!



Qisadani waxa ay ka dhacday Waddanka Sacuudiga, meesha feysaliya layidhaahdo ee magaalada Riyaad ay kutaallo, waa meel aad u qurux badan oona lagu iibiyo waxyaabaha qaaliga ah, gabadh joogtay halkaas ayaa waxa ay xidhnayd dhar aad u qafiif ah jidhkeeduna uu kadhex-muuqdo, waxa meesha soo galay nin sheekh ah, gabadhii ayuu arkay, kolkaas ayuu dhinaceeda aaday oo uu kuyidhi:- naa Alle swt ka cabso, hadduu malakul-mawdku kuu yimaaddo adi oo sidan uqaawan, oo raggu sidan kuu daawanayaan, maxaad yeeli?, kadib inta ay dhoolla-caddaysay ayaa waxa ay tidhi:- hoo telefoonkayga oo wac Rabbigaa (Subxaana-llaah), waxaanaad ku tidhaahdaa:- malakul mawdka keen!!!.

Shiikhii wuu naxay, isaga oo argagaxsan ayuuna kabaxay meeshii, intii uusan albaabka dhaafin ayuuna waxa uu maqlay qaylo aad udheer, markiiba wuu soo laabtay, mise waaba gabadhii oo dhulka taalla oo wejiga udhacday, markiibana naftu ka baxday, dadkii meesha joogay ayuuna isugu yeedhay oo uu usheegay isaga iyo gabadha waxii dhex-maray, dhammaan dadkii meesha joogay ayaana oohin la ilmeeyay, goobtiina way kabaxeen iyaga oo ooyaaya!!!.

Subxaana-llaah, yaa Allah khaatumada khayr noogu khatin, wll goor-walba iyo goob-walba aynu Allah swt kacabsanno, wixii uu raalli kayahay ee uu ina farayna kudedaalno, wixii cadho-gelinaaya ee uu innaga reebayna kafogaanno, marwalbana aynu diyaar u-ahaanno masiibada Allah swt uu xikmaddiisa inooga qariyay ee mawdka.

Yaa Allah na-hanuuni adi ayaa wax hanuuniyee.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAAD QURUX-BADANTAHAY!!!



Waxa ay ahayd gabadh uu Ilaahay swt ku mannaystay qurux, weliba quruxdeedu qurux way dhaaftay oo aad ayay uqurux-badnayd, balse maysan ugu mahad-niqin Allah swt, oo jidhkeeda ayay soo muujin jirtay, markay aadayso jaamacadda waxay usoo lebisan jirtay sida iyada oo aroos usocota oo kale, markay soo gasho ayaa lawada eegi jiray, ragga qaarna way ku raaxaysan jireen daawashada jidhkeeda, halka kuwona hoos ka nacladi jireen!!!.

Iyadu way ogayd waxan ay samaynayso inuu yahay dembi, balse dhallinyarnimadii iyo shaydaankii ayaa ka xoog badiyay, waxay baraheeda-bulshada soogelisaa sawiro ay iskasoo qaaday, qaar indhahaagu ma aanay qaban-karayn oo si xad-dhaaf ah ayay jidhkeeda umuujisay, wiilasha ayaa ukala tartami jiray faalada sawiradeeda, iyagoo odhanaaya:- maansha Allah, waad qurux-badantahay, markay

aragto hadaladaas ayay kasii qaadi jirtay dhiirri-gelin oo mar kale ayay soo gelin jirtay sawirba sawirka kale ee uu kasii qaawan yahay lana arkaayo jidhkeeda!!!.

Sida caadadu ahayd ayay soo aaday jaamacaddii, balse maxaa dhacay, waxa layidhi:- waxa la aadayaa dalxiis, waxay is-raaceen asxaabteeda oo isugu jira wiilal iyo gabdho, muusiga gaadhiga ka shidan kor ayay uqaadeen, fara ka ciyaarka kasocda gudaha gaadhigu wuu badnaa, markay socdeen cabbaar ayaana waxa dhacday in gaadhigii si kedis ah gaadhi kale ugasoo hor boxo, kaleexidii uu is-yidhi darewalkiina derbi ayuu lagalay, gaadhigii ayaa jabsaday darbigii siina jiidhay meelo kale, waa lagusoo yaacay, mise dhiig ayaaba qul-qulaaya hoosta gaadhiga, wax badbaadayna maleh!, waxa labilaabay in lasoo bixiyo maydadkii, gabadhii ayaa jidhkeedii oo wada dhiig ah lasoo bixiyay loona keenay reerkoodii, waxa layslasoo wadaagay sawiradeedii qaaqaawanaa ayadoo ladhahaayo:- way dhimatay, wiilashii dhihi jiray:- maansha Allah, waad qurux badantahay, ayaana hadda soo qoraaya:- Allah swt ha cafiyo, khaatumo xumo ayay ku dhimataye!!!.

Shalay waxay odhanayeen:- maasha Allah, waad qurux-badantahay ee maanta maxaa is beddelay, xaqiiqdu markay timaaddo been oo dhami meesha way ka baxaysaa, runta ayaana indhaha la iska saarayaa ka xumow ama haka xumaanine!, dadkanina ama bulshadanina iyaga ayaa Allah swt adduunkan markhaati uga ah, sida uu Allah swt kalaamkiisa kariimka ah inoogu shaagay, waxbana kuu tari maayo wiil ku dhaha:- waad qurux badan tahay, waxba kuu tari mayso ragga magaalada oo aad indhahooda qabsato, dunidan shalay ayaad timid, maantana waad joogtaa, barrina waad kasocotaa, haddaba maxaa kaaga horreeya aakhiro ayaa muhiim kuu ah (diid ama yeel), ee taas ku xisaabtan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

WAXBA MA ARKAAYO!!!



Waxa ay ahayd gabadh Ilaahay swt ku mannaystay qurux iyo hab-sami wanaagsan, haddana waxay ahayd gabadh indhoole ah oo aan waxba arkin, wiil ka mid ah wiilasha badanaa xumaanta jecel ayaa ogaaday in ay inantani indho la'dahay oo aanay waxba arag, waxa uu damcay inuu inantii fara-xumeeyo, waxa uu ogaaday in wiilka la dhashay inanta ee kax-kaxeeyaa uu malinta axadda ka maqanyahay guriga, wuxuuna qoondaystay malintaa inuu inanta utago!!!.

Waxay gaadhay malintii axadda, wiilkii waxa uu yimi gurigii oo uu usoo dhacay, inantii oo keligeed joogta ayuu arkay wuuna afduubtay oo gaadhi ayuu ku ritay, waxa uu la tegay gurigiisii, wuxuuna ku yidhi:- in aad ii fasaxdo inaan ku fara-xumeeyo iyo inaad idiido oo aan khasab kugu kufsado!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Gabadhii yarayd way oyday, waxaanay ku tidhi:- walaal Ilaahay swt ka baq oo iska-kaydaa, maya, maya, ayuu ugu jawaabay, kadib waxay ku tidhi:- waayee hal codsi ayaan wataa, waa maxay ayuu ugu jawaabay, waxay ku tidhi:- laba rakcadood aan tukado markaa waxaad doonto samee!, waaye dhakhso oo tuko ayuu ku yidhi, inantii salaad ayay gashay, intii ay salaadda ku jirtay ayay Alle swt ka bariday inuu ka badbaadiyo cadawgan, markii ay labadii rakcadood dhammaysatay ayay hareeraha eegtay, waxay is lahayd askar iyo cidbuu Alle swt kuusoo diri, laakiinse may dhicin, ninkii halkan ayuu ka qaylinayaa, maxaa kugu dhacay ayay ku tidhi:- wuxuuna ugu jawaabay:- waxba ma arkaayo!!!.

Miskiinaddaa aragiisa ayuu ugu awood sheegtay, Allena swt isagii ayuu aragii uu ku caasiyay ka qaaday, Allahu Akbar!, sidaas ayuuna Allah swt uqabtaa daalimiinta, Allah swt innagama yeelee!!!.

SIYAASI LAMA RUMAYSAN KARO!!!



Waxa rogmaday bas ay saarnaayeen xildhibaanno iyo siyaasiyiin, waxa goobta soo gaadhay boolis, laakiin nasiib darro waxay arkeen ama lakulmeen nin beeralay ah oo goobta ka ag-dhowaa oo dadkii oo dhan duugay (xabaalay/aasay), si amakaag leh ayayna u waydiiyeen:- waar dadka wax nooli kuma jirin miyaa?!, ninkii beeralayda ahaa ayaana ugu jawaabay:- wallaahi ma-umalaynaayo, qaarbaase lahaa waar waanu noolnahay, laakiin siyaasi lama rumaysan karo!!!.

Waa qisso katurjumaysa waaqaca maamul ee dunida maanta kajira, xukunkii iyo xilkiina waxa loofahmay been, xatooyo, wax-isdabamarin iyo khiyaamo, halkii uu ka ahaan lahaa mid umadda iyo bulshada loogu adeego, waxoodana loogu hagaajiyo, ee hagaaji oo wanaaji hadba intii iyo wixii mas'uul lagaaga dhigay, adna Allah swt ayaa ku hagaajin labada daaroodba'e (if iyo aakhiroba)!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

XAGGAAD KATIMAADEEN!!!



Laba wiil oo dhallinyaro reer Madiina al-Munawara ah ayaa waxay u safreen dalka turkiga si ay ugusoo raaxaystaan oo ay usoo cabbaan khamri, markii ay tageen ayaa waxa ay aadeen meel tuula ah oo leh jawi deggan, waxay ka kiraysteen hoteel, ninkii joogay soodhowaynta hoteelka ayaana waydiiyay:- xaggaad ka timaadeen, waxay ku yidhaahdeen:- Madiina al-Munawara, intii uu ka kirayn lahaa qol keliya ayuuna siiyay qayb dhan oo kamid ah hoteelka karaamayn uu ku karaameeyay Nebiga NNKH iyo reer Madiina ahaan awgeed!!!.

Wiilashii qolkoodii ayay galeen, mid ayaa aad u cabbay, midna waxoogaa ayuu cabbay! (subxaana-llaah), 04:00 am oo aroornimo markii ay ahayd saacaddu oo la adimaayay salaaddii subax ayaa lagusoo garaacay albaabka, midkii aan aadka ucabin ayaa furay albaabka asagoo ili ushidan tahay ilina ka dansantahay!, mise waa

ninkii hoteelka hayay oo ku yidhi:- waxa la idinka sugayaa masaajidka si aad u tujisaan salaadda subax, sababtoo ah imaamkii misaajidku markii uu maqlay inaad joogtaan, wuu diiday inuu na-tujiyo salaadda subax ee waanu idin sugaynaa!!!.

Shoog ayaa ku dhacay wiilkii, wuu naxay kii hurday ayuuna toosiyay isaga oo leh:- waar Qur'aan ma taqaan?, ninkii ayaa kusoo laabtay oo haddana ku yidhi:- maxaa idin helay, salaaddu intaysan caddaan noo yimaadda, way qobaysteen, masjidkii ayay soo galeen, mise waa salaad jimce oo kale, dad aad ufarabadan ayaana jooga!!!.

Waa la salaamay, mid ayaana galay salaaddii:- dadkii oo dhan ayaa wada ooyay, oo xasuustay masjidkii Nebiga NNKH, wiilkiina isna wuu la ooyay, waxaana uu ku tujiyay faataxada iyo Ikhlaas-ka, markii uu ka baxay salaadda ayaana waxa kusoo yaacay dadkii, oo wada salaamay wiilkii!, labadii wiil mid kamid ah ayaana noqday daaci aad u yaqaan Diinta Islaamka!!!.

Rabbigeen swt ayaa inoo sheegay in ay salaaddu reebto xumaanta iyo munkarka, Allah-na swt ha inaga yeelo kuwa xafida salaaddooda xaalad walba oo aynu ku jirno, Allah-na swt marka uu ku hanuuninaayo, hanuuna uu kula doono waxa lagayaabaa meel aad uyar ama aanad filaynba in uu kaa hanuuniyo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAY SHARFEEN, IYANA WAA LASHARFAY!!!



Qoys sabool ah oo ka kooban nin iyo xaaskiisa ayaa ku dhaqnaa deegaan ka mid ah baadiyaha fog ee waddanka ay ku noolaayeen, qoyskani diinta Islaamka aqoon saasa uma aysan lahayn, laakiin waxa ay ahaayeen muslimiin, walow aysan baranin Qur'aanka kariimka ah iyo qaybaha kale ee cilmigaba, waxa ay arurin jireen lacag ay muddo dheer ku kaydinayeen meel xafidan oo gurigooda ka mid ah, waxaana ay jeclaayeen in maalin maalmaha ka mid ah ay wax u tari doonto lacagtaasi ama ay ku intifaaci doonaan!!!.

Markii la gaadhay waa dambe oo ay lacagtii yara korodhay, wax sidaas u sii badana aysan gaadhin ayaa lasoo bixiyay bal si loogu adeegto, ninka iyo xaaskiisu aad waxa ay ujeclaayeen islaamnimada iyo in ay Qur'aanka bartaan, iyagoo kawada-

xaajoonaaya lacagta ay muddada arurinayeen waxa ay ku samayn-lahaayeen ama shayga ay kusoo gadan lahaayeen ayaana waxa markii dambe la gaadhay go'aan wax-ku-ool ah, haweenaydii ayaana keentay fikrad ahayd in lacagtan yar ay kusoo furtaan kitaabka Quraanka kariimka ah, maadaama aysan waligood gurigooda keenin kitaabka, isla markaana aysan waxba ka aqoonin!!!.

Ninkii aad ayuu usoo dhaweeyay ra'yigaas wuuna ku raacay, isla maalintiina waxa ay soofurteen kitaabka Qur'aanka kariimka ah, markii guriga la keenay kitaabkii ayaana waxa soobaxday caqabad kale oo aad u wayn, waana in labadooduba aysan akhrin karin kitaabka, isla markiiba xal ayay heleen, waxaana ay ku tashadeen in markii maalinta xigta la gaadho ay kitaabka qaadaan oo ay la tagaan dugsi uu macallin joogo si loo baro, waxa kale oo jirtay caqabad kale oo ahayd in gurigooda uusan oolin wax miis ah ama meel kale oo daahir ah sarraysana oo ay kitaabka dhigaan, waa dad islaam ah oo waxa ay ogaayeen in kitaabka Qu'raanka ah ee sharafta leh uusan u qalmin in dhulka la dhigo, haddii sidaas la sameeyana ay ka dhalan karto ciqaab adag oo xaga Alle swt uga timaadda, waxaana la gaadhay habeen-nimadii oo ah xilligii la seexanaayay, kitaabkana meel la dhigo ma laha gurigoodu!!!.

Ninkii ayaa markan keenay fikradda looga bixi lahaa caqabaddan taagan, wuxuu talo ahaan kusoo jeediyay in habeenku maadaama uu yahay 12 saacadood ay 6-da saac ee hore haweenaydu soo jeeddo kitaabkana ay hayso, 6-da saac ee kalena uu ninku soo kaco kitaabkana qabto, xaaskiisuna ay markaas seexato, waana laysku raacay fikirkaas!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Sidii ayaa la sameeyay, waxa baryay waagii, laakiin ma taqaanaa cajaa'ibta dhacday iyo mucjisada meeshaas kasoo if-baxday, markii ay subaxdii soo kaceen waxa dhacday mucjiso layaab leh, taas oo ah in ninkii iyo xaaskiisiiba ay soo-tooseen iyaga oo wada xafidsan dhammaan kitaabka Qur'aanka kariimka ah iyo tafsiirkiisaba, (Allaahu akbar)!!!.

Maxaa ka cajiibsan, yaase ka nasiib badan labadaas lammaane, darajada intaas leeg waxa uu Alle swt ugu karaameeyay sida ay u xafideen kitaabkiisa Qur'aanka ah, iyo sida ay usharfeen niyadana uga jeclaadeen, waana in aynu ixtiraam siinno kitaabka Qur'aanka kariimka ah oo uu ku qoranyahay hadalkii Allah swt, qisadanina waa mid cajiib ah, muujinaysana mucjisaadka Qur'aanka kariimka ah ee qawlka Eebbe swt iyo weliba awoodda Alle swt.

MALAHAAGA WANAAJI!!!



Waxa uu ahaa nin aad uqani ahaa oo xoolo badan lahaa wakhtigii uu noola, kadib ayaamuhu siday isku bed-bedelayeen wuxuu noqday nin faqiir ah, maalin maalmaha kamida ayaana waxa ay xaaskiisii ku tidhi:- maaan arag dad ka xun walaalahaa iyo asxaabtaada, ninkii wuulayaabay wuxuuna ku yidhi:- waa maxay sababta aad hadalkaa uleedahay, waxayna ugu jaawaabtay:- sababtu waxa weeye marka aad nin qaniya noqotid asxaabtaada iyo walaalahaa way badanayaan, marka aad nin faqiira noqotidna oo aynaan waxba haysanina sidaasay kaaga tegayaan, wuxuuna ugu jawaabay oo uu ku yidhi:- wallaahi dad ka akhlaaq fiican maan arag, maxaa yeelay markay ina arkaan in aynu awoodno in aynu maamuusno oo aynu hayno wax aynu ku maamuusno way inoo yimaadan (macnaha marka dad qaniya aynu nahay), sidoo kale marka ay arkaan in aynu nahay dad aan haysanin wax aynu

kusoo dhowayno oo aynu ku maamuusnona way inaga tagaan, taasina waa wanaagnimadooda!!!

Xaaskiisii aad ayay ulayaabtay malahiisan wanaagsan, nin kamida dadkii saalixiinta ama wanaagsanaa ahaa ayaana mar uu qisadan faaallo kabixinaayay wuxuu yidhi:- bal fiiriya ninkani sida uu ficilka xun ee lagu sameeyay uga dhigay ficil wanaagsan oo ay sameeyeen dadkii xumaa, taasina waxay ina tusaysaa qalbigaaga oo malaha xun ka nabadgalaa waa raaxada adduunyada iyo qaniimo aakhiro!!!.

Malaahaga wanaaji, kana fagow malaha xun ee uu shaydaanku ku beeraayo qalbigaaga!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

MAANAA MINDIYO LAY QARSHAA, LAYGU QALI DOONO!!!



Waxa ay ahaayeen laba nin oo deris ah, mid waxuu ahaa nin beeralay ah oo faqiir ah, halka midka kalena uu ahaa nin hantiile ah, ninka faqiirka ahi waxuu ahaa nin noloshiisa ku raaxaysta oo farxad ku nool, xilliga habeenkii ah markuu seexanaayo albaabka qolkiisa iyo daaqadda qolkiisa ma xidhan jirin, kan kalese waxa uu layaabanaa ninka dariskiisa ah ee sidan yare e fudud isaga seexanaaya, aad ayuuna ugasoo horjeeday farxadda uu ninkani ku nool yahay!!!

Maalin maalmaha kamida ayuu u yeedhay, waxaana uu siiyay lacag qasnad ku jirta, waxa uu ku yidhi:- saaxiib waxaan arkaa in aad ku nooshahay nolol faqiirnimo ah, waxaana rajaynayaa in aad lacagtan meel kagasoo bixi doonto, ninkii faqiirka ahaa waa farxay, wuuna ka qaatay lacagtii, habeenkii markii waqtigii

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

seexashada lagaadhayna albaabkii iyo daaqadihii qolkiisa oo dhan waa uu wada xidhay, hurdo la'aan ayaa ku dhacday oo lacagtii la siiyay ayuu cir iyo dhulba u diiday!, markii waagii caddaaday ayuuna lacagtii qaaday oo yidhi:- saaxiib, hoo lacagta, dhibna hayga qaadanin ee waxaan ahay faqiir, lacagtanina hurday ii diiday!!!.

Sikasta oo aad lacag u haysatid waxyaabaha aanad gadan-karin ayay farxaddu kamid tahay, farxadduna kuma xidhna lacagta sida dadka qaar ay uhaystaan ee waxa ay ku xidhantahay qanaacadda shakhsiga, sidaa oo ay tahayna raadi qanaacad, halkii aad karaadin-lahayd lacag iyo hanti!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HAKA CABSAN KELIYA CADAWGA KUSOO WEERARA, BALSE LASOCO SAAXIIBKA BEENTA AH EE HAB-KUSIINAAYA!!!



Waxa ay la seexatay mas ay aad u jeceshahay saaxiibna la tahay, maska dhererkiisu waa illaa afar mitir oo aad u caafimaad qaba, maskii wuu xanuunsaday, wuxuuna joojiyey illaa dhawr usbuuc inuu wax cuno, waxna cabbo, haweenaydii saaxiibka la ahayd maska aad ayay uniyad-jabtay, si kasta oo ay cunto usiisana waa uu diiday, markii dambe ayay ugaysay dhakhtarka xayawaanka si uu udaweeyo, dhakhtarkii si fiican ayuu u dhegaystay haweenayda, wuxuuna waydiiyay:- maskaagu ma kula seexdaa habeenkii, ma isku kaa duubaa, mana isku kaa dhereriyaa?, haweenaydii oo yaabban rajo badanina kamuuqato ayaa tidhi:- haa!, haa!, sidaas ayuu sameeyaa maalin kasta, waana ka murugoodaa, maxaayeelay

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

waxaan dareemayaa inuu wax iwaydiinaayo, anna ma-caawin-karo si uu ufiicnaado!!!.

Intaas kaddib dhakhtarkii ayaa ku yidhi haweenaydii:- arrin naxdin leh oo aanad filayn ayaad ka badbaaday, marwo maskaagu ma jirrana, ee wuxuu u diyaargaroobaayay inuu ku cuno, wakhti kasta oo uu hab-kusiinaayayna ama iskukaa-duubaayayna wuxuu tijaabinaayay culayskaaga, cuntadana wuxuu ujoojiyay inuu helo meel faaruq ah si uu deg-deg kuugu liqo ama kuugu cuno!!!.

Dadka kuu dhaw ee aad jeceshahay waxay lahaan karaan ujeeddooyin qallafsan, waa inaad kala ogaataa maska kuu dhaw iyo ujeedkiisa, habsiinta iyo dhunkashaduna inbadan oo kamid ahi daacadnimo ma aha!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

XAASID!!!



Labo nin ayaa aad isu necbaa oo cadaw isku ahaa, maalin ayay badda ku kulmeen, mid ayaa meel god ah ku dhacay, midkii kale ayaa badbaadiyay, markaasuu midkii la badbadiyay yidhi:- saaxiib cadawnimadii inaga dhaxaysay maanta ayay dhammaatay, maadaama oo aad isoo badbaadisay maanta, midkii kale ayaana ugu jawaabay:- waxaan kuusoo badbaadiyay ma'ahayn inaynu heshiino, balse waxaan maqlay qofkii biyo ku dhintaa waa shahiid ehlu-janno ah!!!.

Cajiib, wax waliba waxa ay leeyihiin dabaqado iyo heerar kala sar-sarreeya, tanina waa mid kamid ah heerarka sare ee xaasid-nimada, oo runtii ah dhaqan aad uxun oo ay Diinteenna suubban ee Islaamkuna inaga reebtay haddaynu nahay umadda muslimiinta, ee lajeclow walaalkaa waxa aad naftaada lajeceshahay, markaas ayaad adna guulaysanaysaa labada daaroodba'e (if iyo aakhiroba)!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

SADAQADDAADII WAA LA AQBALAY!!!



Waxa uu ahaa nin wanaagsanaa oo cibaado badan, kaas oo maalin go'aan kugaadhay:- inuu sadaqo ulabaxo Ilaahay swt dartiis si uu uhelo raalli ahaanshihiisa, shardina wuxuu kadhigtay inay sadaqadiisu ahaato mid ikhlaas ama niyad-badhax-tiran ah oo aan istus-tus kujirin iyo inuu siiyo miskiin dhawrsan oo aysan cidi ogayn inuu baahanyahay iyo inkale!!!.

Si uu shardigaas uga dhabeeyo, ayuu doortay goor aysan dadku arkaynin iyo habeenimo, wuxuu wareegaba oo baadi goobo maskiinkii dhawrsanaa ee aysan cidi ogayna ayuu markii dambe kusoo baxay nin uu isyidhi:- malaha waa mudanyahay sadaqada, oo uu farta kasaaray sadaqadiisii, subixii markii lagaadhayna

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

mise dadkii uu sadaqada kaqarinaayay ayaa isla dhexmaraaya:- waar belaayo badanaa, xalay nin tuug ah ayaa sadaqo lasiiyay!!!.

Ninkii sadaqada labaxay ayay sheekadii dadku gaadhay oo weliba aad uga xumaaday, haseyeeshee wuxuu kugaabsaday:- Ilaahayow adigaa kumahadsan haddaad sidaas garatay, waayo anigu ma ogayn inuu tuug ahaa iyo inkale ninkaan wax siiyay, ninkiina wuxuu go'aan kugaadhay inuu markale wax sadaqaysto si uu ugaadho hadafkiisii maadama tii-hore kudhacday gacan khaldan (waa siduu aaminaye)!!!.

Isaga oo digtooni iyo feejignaan kaqaba inuusan tuug dambe sirin ayuu kusoo baxay qof dumar ah oo is-yidhi:- way dhibban tahay, kadibna farta ayuu kasaaray sadaqadii, haddana dadkii magaaladu waa kuwan ayagoo subixii wareejinaaya:- xalay naag zaaniyad ah ayaa sadaqo lasiiyay!, sadaqadii habeen hore lasiiyay tuuggana tanaaba kadaran!!!.

Ninkii ayuu haddana warkii gaadhay, sidoo kale aad ayuu uga xumaaday, laakiinse Ilaahay swt ayuu kumahadiyay isagoo leh:- Ilaahayow adigaa kumahadsan haddaad sidaas garatay, aniguna magaranaynin inay gabadhu ahayd dadka xun-xun ee kugu-caasiyay!!!.

Ninkii yaab iyo amakaag ayaa kasoo hadhay, isagoo iswaydiinaaya meeshay wax kakhaldanyihiin iyo cida dabataagan ee kakharibaysa sadaqadiisa, hase ahaatee wuxuu kudhiirigeliyay naftiisa markale inuu sadaqo labaxo oo kuhubsado

qof miskiin ah oo mudan silooga aqbalo oo uu ugaadho hadafkiisii ahaa:- raalli ahaansha Rabbi swt!!!.

Wareeg iyo kafiirsasho badan kadib ayuuna soo dul-istaagay qof uu isyidhi:- waa dhibane aan u eekayn tuuggii iyo qoftii xumayd ee hore aad ugu khaldantay, kadibna farta ayuu kasaaray sadaqadii, markale waa kuwan dadkii oo lawareegaaya sheekadoodii:- ninkii magaalada ugu taajirsanaa ayaa xalay wax lagu sadaqaystay!, ninkiina yaab ayaa kasoo hadhay, wuxuuna dareemay in meesha imtixaan kasocdo, wuxuuna yidhi:- llaahayow adigaa kumahadsan sadaqada kudhacday gacanta tuugga, zaaniyadda iyo taajirka, kadibna sadaqadii ayuu ka istaagay si aanu dad xun-xun oo kale gacantooda ugu dhicin!!!.

Goor uu xaalku halkaas marayo, ayaa hurdo manaam ama riyo loogusoo diray farriintan loogu fasiraayo sida ay wax udheceen:- bishaaro, marka hore sadaqadaadii waa la aqbalay!, marka labaad, ninkii tuugga ahaa ee aad wax siisay, waxay unoqotay sabab uu kaga dhawrsado xatooyada xoolaha dadwaynaha, baahi ayaana ugaysay tuuganimada, qoftii dumarka ahayd, waxay unoqotay sabab ay suuqa kaga baxdo, baahi ayaana ku kalliftay inay hawshan kaganacsato, ninkii maal-qabeenka ahaa wuxuu ahaa qof bakhayl ah oo aan masaakiinta waxba kutarin, sadaqadaadii ayuuna kucibra-qaatay, oo wuxuu bilaabay inuu wax kutaro masaakiinta baahan!!!.

Allah swt waxa uu eegaa niyadda iyo qalbiga ee ma eego ficilka ee wanaaji niyaddaada iyo qalbigaaga kuna hag dhammaan ficilladaada, adiga oo aqbalka Allena swt rajaynaaya!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

CIDDA FAHAMTAABA ISKA-YAR!!!



Waxa qabay nin shiikh ah oo dadka wacdiya, iyadu markasta oo ay uur qaado ilmuhu wuu kasoo dhici-jiray, maalin maalmaha kamid ah ayaa waxa ay aaday suuqa si ay usoo iibiso hilib ay wadaadka siiyo, markii ay gaadhay suuqii ayaa ninkii hilib-laha ahaa waxay ku tidhi:- waxaad keentaa hilib fiican oo aad u jilicsan, hiliblihiina wuu kagaday hilibkii ay ka dalbatay, intii aanay kasoo tegin meheraddii hilibka ayaa waxay aragtay islaan wayeel ah oo aad u tamar-daran oo taagan meheradda agteeda, waxay is-tidhi:- islaantaa ku sadaqayso hilibkan aad wado, go'aan ayayna ku qaadatay, wayna ku sadaqaysatay hilibkii islaantii waayeelka ahayd!!!.

Gabadhii dib ayay ugusoo laabatay guriga, arrinkii ayay usheegtay odaygeedii, wuxuuna ku yidhi:- Alle swt ayaa meel kale inaga siinaaya waxaas aad

inoo sadaqaysay, inyar kadib uur ayaa ay qaaday, sagaal bilood kadibna waxa ay dhashay canug, farxad ayay isla dhex-mareen, waxay raadiyeen islaantii wayeelka ahayd ee ay sadaqada siiyeen, waa lasoo helay si loo waydiiyo waxa ay samaysay markii lasiiyay hilibkii, waxayna tidhi:- hilibkii aad igu sadaqaysatay anna waxa aan kusii sadaqaystay dad iga tamar-daran oo aan socon karin, adise waxaan Ilaahay swt kaaga-baryay inaad hesho wax walba oo aad jeceshahay!, gabadhii ayaana tidhi:- markasta waxaan jeclaa inaan arko ubad aan anigu dhalay oo nool, ducadaadiina Alle swt ayaa ii aqbalay!!!.

Diinta Islaamka sadaqadu waa qodob wayn, wax wayna Allah swt lagaga helo, waana mid kamid ah waxyaabaha muraadada wan-wanaagsan Allah swt lagu waydiisto, waana mid wax-badan loogasoo joogay dabaqaadeeda, ee hakuu noqoto mid kamid ah tiirarka aad kuraadisid raalli ahaanshaha Alle swt.

ALXAMDULILLAAH!!!



Saadi Shirazi oo ahaa gabayaa caan ahaa ayaa waxa uu yidhi:- marnaba kama aanan murugoon nolosha iyo dhibaatooyinkeeda markii laga reebo hal maalin oo aan soconaayay aniga oo caga-cad (cagaagan ama kabo la'aan ah), kadibna waxa aan arkay beer kabo ah, waxaanse awoodi-waayay in aan iibsado, balse markii aan gudaha u galay masjidkii waynaa ee Kuufa waxa aan dareemay qalbi xanuun iyo murugo, waayo waxa aan u' ooyaayay in aanan haysan kabo, balse waxa aan arkay nin aan lugoba lahayn!!!.

Run ahaantii nolosha waxa ka buuxa waxyaabo badan oo ina-farxad gelinaaya, nimcooyin uu Alle swt innagu deeqayna ah, oo weliba aan xisaab iyo caddad-toona lahayn, balse intooda badan badi dadku waxa uu dareemaa nimcooyinkaa kadib marka uu waayo, haddaba waxa habboon qofku in uu ku qanco

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

qaddarka Alle swt, arrimihiisana uu Allah swt udhiibto, kadibna uu yidhaahdo:- alxamdu-lillaah, alxamdu-lillaah, alxamdu-lillaah, waayo Allah swt waxa uu inoo ballan-qaaday haddii aynu kamahad-celino nimcooyinkaa uu inasiiyay in uu inoo kordhin doono!!!.

Alxamdulillaah.

AQBAL MAS'UULIYADDA FICILADAADA!!!



Waxa uu yidhi:- garoon wayn aniga oo ciyaar ka daawanaaya maalin ayaa waxa i dhinac fadhiyay wiil dhallinyaro ah, wuxuu taageere u ahaa laacib lambar 10 xidhan, mar kasta oo kubad lugtiisa soogasha uu gool ku dhalin waayona waxa uu eedda saaraa ciyaaryahankii usoo baasay isagoo leh:- baaska ayuu ka gaabiyay ama dhaafsiiyay iwm, haddii kubad laga qaatona wuxuu eedeeyaa ciyaaryahanada kasoo horjeeda isagoo leh:- si gaar ah ayay u beegsanayaan iwm, marka uu khalad galo waxa uu eed dusha kaga tuuraa garsooraha, mar uu gool ku laad dhalin waayay, wuxuu eed kulul usoo jeediyay taageerayaasha in aysan dhiirigelin oo si fiican ugu sacab tumin, khalad kasta oo uu sameeyo laacibkaas uu taageersanyahayna ma rabo in uu qirto, wuxuuse rabaa in uu eedda cid kale saaro, mar kastana wuxuu u samaynayaa cudurdaar!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Dad badani waa sidaa, waxay jecelyihiin in ay cid kale ku eedeeyaan xaaladahooda, guuldarradooda, fashilka soo gaadha, khaladka ay sameeyeen iwm, waxay ka cararaan in ay mas'uuliyadda khaladkooda qaataan, waxayna wax kasta u yeelaan cudurdaar!!!.

Gabadh ayaa nin xidhiidh kala dhaxeeyay xumaynayaa, waxay eedda saaraysaa rag oo dhan, iyadoo leh nin la aamino ma leh raggu, nin ayaa gabadhi xumaynaysaa wuxuuna eedda saarayaa dumar oo dhan, isma aysan odhan inta aadan eedda saarin cid kale, maxaa khalad ama dembi ah oo aad adigu samaysay?, Illeen wax kasta sabab ayay ku dhacaan dunidane, noloshana ma jirto cid ama qof aad ku eedayn karto dhib kadhashay khalad aad adigu samaysay, waa adiga qofka gacantaada ku kasbaday, waa adiga qofka sameeyay doorasho khalad ah, waa adiga qofka qaatay go'aan xun, waa adiga qofka runta ka cararay, waa adiga qofka mas'uuliyaddiisa aan gudan, sidoo kale waa adiga qofka iska joojin kara cabashada iyo eedda, waana adiga qofka isbeddel nafeed samayn karaa!!!.

Haddaba, Jooji in aad ku eedayso dadka kale xaaladda aad ku sugan tahay, aqbalna mas'uuliyadda ficiladaada, qaadona lahaanshaha natiijada ka dhalatay khaladkaaga, qofna kuma lihid khasab in uu wax kuugu sameeyo ama sidaad rabtay yeelo, guushaada iyo fashilkaagaba adiga ayaa ka mas'uul ah, Jooji oohinta iyo eedaynta, Jooji sugidda in wax kastaa u dhacaan ama noqdaan sidaad rabtay, ma jiro wax bilaash lagu helo, noloshu waa imtixaan, wax badan oo dhacaa ma aha awooddaada, waxna kama beddeli kartid sida dabaysha, kulaylka, barafka, dabeecadaha iyo dhaqamada dadka kale, ee qaado mas'uuliyadda naftaada, Jooji eeda badan, bilowna in aad ficil dhanka wanaagsan iyo horumarka ah samayso!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HADALKA XUNI WAXA UU SABABI-KARAA GEERI!!!



Nin faqiir ah ayaa yimi suuqa isaga oo raba inuu wax ka iibsado, waxa uu waydiiyay ninkii dukaanka haystay waa immisa rubuc-kiilooga tamaandhada ahi, waxa uu ku yidh:- waa $0.25 doolar, waxa uu ku yidhi:- rubuc-kiloogu waa igu qaali ee wax kasii-yar iga iibi, inta uu ku qoslay ayuuna ku yidhi:- maxaad kasoo doontay suuqa hadduu rubuca xabuubi qaali kugu yahay, orodoo iskaga dhex bax suuqa!!!.

Inan yar oo lasocotay uuna dhalay ninkii faqiirka ahaa ayaa ku tidhi:- aabbo inoo iibi cuntada waan gaajoonayaaye, ninkii odayga ahaana indhihiisa ayay ilmo iskusoo taagtay, wax uu sameeyana waa uu garan waayay, dhulka ayaa kusoo yaraaday maskaxdiisuna boqol su'aalood ayay is waydiisay, kadib dhulka ayuu ku

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

dhacay, waanuu suuxay, dadkii ayaa kusoo ururay, dhakhtarka ayay uqaadeen, mise nafiba kuma jirto oo waa mayd!!!.

Hadalka xuni wuxuu gaysan karaa xattaa in qof u dhinto daraadii, ee goob-kasta iyo goor-kastaba hagaaji oo wanaaji hadaladaada iyo ficiladaadaba, Diinteenna suubanina waxa ay ina baraysaa xittaa in hadalka wanaagsani uu yahay sadaqo, ajar iyo xasanaadna xagga Alle swt lagaga helaayo.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

HOOYO, HOOYO, HOOYO!!!



Wiil dhallin-yaro ah ayaa soo galay meherad si uu alaab uga iibsado, inankii waxa uu arkay gabadh si aad ah u eegaysa, waa uu yaabay, waxaanuu ku yidhi:- hooyo maxaan kuu qabtaa, waxayna ku tidhi:- waxaad u-eegtahay inankaygii geeryooday, xittaa hadalka, inankii ayaa ilmo soo qabatay, wuxuuna ku yidhi:- hooyo adduunyadu waa safar ee iska samir, gabadhii ayaana ku tidhi:- intaanan kaa tegin wax makaa codsadaa hooyo, inankii ayaa ugu jawaabay:- iga codso, waxayna ku tidhi:- sidii inankaygu samayn jiray igadaba dhawaaq oo idheh:- hooyo, hooyo, hooyo, niyadaydaa ku degaysee!!!.

Gabdhii way dhaqaaqday, inankiina waa uu kadaba-dhawaaqayay isagoo leh:- hooyo, hooyo, hooyo illaa ay ka baxday, isagii oo indhihiisa ay oohini ka

muuqato ayuuna tegay maqalkii, inankii maqalka hayay ayaana ku yidhi:- lacagta aad qabtaa waa $13 doolar, hooyadaana waxay qabtaa $20 doolar!!!.

Inankii waa uu yaabay, waxaanuu yidhi:- hoyaduna waa tee, wuxuuna inankii maqalku ku yidhi:-dee taad iminka kadaba dhawaaqaysay, inankiina sidiibaa lacagtii lagaga tiriyay!!!.

Kaartooyinka ay isticmaalaan dadka usoo foof tegay dhaca xoolaha umadda ee aanay lahayni aad ayay ufara-badanyihiin ee inbadan ka digtoonow!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

KEE TUUG AH!!!



Darawal ayaa istaagay meel laami ah qarkiisa oo gabadhi ku iibinaysay digaag si uu uga iibsado, markii ay heshiiyeen ayaa wuxuu ku yidhi:- gadaal ka fur gaadhiga oo digaagadda ku rid, kaddibna iikaalay si aan lacagta kuu siiyo!!!.

Gabadhii gaadhigii ayay gadaashiisa furtay xoogna way uxidhay iyada oo iska dhigaysa inay digaagaddii ku riday, laakiin ma aysan ku ridin!, markii uu darawalku maqlay jugta xidhitaanka albaabka dambe ee gaadhiga wuxuu u qaatay in digaagaddii loogu riday, kadib xoog ayuu udhaqaaqay isaga oo raba in uu miskiinta lacagtii kala cararo!!!.

Haddaba, labadooda kee tuug ah, waayaha waddada ay wax ku gadayso iyada oo qof dumar ah ayaa waxa ay bareen hab-dhaqanka iyo dabeecadaha kuwo

badan oo damiir-laawayaal ah, casharro iyo waayo-aragnimo badan ayayna ka ururSatay, taas oo usaamaxday in ay ku fahamto, kana hortagto shirqoolkii uu rabay in uu ku dhaco xoolaheeda, isaga oo ceebaysan, waxna aan helin ayuuna murugadiisa lahoyday!!!.

Nolosha agadi waa tababar kuu socda adiga!!!.

WADDANI AYAAN AHAY!!!



Markuu buuxsamay tareenkii kasoo baxayay faransiiska una socday ingriiska si lama filaan ah waxa is ag-fadhiistay gabadh faransiis ah iyo nin ingriis ah, gabadha cabsi iyo wal-wal ayaa wejigeeda ka muuqday, ninkii ag-fadhiyay ayaa wuxuu ku yidhi:- maxaad u wal-walsantahay, waxayna ugu jawaabtay:- lacag toban kun oo doolar ah ayaan wataa lamana ogola in wadanka lagala boxo, ninkii wuxuu ku yidhi:- inoo kala qaybi, ciwaankaaga guriga aad degaysidna isii, haddii aan la ibaadhin qaybtayda waan kuu keenayaa, meeshii ayayna lacagtii ku kala qaybsadeen!!!.

Markii lasoo gaadhay askartii meeshii ay joogtay ninkii isagaaba u yeedhay askartii, wuxuuna ku yidhi:- gabadhani lacag badan oo aan la ogolayn ayay wadataa,

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

qaybtana anaa u haya, intii kalena iyadaa haysa, mana jecli waddankayga in la khiyaamo, waddani ayaan ahay!!!.

Askarigii wuu baadhay gabadhii, mise waaba run oo waa siduu ninku sheegay, lacagtii ayuu ka qaaday, ninkiina wuu u mahad-celiyay, wuxuuna ku yidhi:- sidaas ayaa lagaa rabaa, wadaninimaduna hakugu waynaato!!!.

Markii ingriiska la gaadhay laba maalin kadib ninkii wuxuu tegay gabadhii gurigeeda, markaas ayay ku tidhi:- maba xishoonaysid miyaa, indha adagidaa, maxaad igasoo doontay, ninkiina intuu dhoolla-caddeeyay ayuu u dhiibay buqshad ay ku jirto shan iyo toban kun oo doolar, wuxuuna ku yidhi:- waxaan watay boorso lacag 3 milyan oo doolar ahi ay ku jirto, markaa taas ayaan u baqay in la baadho ee raalli ahaw!!!.

Mararka qaar qofka ka hadlaaya waddaninimada waxa laga yaabaa inuu isaguba tuug wayn yahay oo ku dhuumanaaya, waabana sida maanta loobadanyahaye, in badana kafiirso cidda aad usir-sheeganayso iyo cidda aad macluumaadkaaga khaaska ah lawadaagayso, waayo haddii aanad sidaas samayn waxa lagayaabaa in wejigii aad kasugaysay ama aad kafilaysay aad mid kaduwan kala kulanto!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

SOO DHAKHSO!!!



Nin beeralay ah ayaa beertiisa ku qabtay tuug guranaaya dalagga ka baxa beerta, wuxuu go'aansaday inuu saldhigga geeyo, intii ay dhexda kusii jireen ayaa tuuggii yidhi:- fadlan kab ayaan kusoo hilmaamay beerta dhexdeeda ee masoo qaadan karaa?, ninkii beerta lahaana wuxuu ugu jawaabay:- soco oo sooqaado halkan ayaan kugu sugayaaye oo soo dhakhso!, cabbaar ayuu sugay, kadibna wuxuu ogaaday in tuuggii baxsaday oo uu doqonnimo sameeyay!!!.

Ninkii beerta lahaa gurigiisa ayuu iska aaday, wuxuuna sheekadii dhacday usheegay walaalkiis ka wayn, walaalkiina dhirbaaxo ayuu ku dhuftay, wuxuuna ku yidhi:- maxaad ugu dhihi wayday tuugga isug anigaa kabta beerta kaagasoo qaadayee!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Haddaba, yaa doqon ah?, ma ninka beerta leh mise walaalkii?!!!.

Garashada, xikmadda iyo garaadku kuma xidhna da'da iyo waynaanta, balse waa cidda uu Allah swt geliyo, da'da ay doontoba hajirtee, ku dhex-jirka arrimuhuna waxa ay keenaan khibrad iyo waayo-aragnimo, waana takeentay in tuuggaasi uu markiiba fahmo in uu ninka wada ee raba in uu soo xidho uu yahay doqon iyo qof uu khiyaamayn karaayo, aqoonta iyo khibradduna labaduba waa muhiim, sidaa daraadeed xaalad-walba, goor iyo goob walba dareenkaaga iyo feejignaantaadu hasarrayso!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

TUUG, TUUG MAXADO!!!



Laba nin oo tuug ah ayaa saxiibo ahaa oo weliba aad isugu dhowaa, labada nin waxa ay kuwada jireen hal makhsin oo ay kiraysteen, waxa ay unoolaayeen sida dadka caadiga ah, midna muu shaqaysan jirin, haddana quutul-daruuriga waa ay heli jireen, balse habeen habeenada kamida ayaa labadii nin oo makhsinkoodii yaraa dhexdiisa jiifa oo weliba uu mid ahaani hurdo kakalena soo jeedo waxa usoo dhacay nin kale oo tuug ah ismarkaana raba in uu xado, toos ayaana uu usoo abaaray gurigii, nasiib-darrose guriga labadan nin ee tuugta ah umayaalaan wax alaabo ahi, marka laga reebo kiish ay labada tuug wada lahaayeen oo ay ku ururin jireen dhammaanba alaabta ay soo xadaan!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Ninkii tuugga ahaa ee guriga soo galay waxa uu toos u abaaray kiishkii guriga dhex-tiirsanaa, waxa uu isku deyay in uu qaato kiishka iyo weliba waxa ku jira, waa uu qaadi kari waayay, waayo kiishka waxa ku jiray alaab aad ubadan, aadna uculus, waxa uu damcay in uu badh kamid ah alaabta kiishka ku jirta ka shubto si uu culaysku uga yaraado, waxa uu labaxay shaadhkii oo uu dhulka dhigtay si uu alaabta kiishka ku jirta badh ugaga shubto, halkaas markii ay arrintu marayso ayaa uu aayar soo kacay labadii nin kii jiifay ee aan hurdini waxaana uu ka hoos siibay shaadhkii uu ninku dhulka dhigtay!!!.

Ninkii tuugga ahaa ayaa is-yidhi ku shub haddaba alaabtii, cajiib, waxa uu waayay shaadhkiisii, waxaana uu bilaabay in uu raadiyo shaadhkii si uu ugu qaato alaabta, baadhitaan badan kadib ayaa uu daalay oo iska fadhiistay, labadii nin kii hurday ayaa ku kacay Jaqaf-Jaqaftii tuuggu markuu shaadhkiisii baadhaayay, markaasuu yidhi isaga oo saxiibkii lahadlaaya:- waar maxaa sanqadhaaya, malaha guriga tuug ayaa ku jira, saaxiibkii ayaana ugu jawaabay:- waar tuugna majoogee iska seexo, markaasaa kii tuugga ahaa ee guriga ku jiray soo booday oo yidhi:- waar haddaanu tuug ku jirin ayaa xaday shaadhkaygii!!!.

Way la go'day, soomaalidu waxa ay ku maah-maahdaa, tuug, tuug maxado, oo looga yeedo yacni way is kaarto fahmayaan, markaas isma khiyaamayn karayaan, in uu wax dhaco ayuu usocday, balse isagii ayaa ladhacay, wuu kashifay isaga oo aan haddana waxba wax dhibaato ah ugaysan, kelmad adagna hanoqotee, caqli ayuu isticmaalay, walow ay ku qurux-badnayd in uu meel wanaagsan u isticmaalo, samatabaxa noloshuna caqli ayuu ubaahanyahay ee markasta ku dedaal in caqligu ku shaqeeyo!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

WAY LA GO'DAY!!!



Ninka qisadan werinaaya ayaa yidhi:- aabahay oday waayeel ah ayuu ahaa keligay ayuuna idhalay, xilli xilliyada kamid ah ayaa waxa da'ayay goor habeen-nimo ah roob aad uxoog badan, gurigayagu dhoobo ayuu ka samaysnaa, roobabkii ayuuna soo daayay, albaabka guriga ayaa lasoo garaacay, aabbahay ul ayuu ku tukubaayay, albaabkii ayuu furay, waaba nin deris nala ah, aabbahay ayuu udan-sheegtay isaga oo ah nin ay roobabkii wax-yeeleeyeen, aabbo guriga ayuu dib ugusoo laabtay, barkinta ayuu lacag ka bixiyay, qayb ayuu ka siiyay, intii kalena barkintii ayuu ku celiyay, ninkii deriskuna waa uu eegayaa!!!.

Ninkii ayaa waxa hunguri ka galay lacagta meesha ku hadhay oo uu arkayay, waxa uu maleegay qorshihii uu lacagta inta ka hadhay ku qaadan lahaa!, waxa uu go'aan ku gaadhay in wiilka yar oo aniga ah uu bannaanka iila baxo oo uu

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

roobka i geeyo, markii aan ooyo hooyaday waa ay isoo doonaysaa, markaas in uu guriga galo oo uu aabbahay dilo, kadibna lacagta qaato!, sidii ayuu yeelay, bannaanka ayuu wiilkii ku tuuray, isla markiiba cunuggii oohintiisii ayay hooyadii maqashay, waxa ay la hadashay odaygii oo ay ku tidhi:- waxa ooyayaa waa cunuggii ee bannaanka yaa geeyay?, soo bax aaynu soo xeraynee wiilka, waxa uu odaygii ku yidhi:- adigu soo xaree, anigu waan sii joogayaaye, waa ay ka diidday oo ay ku tidhi:- wiilkaygii ma socon ee bannaanka wax kale ayaa geeyay, waana in aad i raacdaa!, sidii ayay kusoo bexeen, mar allaale markii ay bannaanka tageen oo ay wiilkii oo nabad qaba u tageen, ayaa tuuggii guriga usoo daba maray, markii uu is yidhi lacagta qaado oo uu gacanta ku dhigay ayaana gurigii gebi-ahaantii kusoo dumay!!!.

Odaygii iyo xaaskiisii waxa ay maqleen jug xoog leh, haddii ay fiiriyeena waaba gurigoodii oo dumay, xaaskii waxa ay tidhi:- waxa cunugga bannaanka geeyay waa malaa'iig oo rabtay in aynaan guriga ku dhiman!, guri deriskooda ah ayay habeenkii seexdeen, markii waagii beryay ayaana dhammaan deriskii isusoo bexeen, si ay dhibta meesha kadhacday ufiiriyaan, waxaana la arkay ninkii deriska ahaa oo isaga oo lacagtii gacanta ku haya gurigu uu ku dumay oo mayd ah!!!.

Dhagar samee ayuu is lahaa, Rabbi swt ayaana ku celiyay dhagartiisii! (subxaana-llaah), shirqool xun ayuu maleegaayay, Allaha Jabbaarka ahina swt waa uu eegaayay! (Allahu akbar), wax sadaqayso, waayo sadaqaddu waxyaabaha uu Allah swt kuugu beddelaayo ayaa waxa kamid ah in dhib kugusoo socday uu Allah swt kaaga joojiyo, kana feejignow, welibana inbadana kafogow seerayaasha uu Allah swt inaga reebay!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

QOF KASTA XAQIISA SII!!!



Waa boqor, waxa uu qabay afar xaas, waxa uu aad u jeclaa midda afraad ee ugu yar, jacayl waali ah ayuu jeclaa, wax walba oo ay ka dalbatona wuu usamayn jiray si uu u raalli-geliyo, midda saddexaadna wuu jeclaa, balse waxa uu dareemi jiray in maalin uun ay qof kale ka raaci doonto, midda labaad waxay ahayd mid marka uu dhib ku dhaco uu usoo ordi jiray iyo wakhtiga duruufuhu jiraan, wuu la tashan jiray, iyaduna way la qaybsan jirtay dhibkiisa, laakiin midda 1aad xaqeeda ma uusan siin jirin, ayaduna way jeclayd, jacayl xad-dhaaf ah, waxayna u ilaalin jirtay hantidiisa, ilmihiisana xaqiisa way dhawri-jirtay!!!.

Waxa xanuunsaday boqorkii, waxuu dareemey in ay soo dhawaatay geeridiisii, waxuu ku fikiray waxa aan leeyahay afar xaas, mana jecli inaan qabriga

keligay galo, xaasaskiisa middii afraad ayaa wuxuu waydiiyay:- anigu waan ku jeclahay, xaasaskayga kale adiga ayaan kaa jeclahay, wax walba oo aad rabtidna waan kuu samayn jiray ee raalli maka tahay inaad qabriga igu wehelisid?, waxayna ugu jawaabtay:- waa wax aan caqliga gelaynin, wayna ka carartay isla markiiba, ayada oo weliba xanaaqsan!!!.

Tii saddexaad ayaa timi, waxuu ku yidhi:- waan ku jeclaa intii aynu is qabnay, waxaana kaa codsanayaa inaad ii raacdid qabriga?, waxayna ugu jawaabtay:- nolashu way macaantahay ee haddaad dhimatid nin kale ayaan iska guursanayaa, waxa timi middii labaad waxuuna ku yidhi:- mar walba adiga ayaan kuusoo ordi jiray marka ay dhibi i haysato, maanta waxaan kaa codsanayaa inaad qabriga igu wehelisid?, waxayna ugu jawaabtay:- aad ayaan uga xumahay, mana awoodo inaan dalabkaaga kuu yeelo, balse waxaan kuu awooda inaan qabriga ku gaadhsiiyo oo keliya!!!.

Boqorkii aad ayuu u murugooday, inyar kadib ayaa waxa uu maqlay cod ka imanaayay meel dheer oo leh:- aniga ayaa kuu raacaaya qabrigaaga iyo meel walba oo aad tagtidba, wuu fiiriyay qofka codkaasi kasoo yeedhaayo, waxayba noqotay xaaskiisii koowaad, ayada oo diciif ah oo jirran, sababtoo ah ma uusan daryeeli jirin, aad ayuu uga qoomamooday, waxuuna yidhi:- waxa loo baahnaa inaan mar hore adiga ku dhawro, xaqaagana ilaaliyo, haddii wakhti la isiin lahaana waxaan aad u jeclaan lahaa adiga, waana ku daryeeli lahaa!!!.

Lanoolaanshaha qof aad jeceshahay, balse aan isagu ku jeclayn, waxa 100% kawanaagsan lanoolaanshaha ruux aanad jeclayn, balse isagu ku jecel, sababtoo ah

kan ku jecel yaanad adigu jeclaanbee haddana agtiisa waxaad ka helaysaa naxariis iyo darteel, taas oo ruuxa aan ku jeclayn aanad agtiisa ka helayn, ee aynu ilaashano cidda ina jecel, qalbiyadooda iyo dareenadoodana aynu dhawrno, halkii goor aanay qoomamo waxba tarayn aynu ka shalayn-lahayn wax badan!!!.

Kataxaddir, kana feejignow maanta qoomamada berri!!!.

MAQAAL-TALO ADIGA AYAA KUNOOL EE IYADU KUGUMA NOOLA!!!



Ma beddeli karno wakhtiga, laakiin waxa aynu beddeli karnaa sida aynu u maaraynayno, waxa macquul ah inaad sannado badan kusoo jirtay maalmo isku eeg, 24-kii saac ee shalay oo lamid ah 24-ka saac ee maanta iyo tan barriba, oo aysan jirin wax maarayn ah, wax horumarin ah, subaxdii aad soo kacdo adiga oo aan qorshe lahayn, habeenkiina seexato adiga oo aan waxba qabsan, waxa lagayaabaa in aanad weligaa maqlin cid ku odhanaysa ereyo ay kamid yihiin:- waxaad isu haysataa qof aan muhiim ahayn adigu, maalin walba oo timaadaa waxa ay wadataa qisooyin u baahan in la faago oo la ogaado, waxaana kamid ah qisooyinkaas khibradaha nolosheenu ay soo qaadatay, oo ubaahan in aynu ku dabaqno nolosha maanta kuna gudubno!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

IRRIDAHA GUUSHA (4)

Haddii shalay aad ku fashilantay imtixaanka jaamacadda ama iskuulka, haddii shalay ay jireen guur ama iskuday qoys oo aad ku fashilantay, haddii shalay aad ku fashilantay lacago iyo hawlo aad isku aaddisay saad ganacsi u samayso, haddii shalay aad ku fashilantay safarro aad lahayd ku horumari noloshaada, haddii shalay dad badani ku khiyaameen, maanta waa maalintaadii, maanta waa maalintii ay ahayd inaad dib uhanato naftaada, inaad dib uhanato habka ay usocoto noloshaadu, inaad ogaato inaad tahay muhiim noloshu ay ubaahantahay, haddii aysan dunidani helina ay wax badani maqnaan doonaan, maanta waa maalintii aad aragti noocaas ah aad naftaada ka qaadan lahayd!!!.

Sarrayntu hadday tahay sida boqorku sameeyo, adiguba waxaad tahay boqor, hadii qiimaha iyo wanaaggu uu ku jiro inay dadku ku mahdiyaan oo ku jeclaadaana, adiguba waxaad u qalantaa in lagu jeclaado, adiguba waxaad u qalantaa in lagu aqbalo, adiguba waxaad u qalantaa inay dadku kuu sacbiyaan, adiguba waxaad u qalantaa inaad hoggaamiye unoqoto nolosha dadka kugu hareereesan, umadduna waxay ubaahantahay caqligaaga iyo kartidaada ee ha is dhigan!!!.

Ha fiirin noloshaada, ha fiirin sidaad unooshahay, ha fiirin xaaladda ku haysata, waan ogahay duruufaha guryaha aynu kalasoo kacno, way kala duwan yihiin, laakiin ma kala duwana suurta-galnimada aynu qaban karno, aadamaha cirka tegay ee horumarka sameeyay waddankuu doono haku noolaado ee waxa ugu horreeya ee uu qabtay waa maskaxdiisa oo uu ka dhaadhacsiiyay inuu muhiim yahay, waxna qaban karo iyo wakhtigiisa oo uu maareeyay kuna saleeyay waxa muhiimka u ah!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

Naftaada u layli oo utababar inay dhihi karto ‘maya’ markay mudantahay, ay dhihi karto ‘haa’ markay mudan tahay, waxa macquul ah dhaqamo badan oo aanad jeclaysan noloshaadana kamid ah aadna isleedahay kama guuri kartid, in maalin kamid ah maalmaha oo aad fikirto, dareento dhibta ay kugu hayaan, aad kasaarto naftaada ama habka noloshaadu usocoto, waxaana kamid ah:- wahsiga, waxba ma qaban karo, ma awoodo inaan maareeyo waqtigayga, maan gaadhin xilligaan saa ufikiri lahaa, waan mashquulsanahay, wakhti badan mahaysto, iwm, subaxaana-llaah!!!.

Dad badan way go’aansadaan, way qorsheeyaan, wayna fuliyaan, balse waxay ku guuldaraystaan ma joogteeyaan, laba maalin markuu sameeyo maalin saddexaadda wuuba iska daynayaa, sababahana waxa kamid ah:- waxyaabaha uu sameeyay ee jadwalkiisa ah ayaan ahayn wixii saxda ahaa ee khuseeyay, wuxuu samaynaayo ayuu dadka kale kala tashadaa oo go’aanadiisa asagu malaha oo kamay soo go’in, ama waa iska waxyaabo uu cid kale kaga dayanaayo’uun!!!.

Nolosha bini’adamku waa mid ku dhisan imtixaan dhib badan, adduunyo lagama dhammaado, lagamana dhergo illaa uu qofku ka dhinto oo iilka la dhigo, laakiin dhibaatada adduunka qofba si gaar ah ayuu u wajahaa, kaladhinnaanshaha adduunyadana waxa dhammaystira qanaacada iyo iimaanka, haddaba halkan waxa aynu kusoo qaadan doonaa qaar kamid ah qodobbo ay tahay in aad markasta xusuusnaato oo ay kamid yihiin:-

1) **Haka tegin cabsida Alle swt iyo cibaadada:-** ka hormari waxkasta oo aad qabanayso cibaadada Alle swt, mar kastana xusuuso cabsida Alle swt,

ogowna haddii aad goyso xadhiga Alle swt in wax kastaa dhib kugu noqonayaan.

2) **Xusuuso nimcooyinka Alle swt kugu deeqay:-** Alle swt uga mahad-celi waxa uu ku siiyay ee nimcooyin ah, badanaana waxa Alle swt ina siiyay ee wanaagsan.
3) **Dhibka haka cabsan ee wajah:-** samir badan yeelo oo haddii imtixaan sida:- faqri, carruur la'aan, caafimaad darro iwm ay ku haleelaan, Alle swt unoqo oo samir la'imow, haddii aad samirtona Alle swt waxa uu kuugu bedelayaa wax ka khayr badan, sirta noloshuna waa in farxadda iyo degenaanshaha noloshu ay tahay in aad aqbasho qadarta Alle swt adiga oo daruuf kasta oo kusoo marta aan ka argagixin, mana aha in sidii aad doonaysay ay wax walbaa noqdaan, laakiin waa in aad ka faa'daysato waxa aad heli karto wakhqti kasta!!!.
4) **Ahaw waxa aad tahay:-** dadku waa cajiib, waxa in badan ay jecel yihiin in ay iska dhigaan wax aysan ahayn, ogow in qof kasta Alle swt si gaar ah u abuuray, waxaana suurto gal ah in shakhsiyaddaadu tahay mid qaali ah ee xusuuso waxa aad tahay , Alle swt ayaana kaa dhigay ee marna qof kale ha iska dhigin!!!.
5) **Caqligaaga latasho:-** haddii arrini ay kusoo foodsaarto , ha noqon hawo raac, ka fikir oo iswaydii waxa saxsan ee caqligaagu ku siiyo, wakhtiyada qaarna waxa suurto gal ah in aad u baahan tahay wakhti aad kusoo fikirto marka xaajo ugub ahi kusoo foodsaarto, hana ka xishoon in aad kasoo fikirto arrimaha qaar, haddaad doonto kalasoo tasho cidaha aad ku kalsoontahay, deg-degna faa'iido ma leh!!!.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

6) **Noloshaada kadhig mid aad adigu leedahay:-** samee oo qabo waxa aad jeceshahay ama naftaadu ku qanacsantahay, haddii ay jirto shaqo ama hawl aad hayso oo aanad jeclayna iskaga tag, kuna noolow nolosha aad jeceshahay in aad ku noolaato ee runta ah, Allena swt uu raallida kayahay!!!.

Allah swt hayna hanuuniyo if iyo aakhiroba.

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

TIXRAAC:-

BOGAG - FACEBOOK:-

- **Abdulahi nur Colombo.**
- **Afmaal-akhbaar.plogspot.com.**
- **Tuur yare.**
- **Qisooyin cajiib ah oo aad aqoon badan aad ka kororsan doonto.**
- **Somalidoc.**
- **Sama wade.**
- **Saxardiid xaashi ardaale.**
- **Ali mahad abdi mohamud.**
- **Badmacaan.**
- **Qisooyin waa qici ah.**
- **Qisooyin iyo sheekoyin.**
- **Somali post.**
- **Ahmed abdikarim waayo-arag.**
- **Bulsho times.**
- **Qisooyin jacayl.**
- **Cabdulaahi cisman xuseen.**
- **Maxaa cusub tv.**
- **Qisooyinka diin ah.**
- **Tv-ga dhacdooyinka dunida.**
- **Qisooyin diini ah oo cajiib ah.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

- **Hiigsiga nolosha.**
- **Lone.**
- **Qolka quraanka kariimka.**
- **Qisooyinka diiniga ah.**
- **Shucayb sh.max'ud jabaaye.**
- **Ahmed Ibrahim ahmed.**
- **Qiso iyo murti kaftan iyo sheko.**
- **Qiso real page.**
- **Nasra bintu Suleiman.**
- **Qisooyin jacayl.**
- **Qoso jacayl.**
- **Qarniyaal iyo qisooyin jacayl.**
- **Lamaanaha nolosha.**
- **Adbulkareem ali boltuur.**
- **Qisooyin cajiib a.**
- **Qisooyin dhab ah.**
- **Idaacada asal.**
- **Abdirizak atosh.**
- **Aljasiira news somali.**
- **Dhuubo dhexyar.**
- **Faafinta diinta islaamka.**
- **Hormarka qoyska.**

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong

ASXAAB - FACEBOOK:-

- Muhumud Osman.
- Mcm yare.
- Ahmed Mohammed artan.
- Nuur ahmed islaam.
- Mohamed mursal dahir.
- Mansour ahmedov.
- Abwaan siyaad nirgoole.
- Author jirde.
- Maxamed abdi qaadir shekh.
- Madadal yare.
- Hadhwanaagmedia.com.
- Barocaafimaad.com.

ALLAA MAHAD LEH

DHAMMAAD QAYBTII AFRAAD

LASOCO QAYBTA SHANAAD INSHA ALLAH

Waa buug wax badan noloshaada ka beddeli doona!!!

ururiyaha buugga:- cumar hong-kong